# BARASHADA BILOWGA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH

GUDDIGA SIYAASADDA, BULSHADA IYO X.S.M.G.S.K.

# BARASHADA BILOWGA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH

GUDDIGA SIYAASADDA IYO BULSHADA
IYO X. S. MGSK



**Hantiwadaaggu waa mid keli ah, waana kan cilmiga ah, dal kastana looga fuliyo sidii uu uga hirgeli karo, taas oo u ah fidin iyo ballaarin hantiwadaagga cilmiga ah.**

Madaxweynaha G.S.K.

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

# HORDHIG

Markii la arkay baahida dadweynaha Soomaaliyeed u qabo inuu kororsado aqoontiisa guud ahaaneed, khaasatan aqoonta hantiwadaagga cilmiga ah, isla markaana la tixgelinayo dhibaatada waqtiga aynnu maraynno oo xagga dhaqaalaha iyo kaadirka aqoon sare leh innaga haysata, ayaa waxaa loo baahday in Af Soomaali lagu qoro ama lagu turjumo intii buugag la awoodi karo.

Markaas waxaa Guddiga Siyaasadda iyo Bulshada iyo Xafiiska Siyaasaddu iyaga oo fulinaya tusaalihii Jaalle Siyaad iyo go'aanadii Labada Gole, ugu talo galeen Buuggan kooban dadweynaha xoogsatada ah inuu akhristo ama wax ka barto. Waxa laga baranayaa buugga macluumaad guud ahaaneed oo si wanaagsan kuugu kala sawiraya hantigoosiga, hantiwadaagga, heerka dunidu marayso iyo guulaha iyo ujeeddada Kacaanka 21ka Oktoobar oo ka hirgelinaya Soomaaliya hantiwadaagga Cilmiga ah.

Jaallayaasha dersiga ka bixinaya waxa laga rajaynayaa inay ballaariyaan arrimaha aan si qotodheer loo faahfaahin, kuna baahiyaan aqoonta dadweynaha Soomaaliyeed iyaga oo u sahlaya tusaalena marwalba ka bixinaya waayaheenna.

GUDDOOMIYAHA GUDDIGA SIYAASADDA IYO BULSHADA

Jaalle G/S Ismaaciil Cali Abokar

## TUSMO

### Qaybta 1aad

### SALDHIGA ISKU DULNOOLAANSHAHA


Bogga

1. Hababkii hantigoosiga hortii . . . . » 1
2. Qalabka Tacabka . . . . . . . » 6
3. Habka Tacabka Hantigoosiga . . . . . » 8
4. Dhuuxa isku dulnoolaanta hantigoosiga . . » 10
5. Qiimaha Dheeraadka ah. . . . . » 13
6. Sida qiimaha dheeraadka ah loo qaybsado . » 14
7. Imbeeryaaliyadu waa heerka ugu sarreeya ee Hantigoosiga. . . . . . » 17


### Qaybta 2aad

### HANTIWADAAGGA


1. Hantiwadaaggii Dhalanteedka ahaa . . » 23
2. Dhalashada hantiwadaagga Cilmiga ah. . » 27
3. Waa maxay Hantiwadaaggu? . . . . . » 29
4. Dhismaha hantiwadaagga Cilmiga ah. . . » 31
5. Qawaaniinta Guud ee Hantiwadaagga . . » 35
6. Horseedka Hantiwadaagga. . . . . . . » 40


### Qaybta 3aad

### GUULIHII KACAANKA 21ka OKTOOBAR


1. Horumarinta Beeraha. . . . . . . . » 42
2. Kaalinta iskaashatooyinka . . . . . . » 44

Bogga

3. Ka qaybgalka Shaqaalaha Maamulka Dawladda. . . . . . . . . . . . . » 47
4. Faa'iidada kalluunka iyo khayraadka Badda » 49
5. Kaalinta Guddiyada Kacaanka Gobollada iyo Degmooyinka. . . . . . . . . » 51
6. Hantiwadaagga Cilmiga iyo Kacaanka aqoonta . . . . . . . . . . . . » 54
7. Ujeeddada Ciidamada Nabadgelyada. . . » 58


### Qaybta 4aad

### XAALADDA CASRIGAN


1. Astaamaha Imbeeryaaliyada. . . . . . » 61
2. Dhicidda habka gumeysiga iyo soo bixidda waddammada cusub. . . . . . . . . » 63
3. Gumeysiga cusub. . . . . . . . . » 67
4. Isbahaysiga Carabta iyo Afrika. . . . . » 70
5. Saaxiibtinnimada Soomaaliya iyo Midowga Soofiyeti . . . . . . . . . . . » 73
6. Isbahaysiga Dalalka Hantiwadaagga ah. . » 78

Qaybta 1aad

## SALDHIGGA ISKU DULNOOLAASHAHA

### HABABKII HANTIGOOSIGA HORTII

Taariikhda adduunku waxay soo martey marxalado kala duwan, taasoo lagu qiyaasi karo malaayiin sano). Sida la ogsoonyahay beni-aadamku wuxuu weligii ku noolaa si bulshanimo waxaynu u kala saari karnaa afar qaybood:

1. Jibsin (clan)
2. Qabiil (Tribe)
3. Qoomiyadnimo (Nationality).
4. Qaranimo (Nation).

Waagaas hore dadku waxay u noolaayeen koox koox, isu bedeshay markaas qabiil qabiil ilaa laga gaaray qaranimo (Nations). Haddii aynnu ayada oo kooban wax ka taabano xubnaha aynu kor ku soo sheegay waa sida soo socota:

1. Jibsin (Clan), waa qaabkii ugu horeeyey oo calaamad u ahaa, dad asalkoodu meel ka soo wada jeeday, Af ku wada hadlay, caadooyin wada leh, meelna wada degan. Sidaas oo kale waxay tahay qaabkii ugu horeeyey ee isku keenista qofka. Dhaqaalaha jibsinta, wuxuu ahaa uruurinta, ka dibna xoola dhaqato.

2. Qabiil (Tribe). Waqti ka dib (Jibsintii) ayaa isku ururtay waxayna noqotay (Qabiil), leh Af-keliya, Caadooyin isku mid ah, degsiimo Iwm. Waxaase jirtey in dhaqaalaha qabiilku uu ka horeeyey kan (jibsinta) waxaanuu ku xirnaa dhaqaale iyo xiriir dhiig ah. Sidaas oo kale ayey uga dembeeyeen qoomiyadnimadu iyo qaranimadu, mid kastana waxay lahayd marxaladahooda iyo waayahooda gaar ahaaneed.

**Intaas Marka aan ka gudubno aan hoos uga hadallo hababkii dhaqaale ee Aadmigu soo mararaw.**

Habkii wax wada lahaanshada iyo wax Tacabka

Habkaasi wuxuu ahaa habkii ugu horeeyey ee aduunyadu soo martay. Habkaas qalabka Tacabku hoos ayuu jirey waxaanuu la socday horumarka aadmigu meesha uu joogey. Dadku waxay ku isticmaali jireen dhagax, qoryo iwm.

Qofku awood uma lahayn inuu keligii noolaado wax tabcana, waxayna duruuftu ku khasbaysay in noloshii noqoto mid bulsho ah, Iskaashi iyo wax wada tacab kooxeed. Mar hadii qalabka wax lagu soo saari jirey uu ahaa mid hoos jirey waxa isna yaraa wax soo saaridda iyo kartida ay dadku u leeyihiin inay kaga adkaadaan dabeecadda. Jibsinta (Clan) oo dhani, wixii ay helaan ayey wada qaybsadaan oo dadku wax noloshooda ka badan ma soo saari karayn. Markii horumarku heer gaaray dadkii qaar ka mid ahi waxay bilaabeen inay dhaqdaan xoolo; markaas ayaa waxaa soo baxay (3) kooxood oo kala ah sida hoos ku muujisan:

1. Beero tacabto.
2. Farsamo yaqaano yar yar.
3. Xoolo dhaqato.

Markii wax soo saariddu ay heer sare gaartey (Waqitigii wax wada tacabka iyo wax wada lahaanshaha) waxa dhacday in dadkii ay soo saareen tacab ka badan kii hore oo dheeraad ah, kana badan intii ay u baahnaayeen. Waxayna suurta galisay inay keydsadaan intii dheeraadka ahayd, taasoo ay hantiyeen madaxdii. Waxaa kale oo ka dhexdidilaacay jibsinihii waagaas dagaalo iyo weerarro isdabajoog ah. Halkaas waxaa ka dhashay in la addoonsado dadkii la soo qafaashay lagagana shaqeeyey beerihii, halkaas oo tacabkii beeruhu sii kordhay. (Dhammaadkii ama dumistii habkii wax wada lahaanta iyo wax tacabka). Arimahaa aan soo sheegnay gaar ahaan tacab siyaado ah iyo Adoontii ayaa keenay dhamaadkii habkii wax wada lahaanshada iyo wax wada tacabka.



**Habkii-is-addoonsiga:**

Dhammaadkii habka wax wada tacabka iyo wax wada lahaanshada, waxa uu keenay soo bixitaanka habka is addoonsiga. Habkaas is-addoonsiga waxaa soo baxay «dabaqdo (classes) iska soo horjeedda, oo aan isku dan ahayn, waxayna kale yihiin:

1. Dabaqad wax addoonsan jirtey.
2. dabaqad la addoonsan jirey.

Dadka addoonta ahi waxay ka shaqayn jireen tacabka beeraha. Markii ay dareemeen cadaadiska lagu hayey waxay jajabin jireen qalabkii ay ku shaqayn jireen.

Qalabkaas laftiisu hoos ayuu jirey dhinaca tarada iyo tayada intaba. Waxaase dhacay inay farsamadii ay kortey iska hor imaadkii dabaqiga ahaana adkaaday, markaana uu socon kari waayey habkii is-addoonsigu, markii ay ka gilgisheen addoontii, ayagoo diidey inay ku noolaadaan sidii hore oo ay ku noolaayeen.

Habkaasi waxuu ahaa mid aad u dheer, horumarkiisuna wuu koobnaa, Marka loo eego habkii dhaqan dhaqaale oo ka dembeeyey.

**Habkii Dhulgoosiga:**

Habka dhulgoosigu, wuxuu soo if-baxay markii uu socon kari waayey habkii Is-Addonsigu; taasoo iska soo horjeedkii adoonta iyo kuwa wax addoonsan jirey ay heer adag ka gaareen; markaasna ay noqotay in laga gudbo habkii Is- addonsiga. Habkaas waxaa jirtey laba dabaqadood oo ah:

1. Dhulgoosato.
2. iyo beerley.

Dhulgoosatadu waxay ku dul noolaayeen beeraleyda waxayna ka qaadi jireen waxyaabaha aynu hoose ku soo shegi doono:

1. Kirada dhulka.
2. Doonfuul.
3. Kirada lacagta.

1. Kirada dhulka: Markii hore beeraleydu waxay ka shaqayn jireen beeraha dhulgoosiga, halkaasoo xoogga beeraleyda uu qaadan jirey «dhulgoostuhu».

2. Doonfuul: Berdeydu waxay kireysan jireen dhulkaas, markaas miraha ay soo saaraan ayey qaadan jireen dhulgoosatadu.

3. Kirada Lacagta: Markii ay socon weydey labadaas arrimood ee hore aynu u soo sheegnay ayaa dhulgoosigu ku qasbeen beeraleyda inay suuqa geeyaan waxay soo saaraan, markaasna lacag ahaan ugu keenaan kirada beeraha ay tabcanayaan. Habkaas waxa kale oo soo baxay culuun badan oo gogol dhig u noqotey horumarka aadamiga. Waxyaalahaas oo dhammi waxay ka dhigeen lama huraan burburka habkii dhulgoosiga iyo soo bixitaanka habka hantigoosiga.

Habkii Hantigoosiga: Habkaas wuxu tirtirey habkii ka horeeyey oo ahaa dhulgoosiga, waxaanu ahaa hab ka horusocodsan hababkii ka horreeyey. Waxaanu horumar ka sameeyey xagga isku furista adduunka, samaynta jidadka iyo isgaarsiinta oo gaartey heer wacan. Sidaas oo kale habkaasi wuxuu abuuray wershado waa wayn oo ay ka shaqeeyaan shaqaale fara badan, waxayna isugu keentay dadweynihii kala firidhsanaa labo dabaqadood oo waa weyn (Hantigoosad iyo Shaqaale) wuxuuse hantigoostuhu gacanta ku dhigay qalabkii wax soo saaridda, taasoo u suurta gelisay inay xukumaan, caddaadiyaanna, bulshada inteeda kale.

Haddii aynu si kale u niraahno: shaqaalaha oo aan lahayn, wax kale, xooggooda mooyaane, ayaa lagu qasbay inay u shaqeyaan hantigoostaha si ay u helaan wax ay ku noolaadaan. Habkaas waxaa halgan aan naxariis lahayn iskaga soo horjeeda shaqaalaha iyo burjuwaasiyadda. Halkaasoo ay shaqaaluhu doonayaan inay tirtiraan hantigoosiga si ay u helaan nolol u qalanta kuwa tacbka soo saara (Xoogsatada).



Xoogsatada adduunku ayagoo raacaaya baaqii abwaanadii hantiwadaagga waxay ku guuleysteen inay ka gacan sareeyaan hantigoosatada, taasoo maalinba maalinta ka dambeysa ay soo kordhayaan guusha ay gaaraan. Sida la ogsoon yahay wax soo saarridda hantigoosatada waxay tahay mid ku fadhida sidii ay maalqabeenku u heli lahaayeen macaashka iyo faa'iidooyin u dan ah inta yar oo iska leh qalabka wax lagu soo saaro, sidaa awgeed halganka shaqaalahu waxba kuma waayayo aan ahayn silsiladaha ku xiran oo ka go'aya. Hantigosadku waxuu ka bilymbay dalalka Yurub qarnigii 16naad, waxaanu ku wada faafay Yurub oo dhan qarnigii 19naad, halkaasoo bilowgii qarnigan 20aad uu gaaray raadeeyeyna adduunka intiisa kale.

Bilowgii qarnigii 20aad hantigoosigu waxuu isku beddeley imbiriyaaliyadda, taasoo V.I. Lenin uu si ballaaran ugu macneeyey buuggiisa (Imberiyaaliyaddu waa heerka ugu sareeya ee hantigoosiga) Lenin waxuu caddeeyey inay Imberiyaaliyadu gaartey Heerkii ugu sarreeyey uguna dambeeyey isla markaana waxuu tusaaleeyey gabagabada waqtiga ah xaaladaha waqtigan casriga ah.

Waxay imberiyaaliyaddu mas'uul ka tahay labaddii dagaal ee caalmiga ahaa. Ilaa maantana way sii wadaan gardarooyinkoodii iyo qalalaasehoodii.

Lenin wuxuu yiri: «baabi'inta ama tirtiradda hantigoosiga iyo daba dhilifkeeda, samaynta ama dhismaha nidaamka cusub ee hantiwadaagga waa bilowgii casriga cusub ee taariikhda adduunka. Lenin wuxuu ku tilmaamay waqtigan inuu yahay, casriga si cilmi ah loo qorsheeyey, waqtiga laga gudbaayo, hantigoosiga, waana waqtiga burburka imberiyaaliyadda, waa waqtiga baabi'inta habka gumeysiga, waa waqtiga dad badan iyo dawlado badani ay u soo gudbayaan kuna soo biirayaan habka hantiwadaagga. Habka dhaqan dhaqaale ee hantiwadaaggu waxuu soo if-baxay ka dib markii kacaankii weynaa ee hantiwadaaggu uu ka guuleystey dalka Ruushka, 1917 kaasoo albaabada u furay dhaqdhaqaayada kacaanada ah, isla markaana dhaawac aan kasoo kicis lahayn u geystey habka hantigoosiga. qalabka wax lagu soo saaro waxaa leh dadweynaha xoogsatada, Beeraleyda iyo xubnaha kale oo ay isku tiirsan yi-

hiin. Xoogga wax soo saarridda iyo xiriirka wax soo saarridda habka hantiwadaagga waa qaar is leh oo aanay ka dhexeyn iska horimaad. hantiwadaaggu waxuu tirtirayaa lahaanshada gaarahaaneed, ma jiro habka hantiwadaagga koox ama dabaqad ayadu ku dul nool buxnaha kale,oo iska leh qalabka wax lagu soo saaro.

Habka hantiwadaaggu waxuu ka soo horjeedaa isku-dulnoolaadka oo dhan, waxaanu ku socdaa qorshe la habeeyey oo dadka u suurto gelinaaya inay ku noolaadaan caddaalad, sinnaan, horumar iyo barwaaqo. hantiwadaaggu waxuu ku xiran yahay cilmiga, dhinaca tacab soo saarridda iyo abaabulka dhaqaale intaba.

## QALABKA TACABKA

Sida la wada ogsoon yahay nolosha aadamigu waxay soo martay dhowr heer oo kala geddisan, ha noqoto xagga dhaqanka amaseba xagga dhaqaalaha. Hase yeeshee mar kasaba waxaa sii wanaagsanaanayey heerka nolosha, waayo waxaa sii kordhaayey garashada aadamigu uu garanayo habka uu uga faa'iideysanyo dabeecadda ku heeraaran ee uu ku dhex noolyahay.

Haddii uu dadku berigii hore isaga noolaa miraha u soo dhaca iyo kuwa uu gacanta la gaari karo oo qura, markii ay geedka meel sare kaga yaalliin waxay noqotay in uu la kaashado hankool, sidaasoo kale markii ay yaraadeen miraha iskood u baxaa lagama maarmaan noqotay in beero uu qoto, mar kastana wuxuu la kaashan jirey qalabka kala duwan uu ka helo dabeecadda, dabeecadana uu ka shaqeeyey una habeeyey si uu xoog yar u bixiyo hawl badanna ugu qabsado.

Halkaa waxaynu ka garaneynaa in horumarka qalabka wax soo saariddu mar walba uu la socdo koritaanka iyo horumarka garaadka xoogga wax soo saara (dadka). Sidaa darteedna wuxuu soo maray heerar badan oo kala geddisan, kuwaasoo la xiriira heerarkii uu soo maray isbeddelka dhaqanka iyo dhaqaalaha bulshadu.

Waqtigii bulshadu bilowga ahayd iyo waqtigii is-addoonsiga waxaa la socday:



— Barashada ka faa'iideysiga hankoolka iyo dhagaxa,

— Helidda iyo ka shaqeyntii birta,

— Isticmaalka xoogga xoolaha.

Waqtigii dhulgoosadka iyo horraantii Hantigoosadka waxa la socday:

— Horumarka habka qodidda beeraha,

— Horumarka farsamada gacanta (artigianata);

— Ka faa'iideysiga xoogga wax dhaqaajiya;

— Isticmaalka xoogga qiiqa iyo korontada.

Sidaa darteed, waxa muuqata in horumarka iyo isbeddelka dhaqanka iyo dhaqaalaha bulshadu uu mar kastaba la xiriiray horumarka laga gaarey qalabka wax soo saaridda. Hawl kasta waxay ka kooban tahay dhowr shaqo amase dhowr xubnood oo horay looga soo shaqeeyey waxaana ka qeyb gelaya alaabo kala geddisan.

Waxaynu ogsoonahay, si loo sameeyo kursi in la soo maray dhowr heer, waxayna qaadan jirtay muddo dheer, iminkana inkasta oo ay bateen laamaha ka qeybgelaya, misana dhowr daqiiqo ayaa lagu diyaariyaa. Taasna waxaa lagu gaaray horumarka qalabka lagu shaqeynayo iyo horumarka farsamada, waayo aragnimadu waxay caddeysey in kor u qaadidda iyo horumarinta heerka nolosha aadamigu ay ku xiran tahay horumarka laga gaaray qalabka wax soo saaridda, kaas oo ka kooban qalabka shaqada iyo xoogga shaqeynaya.

Haddaba si aadamigu u gaaro horumar deg-deg ah oo mar walba sii siyaadaya waxa lagama maarmaan ah in si dhab ah looga faa'iideysto xubnaha uu ka kooban yahay qalabka wax soo saariddu (Qalabka lagu shaqeeyo, iyo xoogga shaqeeya).

Taasna waxaa la gaari karayaa marka aan dullaal ku kala dhex jirin, marka qof kastaa uu ogsoon yahay in shaqada uu qabanayo faa'iidadeeda nin uusan gaar ahaantiis u qaadanaynin, qof kastaana danihiisu ay ku xiran yihiin danaha dadweynaha.

Sida taariikhdu caddeysey, maantana indhahayaga aynu ku aragno, horumar dhan walba ah oo aan dabeecaddu hakin karin waxaa la gaari karayaa markii qalabka wax soo saariddu uu gacanta ugu jiro dadweynaha (misaal: waxa u ah dhibaatooyinka dunida ka taagan iyo sida aysan u saameyn waddammada hantiwadaagga ah).

## HABKA TACABKA HANTIGOOSIGA

Habka tacabka hantigoosadku sida aan ognahay wuxuu ka soo dhex baxay habkii dhulgoosadka. Hantigoosadku wuxuu soo maray laba heer oo waaweyn:

a) Heerka hore oo lagu magacaabo heerkii ka horreyey monoboliga.

b) Heerka dambe oo ah heerkii monoboliga ama **Imberyaalisimka.**

Labada heer waxay wadaagaan tilmaan dhaqaale oo ah: qalabka wax lagu soo saaro oo dad gaar ah ay leeyihiin, iyo ka faa'iideysiga xoogga shaqaalaha laakiin labada heer waxyaalo badan oo ay ku kala duwan yihiin ayaa jira.

Waxaa ka mid ah: Heerka monoboliga ka horreeyey dalalka hantigoosadka ah waxay lahaayeen xorriyadda tartanka suuqa iyo laamaha wax soo saaridda kala duwan. Heerka dambe ee Imberyaalisimka (Monopoly capitalism) oo ah heerkii u dambeeyey hantigoosadka, waxa baaba'a xorriyadda tartanka xagga suuqa, waxaana beddela tacabka oo meel keliya ku uruura, halkaa waxaa ka abuurmay (boqorradda lacagta ee wershadaha, laamaha kala duwan ee soo saaridda, suuqa adduunka iyo moodka qeyriin oo (boqorrada)) gacanta u gala, kuwaas oo ah nimanka iska leh sherkadaha monoboliga ah. Habka tacabka hantigoosadka waxa saldhig u ah badeecad (Commodity), wax kasta oo jira mujtamac hantigoosadka ah, laga billaabo waxa ugu yar (irbadda iwm.) ilaa waxa ugu weyn xataa xoogga shaqaalaha waa badeecad. Sidaa awgeed tacabka habka hantigoosadka waxaynu ka billaabeynaa badeecad.



**Abuuridda ama soo saaridda badeecada.**

Erayga badeecad waxaa looga jeedaa alaabta dadku tacbo aaneyse uga jeedin in ay iyagu isticmaalaan ee ay suuqa u iib geeyaan iyaga oo lacag amase alaabo kale ku beddelanaya.

Badeecaddu waxay la dhalatay habkii is-addoonsiga, habkii dhulgoosiga way jirtay waxaase intii labadaas hab lagu jirey ka xoog roonaa dhaqaalaha dabeeciga ah. Dhaqaalaha dabeeciga ahi waa ka dadku iyagoo qoys qoys ah waxa ay tacbaan iyagu isticmaalaan; haddii ay wax kale ku beddeshaanna aanay uga jeedin macaash ka kordhista.

Sidaa ayaa marka lagu dhaqnaa ilaa la soo gaaray ama uu soo baxay habka hantigoosadku. Markii uu soo baxay habka hantigoosadku wuxuu ka dhex dhashay habkii dhulgoosadka; waxaanu baabi'iyey dhaqaalihii dabeeciga ahaa, wuxuuna xoojiyey soo saariddii badeecadda, wax kasta oo jirana waxay noqdeen badeecad markaana xiriirka dadka ka dhexeeya marka ay wax soo saaraan wuxuu noqday xiriir badeecadeed.

Si aan taas u garanno aan ka soo qaadno xiriirka asaasiga ah ee hantigoosadka (ka faa'iideysiga hantigoosatada xoogga shaqaalaha ama xiriirka muruqa iyo raasamaalka). Si hantigoosadku uga faa'iideysto xoogga shaqaalaha marka hore waa inay helaan badeecad badeecadaha kale ka duwan oo awood gaar ah u leh inay badeecad kale abuurto oo ay badeecad kale dhasho, badeecaddaas waa muruq shaqaale. Sidaa darteed shaqaalaha waa la gadanayaa muruqooda sida badeecadaha kaleba loo gato ama loo ijaarto waxaana ijaar loo siinayaa Mushahar, kaas oo iyaguna badeecadaha kale ee ay u baahan yihiin ku gadanayaan.

Haddaba inta aan badeecad la abuurin habka hantigoosadku waa in laba waxyaalood la helaa:

1. Waa in mujtamaca shaqadu u qeybsan tahay, taa micnaheedu waxa weeye mujtamac kasta si uu u jiro wuxuu u baahan yahay, inuu abuuro ama soo saaro waxyaalahaas badan oo kala duwan sida abuuridda cuntada, moodka qeyriin iyo samayska alaabada kale ee ay ka mid yihiin dharka, kabaha iwm. Taasi waxay ku imaan kartaa shaqada oo dadka u qeybsan.

2. In la helo dad gaar ahaan u leh qalabka wax lagu soo saaro (Wershadihii) iyo qeybinta shaqada mujtamaca, lahaanta gaar ahaaneed ee qalabka wax lagu soo saaro waxay keeneysaa in laga kor faa'iideysto muruqa shaqaalaha iyo in badeecadda la kala gato oo wax kala gadashada laga macaasho oo qiimaha dheeraadka ah uu qaato ninka hantigoosiga ahi. Taas ayaa marka noqonaysa sirta ku qarsoon ama uu ku dhisan yahay habka hantigoosadka ah.

## DHUUXA ISKU DULNOOLAANTA HANTIGOOSIGA

Shaqadu waa habka dadku kaga hortago dabeecadda. Qofku wuxuu ku hoos noolyahay dabeecadda, wuxuuna isku dayaa si uu u beddelo iyada ugana faa'iideysto kana soo saaro waxyaalo muhiim u ah isaga iyo mujtamaciisa.

Qaban qaabada shaqadu waxay salka ku haysaa ama saameyneysaa habka dhaqaalaha iyo siyaasadda ee mujtamaca, shaqadu waa shayga dadku kaga duwan yahay xoolaha, waana soo jirtay tan iyo waqtigii wax wada tacabka iyo wada lahaanta iyadoo soo martay habkii is-addoonsiga, dhulgoosadka, hantigoosatada iyo hantiwadaagga, waana jiri doontaa mujtamac kasta, waxayna gaadhaysaa heerkeeda ugu sarreeya habka hantiwadaagga.

Hantigoosatadu waxaa weeye sidii kuwii ka horreyey hab dhaqaale iyo siyaasadeed oo ku dhisan alaabta ama tacabka wax lagu soo saaro oo dad yari leeyahay iyo dadka tirada badan oo u shaqeeya dadka tirada yar oo maalqabeenka ah oo shaqaalaha ku kor nool; habkaas isaga ahi wuxuu bilowday qarnigii XVI wuxuuna dhaqan galay qarnigii XVIII - XIX isagoo ka hirgalay waddammada Yurubta Galbeed, khusuusan dhulka Ingiriiska iyo kan Faransiiska. Sababaha waaweyn ee keenay waxaa ka mid ah Kacaankii warshadaha iyo dhaqdhaqaaqii Beeraleydii la dagaallantay dhulgoosatadii sida foosha xun u cadaadineysey. Hantigoosatadu waxay ka dhex dhalatay mujtamaca dhulgoosatada waxayna kaga duwan tahay xagga abaabulka shaqada iyadoo muruqa qofka shaqaalaha



ahi yahay badeeco suuqa taal oo ninna gato (maalqabeen) ninna gado (xoogsatada), gadashadaas oo loollan ku jiro aakhirkana keentay iska horimaad dabaqi ah, qabrigana u jiidda habka hantigoosatada.

Dimashada habkii dhulgoosatadu wuxuu keenay maalqabeennada oo bata, shaqada oo heerkeedu siyaado iyo isku kornoolaanta oo sii fidday wejiyo badanna yeelatay, waxay kaloo keentay dadka oo u qeybsama dhiigmiirato amase maalqabeen, iyo xoogsatada muruqeeda maasha oo khasab ay ku noqotay inay gataan xooggooda si ay u noolaadaan iyaga iyo xaasaskoodu.

Isku kornoolaantu waxay tahay in qof qof kale u shaqeeyo, khayraadka shaqada laga soo saarana ninka loo shaqeeyaa leeyahay, shaqaaluhuna leeyahay mushahar yar, kaasoo lagu sheego qiimihii muruqa xoogsatada, run ahaantiina aan ahayn, waayo hadduu saas yahay maalqabeenku ma heleen qiime dheeraad ah, isku kornoolaantuna ma jirteen. Muruqa shaqaaluhu wuxuu yahay awood xoog iyo caqli oo uu qofku u leeyahay shaqada uuna soo saaro waqtiga shaqada. Muruqa shaqaaluhu wuxuu noqdaa badeeco, habka hantigoosatada marka la joogo, laba sababood dartood:

1. Shaqaalaha oo ay u bannaantahay inuu ka gado maalqabeenkuu doono.

2. Shaqaalaha oo aan qabin alaabta wax lagu tacbo ama wax lagu dhaliyo iyo isagoo aan qabin wax uu ku noolaado, taasina ay u hoggaamisay inuu gato muruqiisa.

Sida la ogyahay badeeco kasta waxay leedahay qiima lacageed, sidaas darteedna muruqa xoogsatadu wuxuu leeyahay qiime lacageed oo lagu dhereriyo heerka nolosha guud, iyadoo loola jeedo qiimahaas waxyaalaha shaqaalaha lagama maarmaanka u ah sida cuntada, dharka, hooyga, kafaala-qaadka xaaskiisa iyo waxyaalo kale oo badan.

Isku kornoolaanta iyo qiime dheeraad raadisku waxay yihiin ama ka mid yihiin sharciyada salka u ah hantigoosatada waxayna dhaliyaan loollan dabaqo oo ka timaadda habka wax

soo saarka iyo qeybsadka waxa la soo saaray, waayo qaybsadka ka dambeeya wax tacabka maalqabeenka hantigoosatada ah ma aha inuu u faa'iideeyo dadweynaha baahan, laakiin waa inuu helo qiime dheeraad ah oo uu ka dhaliyo muruqa iyo caqliga xoogsatada.

Maalqabeenku markuu ku shaqeysto shaqaalaha ayuu siiyaa mushahar yar oo aan ku filleyn, isaga iyo xaaskiisa, isku kornoolaantuna waxay ka timaaddaa maalqabeenka oo aan ka wada gadin xoogsatada xooggooda oo dhan, laakiin laga abaalmariyo in yar oo ah waqtiga shaqaaluhu xoojin karo wax ku filan isaga iyo xaaskiisaba. Waqtiga kale oo shaqaaluhu shaqeeyo ama aan laga gadin wuxuu abuuraa korsaarka faa'iido (surplus labour time). Shaqaaluhu wuxuu dhaliyaa alaab qiime leh taasoo maalqabeenka aanu waxba ugu fadhiyin. Haddaba abaabulka shaqada waxaa loo baahan yahay in la kala saaro maalka joogtada ah (constant capital) kaasoo lagu gado qalabka wax lagu tacbo (Machinary, Tools, Raw materials etc) alaabtaasoo aan qiimahoodana haddiibana gelin shayga la suubinayo, iyo maalka aan joogtada ahayn (variable capital) laguna gato xoogga shaqaalaha (Labour Power) dhaliyana qiime dheeraad ah (surplus value) oo aada jeebka maalqabeenka hantigoosatada. Waxa loo baahan yahay in la qawimo ama la qiyaaso heerka qiimaha dheeraadka ah (Degree of capital exploitation) kaasoo lagu helo in qiimaha dheeraadka ah lagu dhereriyo maalka aan joogtada ahayn (variable capital) aana lagu dhererin maalkoo dhan (entire capital). Waxaa jira in maalqabeenku kor ugu qaadi karo heerka qiimaha dheeraadka, laba siyaabood:

a) Iyadoo uu kordhiyo saacadaha la shaqeeyo (absolute surplus value).

b) Iyadoo uu yareeyo iyo waqtiga lagama maarmaanka ah oo shaqada ama waqtiga la gado muruqa shaqaalaha (Relative surplus value). Maarkis isagoo si fiican u baadhay siyaabaha kor loogu qaado heerka qiimaha dheeraadka ah wuxuu caddeeyey in loollanka dabaqadda shaqaaluhu ay ku raadiso sidii loo yarayn lahaa saacadda la shaqeeyo, loollankaasoo xoogsatadu ku guulaystaan si isdabajoog ah.

Isku kornoolaanta hantigoosatadu waa joogtaa meel kasta oo wax laga soo saaro sida warshadaha, beeraha iyo meel kastoo laga shaqeeyo. Waxa habka hantigoosiga beddeli kara habka hantiwadaagga oo la rabo in laga hirgeliyo waddankeena. Waa habka qura oo tan iyo hadda taariikhdu taqaan oo ka xoraynaya xoogsatada adduunka isku kornoolaanta. Kacaanka Soomaaliyeed xaashidiisa koowaad iyo tan labaadba waxay aad uga hadlahayaan sidii loo yarayn lahaa aakhirkana loo baabi'in lahaa sidii isku kornoolaanta waddanka taalla shaqaalaheennu uga xoroobi lahaa ugana gacan sarreyn lahaa maalqabeennada waddankeenna joogta, taasna waxa markhaati ka ah wareeggii dawladdu la wareegtay maamulkii Bankiyada, Wershadaha, Bucshirada dibadda, ku dhawaaqii hantiwadaagga cilmiga ku dhisan iyo sharciga Shaqaalaha oo cusub.

## QIIMAHA DHEERAADKA AH

Wax kasta oo shaqo ku baxday badeeca ma noqdaan. Haddii qof tacabka soo saaro (mid uu isagu ka shaqeeyey) uu isla isagu isticmaalo wixii badeecad ma noqonayaan. Wax shaqo lagu soo saaray marka la kala beddesho oo la is-weydaarsado ayuunbay badeecad noqonayaan. Badeecaddu laba tilmaamood ayey leedahay. Marka baahi jirta ay haqab tirayso waxay yeelaneysaa qiime isticmaal (use value). Isla marka badeecaddi haddii ay qiime isticmaal leedahay waxa lagu beddelan karaa shay ama badeecad kale oo qiime isticmaal oo kale leh, taasi waxay badeecadda marka ku kordhineysaa qiime kale oo ah qiimihii beddelashada.

Sida aynu ogsoonnahay shayga baaquliga ah waxbaa lagu shubtaa, qiimaha isticmaalkiisuna waa wixii lagu shubto in uu hayo. Marka waxaa lagu beddelan karaa qaaddo. Kol haddii labadii shay qiimahooda isticmaalka la isweydaarsaday waxaa halkaa innooga soo dhex baxaya in baaquliga iyo qaaddadu ay leeyihiin qiima kale oo kii beddelaashada ah. Wax kale oo jira in waxyaalaha la isweydaarsado ay leeyihiin wax ka dhexeeya, waxaasina ma aha miisaan, ama midabka ee waa in bedeecadahaas la kala beddeshay shaqo ama xoog dad soo saarey.

Badeecad kasta inta xoogga soo saariddeeda ku baxay le'eg yahay baa qiimaheeda beddelaashadu le'egyahay, tusaale

ahaan haddii hal kursi la qiimo yahay toban kiilo oo Sonkor ah taas micnaheedu waxa weeye in xoogga shaqada ee ku baxay kursiga le'egyahay xoogga shaqada ee ku baxay tacabka toban kiilo oo Sonkor ah. Sidaas darteed qiimaha badeecad kasta waxaa lagu qiyaasaa inta xoogga ku baxay le'egyahay. Hase yeeshee, badeecadda waxa soo saara waa xoog shaqaale. Haddaba marka wax ama bedeeco la kala beddelanayo waxa isla markaas ku jira kala beddelashadaas xoog ama muruq shaqaale oo la isweydaarsaday, isaga oo badeecad ku qarsoon.

## SIDA QIIMAHA DHEERAADKA AH LOO QAYBSADO

Waxaan soo aragnay in si loo garto iska soo horjeedka muruqa shaqaalaha iyo raasamaalka loo baahan yahay in la ogaado qiimaha dheeraadka ah, taasi waxay dhlinaysaa in si cilmiya loo garto sida hantigoosatadu u dhiigmiirato xoogga muruqa iyo maskaxda guutada shaqaalaha.

Hantigoosatadu si ay uga faa'iideysato ama u dhiigmiirto murqa shaqaalaha marka hore raasamaalka ay haysato ayey qalabka wax lagu soo saaro, moodka qeyriin iyo muruq shaqaale ku gadataa. Badeecadda marka soo baxda ayey sii gadataa si lacag ama xoolo intii hore ee meesha ka gashay ka badan oo macaash ah ay u hesho. Habka ay sidaasi u dhigmayso waa: lacag-badeecad-lacag. Taas oo khilaafsan badeecaddii baahida lagu haqabtirayey ee aan laga macaasheynin oo iyaduna u dhigmaysa: badeeca-lacag-badeecad.

Hantigoosatadu marka hore waxay lacagta ku gadanaysaa qalabka wax lagu soo saaro iyo ijaarka muruqa shaqaalaha, lacagtii uu haystey waxay isu beddelaysaa rasmaal wax dhaliya Markaas badeecadda soo baxda ayaa suuqa qiime intii ka badan lagu gadaa si macaash looga helo. Hase ahaatee qiimaha badeecadda lagu gado waxaa weeye kii badeecaddu wershadda kaga soo baxday, maxaa yeelay, mujtamaca dhexdiisa ama suuqa marka waxna qiime jaban (rakhiis) waxna qiima korreysa (qaali) lagu gado ayaa isburrinaya oo badeecaddu ku gadmeysaa qiimihii ay warshadda kaga soo baxday. Isweydiin baa marka imaanaysa, oo ah: Haddii badeecaddii qiimihii ay wershadda kaga soo baxday lagu gaday, sidee hantigoosatadu macaash ama qiimaha dheeraadka ah u heshaa? Jawabtu waxaa weeye: Qiimaha dheeraadka ah waxa soo saara



waa badeecadda gaarka oo ah muruqa shaqaalaha.

Badeecad kasta qiimaheeda ama intay joogto waxa lagu qiyaasaa waa intii ama qiimihii lagu soo saaray. Haddaba qiimaha uu joogo muruqa shaqaaluhu waa inta nolosha qofka shaqaalaha ahi ku noolyahay, isaga iyo carruurtiisu, si qofka shaqaalaha ahi uu awood u helo in uu shaqeeyo. Waxaa intaa raaca waqtiga qofka shaqaalaha ahi awoodi karo inuu shaqeeyo si wuxuu ku noolaan lahaa uu u xoogsado. Waxaad ka soo qaadda in qofka shaqaalaha ahi markuu saddex (3) saacadood shaqeeyo in isaga iyo carruurtiisu waxay ku noolaan lahayd qiimaheedii uu helo.

Haddaba haddii qofka shaqaalaha ahi marka uu saddex saacadood ku soo saaro qiimihii ijaarkiisa uu shaqada faraha ka qaado ninkii hantigoostaha ahaa waxba faa'iidi maayo. Hase yeeshee ninka hantigoostaha ahi intaa kuma harayo. Waxa uu qofka shaqaalaha ah ku shaqeystaa saacado badan oo dheeraad ah, wixii qofka shaqaalaha ah soo saaro saacadahaas dheeraadka ahna waxba ugama celiyo. Tacabkaaas waxaa loo yaqaan qiimaha dheeraadka ah.

Iyada oo kooban: qiimaha dheeraadka ah waa qiimaha muruqa shaqaaluhu dhaliyo ee abaalgud ama mushqaayaddeedii aan hantigoosatadu u celin ama siinnin. Waa kaa macaashka u noqda ee jeebkooda gala.

**macaashka sherkadda:**

Waxaan soo aragnay qiimaha dheeraadka ah micnihiisa, sida uu u soo baxo iyo meesha uu ka soo baxo. Waxaannu qodobkan kaga hadleynaa sida qiimaha dheeraadka ahi ugu qeybsamo xubnaha kala geddisan ee hantigoosatada. Mar kasta sida xubnaha hantigoostadu qiimaha dheeraadka u qeybsanayaan waxay ku xiran tahay halka xubin kastaa kaga jirto lahaanshaha hubka tacabka sida dhulka, lacagta, wershadaha iyo ganacsiga. Qiimaha dheeraadka ah saddex siyood baa lagu qeybsadaa:

1. Macaashka sherkadda (interprise profit);
2. Macaashka ganacsiga iyo amaahda (Commercial & loan profit);
3. Ijaarka dhulka (Ground rent).

**macaashka sherkaddu waxa weeye:**

Sherkaddii bedeecadda soo saartay, ama haysatey qalabkii loo baahnaa xagga ganacsiga sida guryihii ganacsiga, ijaarka ka warqabiddii suuqa iwm. Marka waxa khasab ku ah inay bedeecaddii ay soo saartey ganacsatada ka sii gaddo. Halkaa waxa sherkadda uga soo baxa macaash, kaas ayaa marka noqonya, macaashkii sherkadda oo ah intii ku soo hagoogtay maalqabeenka sherkadaha leh.

**macaashka ganacsiga iyo amaahda:**

Waxaa weeye marka Wakaaladaha ganacsatadu bedeecaddii sherkadaha wershaduhu soo saareen ay gataan. Iyaguna waxay badeecaddii geliyaan suuqa adduunka oo way sii gadaan. Halkaa macaash ayey ka helaan. Kaasaa loo yaqaan macaashkii ganacsiga dheeraadka ahaa ee muruqa shaqaaluhu soo saaray.

Macaashka amaahda ama daynku wuxuu ku yimaadaa sida aan ognahay ganacsatada iyo maalqabeenka hantigoosatada ah guud ahaan waxay haystaan lacag raasamaal ah.
raad ah oo Bankiyada u yaalla. Marka mid maalqabeen ah uu lacag dheeraad ah oo uu ku sii ballaariyo soo saaridda doonayo amaah ama dayn ayuu raadsadaa. Marka daynka waxa siiya Ban kiyada ama ganacsatada (dillaalada) oo Bankiyada lacagi u taallo. Haddaba marka daynka uu dib u soo gudayo wuxuu bixinayaa lacag intii hore ka badan oo la saarey (interest) boqolkiiba xoogaa. Inta dheeraadka ah ee lacagtii daynka ahayd lagu kordhiyey ayaa la yiraahdaa macaashkii deynka (loan profit), waana inta maalqabeenka Bankiyada leh ay qaataan.

**macaashka ijaarka dhulka:**

Waxaa weeye sida aan ognahay mujtamaca hantigoosadka dhulka wax laga tacbo gaar ahaan ayaa loo leeyahay. Marka maalqabeenka dhul weyn leh maalqabeenno kale ayuu dhulka ka ijaaraa. Markaasaa ka laga ijaaro iyo shaqaale dhulkii ku beera, kaasi waxa kale uu dhiibaa ijaar makiinado. Marka beertu u go'do lacagta ijaarka ah ee uu dhiibay iyo inta uu faa'iiday waa qeyb ka mid ah qiimihii dheeraadka ahaa ee shaqaalaha beeraleyda ahi muruqooda ku soo saareen.



Waxa intaa raaca cashuurta Dawladdu qaadato. Guud ahaan mujtamaca hantigoosiga ah wuxuu ku dhisan yahay waa dhiigga laga miiranayo dabaqadda ama guutada xoogsatada ah oo iyaguna laga qadiyey barwaaqadii ay dhaliyeen.

## IMBERYALISMKU WAA HEERKII UGU SARREYEY OO UGU DAMBEYEY HANTIGOOSIGA

«Imberyalismku waa heer khaas ah oo taariikheed oo hantigoosi ah. Dabeecaddiisa gaarahaaneedna waa saddex laab:

1. Hantikoobadka hantigoosiga;
2. Dulin ama hantigoosi khaayisaya( parasito).
3. Hantigoosi dhimanaya».

Lenin wuxu sheegay 5 calaamadood oo dhaqaalaha imberyalismka u sal ah:

1. Koobista tacabka iyo raasamaalku way koreen oo heer sare oo monoboliyaal abuuray bay gaadheen, nolosha dhaqaalahana doorka gudoominaya bay ka galeen.
2. Isugeynta raasamaalka bankiyada iyo kan sancada salkana ku haysa raasamaalka lacagta iyo samaynta iyo kan sancada salkana ku haysa raasamaalka lacagta iyo samaynta oligarkhiga lacageed.
3. Raasamaalka oo la dhoofiyo, oo ka duwan badeecadda la dhoofiyo, oo heer qaayo leh galay.
4. Samaysanka monoboliga caalamiga ah oo shirkadahiisu wada guulayaan oo iyagu qaybsaday adduunka.

5. Dawladaha hantigoosiga waaweyni dhexdooday ka qaybsadeen dhamaan dalalka dunida oo idil», waxayna ku dirirayaan si ay dib ugu qaybsadaan.

Xooggii shaqaalaha iyo awooddii tacabka bay urursadeen, suuqyadii dunidana way qabsadeen, kuwii la tartamayeyna way baabi'iyeen, ama qaar heshiisyay la galeen, qaarna ascartay rabeen bay ku cadaadiyeen. Laba ama sadex ama hadday u bataan shan shirkadood baa wax yaabihhii wershadaha ka soo baxayey badankoodii monoboli ku qabsaday, iyagaa samaynaya wixii soo baxayey, suuqiina xukumaya.

Shirkadaha monoboligu waxay u kala baxaan:

Cartels, Syndicates, Trusts iyo Concerns.

Cartel-ku waa heshiis ay samaystaan dhawr shirkadood oo hantigoostayaal ah oo ay heshiiskaas ku qaybsanayaan suuqa, alaabta ay soo saarayaan, qiimahay rabaanna iyagu u gooya. Sida loo gadayo iyo maalinta lacagta la bixinayona iyagaa jara. Sidaas waxay u yaraynnayaan wixii la tartamayey, faa'iido weynna way helayaan. Shirkad waliba oo cartelka ku jirtaa ikhtiyaar bay u leedahay waxa ay samaynayso laakiin heshiiskaa ka dhexeya.

Sindikatedu wuxu kaga duwan yahay cartelka waa shirkadaha ku jira oo meel laga wada xukumo (common office) baayacmushterigooduna waa isku mid. Ascaarta ay wax ku gadayaan iyo alaabta ceedhiin oo ay soo gadanayaanba isku xafiis baa laga xukumaa.

Trust-ku isku shirkad keli ah bay isku noqdaan. Waxa Wersheduhu soo saaraan, sida loo gadayo iyo lacagtoodu ba waa isku mid.

Concern-ku waxa weeye shirkado xukuma laamo badan oo ka mid ah wershadaha baayacmushteriga waa weyn, bankiyada, gaadiidka iyo shirkadaha caymiska. Kor ahaan kala mid baa la mooddaa laakiin koox yar oo hantigoostayaal ah baa isku xukunta.



Inkasta oo ay kacaan ama samaysmaan monoboliyadaas waaweyni, hantigoostayaasha yar yari ma dhamaanayaan. Waxaanay ka soo baxayaan hadba meesha aan monoboligu wax kaga yeelan wershadaha iyo laamaha kale oo dhaqaalahaba. Tartankuna waa sii xumaanayaa ilaa midba mid ka dig siiyo. Waxay kale oo ku dagaal galaan xoog khasab ah, laaluush, shirqoollo, khiyaamo, dibindaabyo, luggooyo iyo wixii kale oo u suuro galaba. Denbiyada ugu xunxun bay ku isticmaalayaan si ay tartanka ugu adkaadaan.

Lacagta raasamaaliintaas oo dhan bankiyadaa lagu soo ururiyaa. Lacagta dadka oo dhamina waxay isugu timaadaa bankiyada, maca tan dawladda. Lacagta kuwa wershadda lihina bankiyaday soo gashaa. Mrakaas waxa isqabsada bankiyada iyo wershadaha oo waxay isku noqdaan raasamaal lacaggeed (financial capital) oo ah monoboliga ugu khatarsan.

Dhoofinta raasamaalku waxay suura gashay markii raasamaal weyni waddamada hantigoosiga ah gacmo yar lagu koobay oo la gashado waddamada soo koraya si xoogsato riqiis ah xooggooda loo maalo. ama raasamaalkaas waxa la amaahiyaa waddamada dawladaha soo koraya oo markaas faa'iido badan baa lagaga gurtaa. Dawladdaas waxa la amaahinayo baa aakhirka lagu gumeystaa. Dunida gebi ahaanna sidaas bay ku qaybsadaan ama haadka suuqa u ah bay u geliyaan. Qaybahaasu waa xagga dhaqaalaha; ama waddanka naftiisay qabsadaan oo gumaystaan. Sidaas by dunidu ugu qybsantaa, markaas bay haddana ku dagaallamaan si ay mar kale dib ugu qaybsadaan inta hadba ugu xoog weyn dawladdaha imberyalistaha. Dagaalkuna wuxu ka dhex dhacaa hadba dawladaha maalkaas iyo xoolahaas ku xoogaystey laakiin dalalka iyo suuqa ay haystaan ku yar yahay, iyo dawladaha imberyaliska ah oo dalalka iyo suuqa ay haystaan weynyhay laakiin tan hore ka xoog yar. Sidaas baa imberyaliska dhexdooda dagaalku uga dhacaa.

Imberyalismka waxa ka muuqata in uu khaayisayo, sancada iyo teknolojiyada la hindisayaana monoboli bay gacmaha u gelayaan oo marakas tartankii ay ku korrayeen bay soo

yaraynayaan. Aakhirkana way xayirayaan oo dabrayaan si aannay u dhaqaaqin.

Hore u socodka xooggagga tacabka iyo teknolojiyadu ba way xidhmayaan. Hawshii qaybsamaysey oo farsamadu ku sii badannaysey way joogsanaysaa. Xidhiidhka tacabku wuxu imannayaa meeshii uu hantiwadaag isu roggi lahaa.

Marka imberyalismku gaadho heerkaas waxa ka soo baxaya in yar, ama koox yar oo iyagu aan xataa meella ka shaqaynayn oo «coupon» kaga guranaya faa'iido shirkaddaha ay saamiga ku leeyihiin oo sidaas awgeed ku noqday dulin (parasitic) aan haba yaraatee wax shaqo ah qabanayn. Kuwaasu waa oligarkhiga lacagta (financial oligarchy).

Isdiidadu waxay ku jirtaa nidaamka ruuxiisa, waana dadweynaha shaqaynaya oo wax samaynaya iyo dadka yar oo aan waxba qabanayn oo haddana qaadanaya wixii dadweynahu xoojiyey. Iyaguna tartankay isku baabi'inayaan; baayacmushterigay isku liqayaan; shirkaddiba shirkad bay cunaysaa; Aakhirkana afka monoboligay wada galayaan; awoodda dawladduna gacmahooday ku jirtaa; ciddii kale oo waxaas ay haystaan ku qordisana way diidayaan. Werarro iyo dagaallo bay meel walba ku kicinayaan; cid walbana xoog bay ku caddaadinayaan oo madaxa kaga joogsanayaan, intaasuna waxay inna tusaysaa in nidaamkaasu heerkii u sarreyey gaadhey oo aannu halkaa marna dhaafayn. Dabaqaadaasu way khaayistay, dabaqaddii bedeli lahaydna way bislaatay, Inkasta oo ay shaqaalaha kala laaluushaan oo gooni u samaystaan qaar yar (Labour Aristocracy).

Hantigoosatada monoboliga iyo dulinka ihi waa dhimanaysaa. Waxayna u gudbaysaa hantiwadaag. Dhimashaddeeda iyo kuwa aaska ku ridayaba iyadaa dhallaysa oo samaynaysa.

Nidaamka hantigoosigu marna in uu u koro si isu dheelitiran waa wax aan dhici karayn. Shirkaduhu way tartamayaan oo way isdhaafayaan. Waddamada hantigoosiga ah baa iyana tartamaya oo isdhaafaya. Tartankaasu aakhirka dagaal buu ka dhex ridaa dawladaha imberialistayaasha hadba inta



ugu xoog weyn. Markaas, waddanba waddan buu qabsadaa. Koloni mid haystana mid kale baa ka qabsada. Duniduna dib bay ugu kala qaybsantaa.

Oktoobar 1917 baa nidaamka hantigoosigu galay khalkhalkiisa guud ahaaneed. Kacaankii Rusiya ka dhacay baa bilaabay burburkii nidaamka hantigoosiga. Marka imberiyalismka ay u muuqato dhimashadiisu buu caranayaa oo waalanayaa. Markaas wuxu weerarayaa waddamada hantiwadaagga ah, dhaqdhaqaaqa Gobanimadoonka, shaqaalaha iyo wixii horusocod ah oo dhan. Imberiyalismka waa tii ugu danbeysey oo waa isbiimaynayaa, wuxuna weerarayaa waddamada xoroobey oo soo koraya. Imberiyalismku, markaas, fashist buu noqonayaa. Dadka uu xukumayona tarab-tarab buu u laynayaa, waa gubayaa ama waa sumaynayaa, wixii xaq sheegana waa ku haliilaa. Imberiyalisku midabtakoor buu noqdaa oo dadka midab-midab isugu diraa. Wixii aan midabkiisa ahaynna wuu gumayaa oo ha la baabi'iyo yidhaahdaa. Qaarna militerist bay noqdaan oo ku duulaan meeshii alaab ceedhiin iyo suuq cusub ay ku arkaan.

Laakiin, imberiyalismku marxalad labaad buu galay intii dagaalkii labaad ka danbaysey, waana khalkhalkiisa marxaladiisii labaad. 1) Hantiwadaaggii wuxu noqday nidaam caalami ah; 2) gumeysigii imberiyalismku waa kala daatay; 3) imberiyalismka U.S.A. iyo imberiyalismka dawladaha kale si xun bay isaga hor yimaadeen; 4) shaqaalaha waddamada imberiyalisku xukumaana way ku kaceen.

Monoboliga hantigoosigu wuxu galay ama isu rogey monoboliga dawladda hantigoosiga ah: taasu waxa weeye awooddii dawlada iyo shirkadaha waaweyn oo mid isku noqday; qandaraasyada, ascaarta, sharciyada suuqa, wax — soo — saaridda iyo hadba waxa ay doonaan bay ku fushadaan quwadda awoodda dawladda. Awoodda siyaasadda iyo dhaqaalahaba danta faa'iidadooda bay ugu adeegaan. Hantigoosiga dawladduna waa dawladda oo la wareegta shirkaddo badan ama qaybo ka mid ah laamaha dhaqaalaha waddanka si ay dawladda burjuwasiga ihi u fuliso danaha burjuwaasiinta. Si ay u badbaadaan, gumeysi cusub bay abuuraan.

Xaaladda shaqaaluhuna maalin walba maalinta ka dambaysa way sii xumaanaysaa. Shaqaalaha iyo nidaamka burjuwaasiintuna fool ka fool bay isaga hor imannayaan. Halganka dabaqaadkuna waa sii dhanaanaanayaa, ilaa markuu imberiyalismku iyo nidaamka hantigoosigu haligmo oo godgalo.



Qaybta 2aad

# HANTIWADAAGGA

## HANTIWADAAGII DHALANTEEDKA AHAA

Waqti dheer ayaa dadka dunida ku noolaa waxay ku riyoonayeen in ay helaan hab dhaqan iyo dhaqaale (socio-economic system) oo aan lahayn kala sarreyn iyo iskudulnoolaad midna. Riyadii ugu dheereyd ee aadamigu ku baadi goobayey caddaalad ijtimaaci ah waxay billaabatay waqtigii dheeraa ee dunidu soo mooddey. Nin Geriig ahaa oo gabyey wuxuu yiri «Hadduu soo noqon lahaa waqtigii dhulku dhali jirey miro macaan ee aan la beerin, markii uusan dadku welwel qabi jirin, waqtigii xornimada, saaxiibtinnimada iyo wada shaqeynta, maanta ma joogneen casrigan madow».

Waqtigaasina wuxuu ahaa habkii u horreeyey ee taariikhiga ahaa ee la oran jiray habkii wax wada tacabka iyo wada noolaashaha. Habkaasi wuxuu ahaa mid aan kadeed iyo isku dulnoolaasho jirin, qof kastana uu miraysan jiray amase ugaarsan jiray, dagaalkana dadku kula jiray dabeecadda. Hase yeeshee markii tacabkii bulshadu horumaray shaqadiina ay qaybsantay, garaadkii dadkuna kordhay, waxaa dhashay habkii la oran jiray isaddoonsiga, halkaas oo wax lahaansho gaar ahaaneed ay ka dhalatay, mujtamaca adduunkuna uu u qeybsamay nin addoon ah iyo nin addoon leh. Sida taariikhdu shegayso qofka addoonka ahi xoolaha wuxuu kaga duwanaa ma jirin oon ahayan murqaalka iyo hadalka, weliba waa looga naxariis darnaa, dadka waa la gadan jiray waana la dili jiray.

Beeraha waa lagu falan jiray, intaana waxay kala sinnaayeen xoolaha. Habkaas waxaa ku xigay dhulgoosiga, kaasna waxaa keenay dagaal dheer ee xoogsatadii la addoonsanayey ay ku qaadday boqoraddii iyo raggii addoonta lahaa. Dagaalladii faraha badnaa ee addoontu kula jirtay raggii addoonta lahaa waxay suuro geliyeen in habkii addoonsigu burburo hal-

kaasna uu ka dhasho habkii saddexaad ee ahaa dhulgoosiga oo isagu ahaa mid ka habboon kii addoonsiga. Dabaqadda ka dhalatayna waxay ahayd dhulgoosatoyaal oo ahaa raggii beeraha waaweyn iyo dhulka lahaa iyo beeraley oo iyagu ka shaqeyn jirey beeraha isla markaasna aan xor u ahayn in ay beer kale aadaan, laakiin dilkii iyo iibkii bareerka ahaa wuu yaraaday.

Hab kasta waxaa uu leeyahay fikarddiisa, dhaqankiisa iyo xukunkiisaba. Haddaba hababka isku dulnoolaashadu waxay la yimaadeen fikrado oranayey dadku waa inay u shaqeeyaan boqoradda iyo nimanka maalka leh, kuwaasoo Ilaah soo diray. Haddii ayna saas yeelin waxay mudanayaan ciqaab, aakhirana waa la cadaabayaa, qofiise ka danbeeya xukunka boqordda waxa uu aakhiro gelayaa Janno. Arrimahaas oo dhami waxay ahaayeen kuwa niyad jabinaya dadkii xoogsatada ahaa ee dulmanaa waxaana in badan loo haystay waxyaalahaas wax jiro.

Qarniyaal badan waxaa dadku baadi goobayey caddaalad ijtimaaci ah iyo sinnaan. Waxaana soo baxay kumanaan mufakiriin ah ee u doodaysa xuquuqda aadamiga. Aqoontii horumarkii sancada iyo wax soo saariddii oo horumartay waxay suura geliyeen in filosofyo iyo abwaanno badani soo baxaan, iyaga oo dhammaantood cabirayey sidii dhibaatada looga bixi lahaa iyo wixii dhibaatada dhaliyey. 1516 Thomas Moore oo ahaa nin Ingiriis ah oo u dooda xuquuqda aadamiga kana tirsanaa Golaha dadweynaha Ingiriiska ayaa wuxuu qoray buug. Waqtigaasi wuxuu ahaa farsamada suufku ay aad ugu hormartay dalka Ingiriiska, isla waqtigaas wuxuu ahaa mid dadka beeraleyda ahi dhibaata badnaayeen, dumarka iyo carruurtana si xun loogu shaqeysan jiray.

«Thomas Moore» wuxuu aad u caddeeyey madaxdii iyo Bulshadii waqtigaas ka jirtay waddanka Ingiriiska oo ahaa dalkii adduunyada ugu dhaqaale weynaa markaas, in si caddaalad ah loogu sinnaado tacabka iyo maalka dalka Ingiriiska, isla markaasna si guud loo wada shaqeeyo. Fikraddii iyo buuggii uu qoray «Moore» waxay kicisay xoogsatadii iyo dadkii u doodi jiray xuquuqda, waxaana soo baxay rag badan oo ku raacsan fikraddaa ayada ah.1568-1639 kii waxaa isna wax ka qoray arrintaas nin Taylaani ah oo la yiraahdo Kampanello» oo isagu qoray buug la yiraahdo: «Magaalamadaxdii qoraxda ku taallay». Kampanello» wuxuu ku qoray buugiisa in ay lagama maarmaan tahay in dadku ay shaqeeyaan saacado go'an isla markaasna ay u sinnaadaan waxay tacbaan. Waana in dadka oo dhammi ka shaqeyaan beeraha.



Qarnigii 16aad iyo kii 17aad intii u dhaxaysay waxaa ka qoray «Yutobiya» culimo fara badan; Tommaso Kampanella fikraddiisii oo sii faaftay nin tixraacay wuxuu sheegay «Dadka meeshaas ku nooli waxay awood u leeyihiin inay helaan waxkasta ee dunida yaal, xataa waa ay duuli karaan». Raggii wax ka qoray arrimahaas dhammaan waxay isaga mid ahaayeen in loo baahan yahay caddaalad iyo sinnaan in lagu wada noolaado lana baabi'iyo kadeedka iyo kala sarreynta dabaqadeed. Raggii sii ballaariyey kuna caan baxay waxay ahaayeen; «Charles Furiyer», «Sain Simon», iyo Robert Owen».

Nin mufakar ah oo isna wax ka qoray xorriyadda wuxuu macneeyey baahida bulshadu u qabto xorriyada iyo madaxbannaanida. 1652dii waxa soo baxay Buuggii la oran jiray «Sharcigii xorriyadda». «Meslier» oo ahaa nin Faransiis ah wuxuu qoray in caddaala-darrada iyo dhiigmiiradku salka ku hayaan hantida gaar ahaaneed inayna tahay tan dhibaatadu ay ku fadhido. «Morelly» isna wuxuu wax ka qoray noloshii dadkii hore, taasoo uu ku tilmaamay casrigii dahabka ahaa, markaas oo dabiicaddu awood siineysay dadka, wuxuuna ku soo gabagabeeyey in la baabi'iyo wax lahaanshada gaar ahaaneed, mustaqbalkana wuxuu u arkaayey in la wada wadaagi doono hantida, bulshadana ay ka dhaxayn doonto, wuxuuna qabay in horumarka qofku uu ku xiran yahay ka mujtamaca, qofku inuu helo wuxuu xaq u leeyahay.

Qarnigii 18aad waxaa soo baxay saddex Filoosofi oo caan ahaa «Saint Simo», «Fuuryer», iyo «Owen» waxayna la kulmeen iyadoo tacabka hantigoosigu aad ugu hormaray kacaannadii Sayniska iyo teknoloojiyada, raasumaaliyadduna heer waanaagsan soo gaartay. Isla markaa waxaa dagaal kula jiray hantigoosatada dabaqadda Broletaariga ah oo soo xoogaysanaysay, farsama yaqaannada iskood u shaqeysta iyo beeraleyda. Inkas-

ta oo siyaalo isku dhow ay wax u wada arkeen haddana midna uma muuqan inuu wakiil ka yahay shaqaalaha., «Engels» ayaa arrintaas kaga faallooday kutubk la yiraahdo «Hantiwadaagga dhalanteedka iyo ka cilmiga ah».

Casrigaan culamada daafaca fikradaha Borjuwaasiga wax-ay ku andacoodaan inay raacsan yihiin fikradihii saddexdaas Filoosof iyo kuwa kale oo sii hormariyey fikradda (idealiisma-da) ee uu ka mid yahay «Hegel» iyo «Kent». Saint Simon isagu wuxuu aad isugu taxallujiyey inuu wax ka qoro xiriirka daba-qadaha, hase yeeshee wuxuu ku fariisiyey fikrad Burjuwaasi ah. Owen iyo Fuuryed iyagu waxay sameeyeen laba tijaabo oo ay ku horumarinayeen Falsafadooda waxaana Ameerika isugu yi-mid dad ka socda Yurub oo dhan oo ay ka mid ahaayeen Culimo waaweyn. Dhulka ay haysteenna wuxuu ahaa 30.000 oo Ektar wuxuuna ku magacaabay tijaabadaas Owen 1824, heshiiskii cusbaa oo danta iyo niyad samida (New Harmony) kaasoo 1825kii uu u dejiyey xeer oranaya no-losha inay saldhig u tahay qalabka tacabka iyo dhulka oo la wada lahaado wixii soo baxana loo qeybsado sidii shaqada loo kala qabtay. Hase ahaatee kulankaa tijaabada ahi waa baaba'-ay saddex sano ka dib. Sidoo kale waxaa isna kulan tijaabo ah sameeyey Fuuriyer oo isu keenay 2.000 oo qof, laakiin sidii Oweyn ayey isna ka burburtay muddo yar ka dib. Fuuriyer-na wuxuu ugu dambeyntii soo istaagay in horumarka cilmigu marka dambe burburin doono aadamiga jiritaankiisa, taasoo «Kant» qabay in sayniska dabiiciga ahi ugu dambeynta burbu-rindoono adduunka.

Taariikhdaas dheeri waxay na tusinaysaa in Hantiwadaag-ga cilmiga ku dhisan uu ka soo dhexbaxay taariikhda iyo hab-abkii kala geddisnaa ee mujtamaca aadamigu soo maray, gaar ahaanna Falsafaddii Yutobiyada ahayd ay waddada u sii xaaq-day.

Hase yeeshee Yutobiyiintu waxay gafeen:

1. Inay cilmi ku fariisiyaan fikraddoodii sinnaanta iyo cadaaladda ijtimaaciga sheegaysay;
2. Meesha dhibaatadu ka timid iyo cidda ay gaar ahaan ugu dhacayso;
3. Iyagoo aan si dhab ah u helin dabiicad dabaqadeed iyo qawaaniinta xukumaysa horumarka taaraakhi-ga ee bulshada.

Siyaabahaas dartood ayaa waxa loogu magacaabay hanti-wadaaggii dhalanteedka ahaa, kaasoo tilmaamayey baahida loo qabo sinnaanta iyo caddaaladda ijtimaaciga ah, hase yeeshee aan ku fariisinin qawaaniinta cilmiga ah ee xukumaysa isbed-delka nolosha bulshannimo.

Wax allaale iyo wixii aan ku fadhiyin qawaaniintaas isla markaasna u danayneyn xoogsatada iyo dabaqaadka dulman, waxaynu ku magacaabaynaa dhalanteed iyo riyo. Mana jiro hantiwadaag aan ahayn kan Maarkiisimda, Leniniisimada ah. Sidaas awgeed xoogsatada Soomaaliyeed waxay ku dagaalla-mayaan hantiwadaagga cilmga iyagoo ka soo horjeeda hanti-wadaag-ku-sheegyada riyada iyo dhalanteedka ah.

## DHALASHADA HANTIWADAAGGA CILMIGA AH

Tiirarka aasaasiga ah ee Maarkiisimadu waxay yihiin kuwa soo socda:

a) Falsafadda,

b) Dhaqaalaha siyaasiga ah;

c) Aragtida Hantiwadaagga oo cilmi ku dhisan.

Saddexdaas qeybood oo Maariisimaku meel daleel ah kama soo bixin ee waxay leeyihiin saldhig cilmi ah oo ay ka dhasheen. Saldhiggaasu wuxuu yahay:

a) Hantiwadaagii riyada ahaa ee Fransiiska;

b) Cilmigii dhaqaalihii siyaasiga ee Ingiriiska;

c) Falsafaddii Jarmalka ee qarniyadii XVIII-XIX.

Fikradda hantiwadaaggu waxay soo baxday markis iyo Engelis ka hor, laakiin fikraddaasu may ahayn tu cilmi ku dhi-san. Saas daraadeed hantiwadaaggii Markis iyo Engelis ka hor-reeyey waxa lagu magacaabi jirey «Hantiwadaaggii riyada

ahaa», taas waxay tahay inaan hantiwadaaggu si dhab ah oo tifaftiran u arki jirin nolosha mujtamaca, iyo halganka dabaqadeedba. Culimadii hantiwadaagga riyada ahi waxay ahayd mid u baaqeysay dhalasho cusub oo hantiwadaag ah, mujtamacaas oo aan lahayn hanti gaar ahaaneed, dadkuna uu wada shaqeeyo, aanayna jirin isku dulnoolaan.

Culimadaasi waxay cambaareyn jireen isku dulnoolaanta, caddaala darrada, sinnaan la'aanta, koridda hantida gaar ahaaneed, waxayna qabeen in hantida gaar ahaaneed ay tahay sababta keenta isku dulnoolaanta dabaqaadka; tiritiridda hantidaasuna ay tahay jidka keliya oo caddaalad ijtimaaci ah lagu gaari karo. Culimadaas aan dusha ku soo sheegnay tilaabo dheer bay ka qaadeen xagga hantiwadaagga fikrad ahaan, mar hadday sheegeen in loo baahan yahay dhismo mujtamac hantiwadaag ah, ayna cambaareeyeen isku dulnoolaanta iyo dhibaatooyinka la xiriiraba, hase yeeshee ma ayan garan sidii dhibaatooyinka ay sheegeen looga bixi lahaa. Culimadii hantiwadaagga Yutobiga ma ay garan halgannada dabaqiga ah ee waxay qabeen in dabaqadda ku dulnoolaatada ah iyo tan dhibbani ay hantiwadaag wada dhisaan halgan dabaqi ah la'aantiis.

Markis iyo Engelis waxay caddeeyeen in aan mujtamac hantiwadaag ah la dhisi karin wax yaalaha soo socda la'aantood:-

h) Saldhig dhaqaale;

t) Halgan dabaqadeed;

j) Dabaqad hoggaamisa halgannada dabaqiga ah oo ah tan shaqaalaha;

x) Heshiis la'aanta dabaqadda ku dulnoolatada ah iyo tan lagu dulnoolyahay;

kh) In dunidoo dhami aakhirkeeda ay noqonayso hantiwadaag;

d) In isku duloonaanta lagu tirtiri karo kacaan hantiwadaag ah oo keliya.

Waxaa kale oo saldhiggii Markisismadu ka dhalatay ka mid ahaa: dhaqaalihii siyaasiga ahaa ee Ingiriiska, culimadii



dhaqaalahaas waxa ka mid ahaa, «Adam Smith», iyo «David Ricardo», kuwaas oo caddeeyey in badeeca kastaba qiimaheedu ku xiran yahay shaqada. Culimadaasu run bay ku sheegeen in badeeca kastaba qiima leedahay shaqada fushay darteed, laakiin waxaynay muujin qiimaha dhabta ah oo badeecada, iyo shaqadu inay tahay waxa keliya oo aan la'aantiis wax soo saariddu suurtoobi karin.

Markis wuxuu caddeeyey in badeecad kastaba lagu qiimeeyo shaqada ku baxday soo saariddeeda, in shaqadu tahay halbowlaha soo saaridda badeecada, in muruqa ninka xoogsatada ahi yahay badeecad khaas ah oo uu xoogsadahu kaga iibsado hantigoostaha waxaan qiimaha muruqiisa joogin, halkaasoo uu ka dhalanayo qiima dheeraad ah oo hantigoostuhu bilaash uu u qaato. Taasu waxay tahay in waqti badan iyo siyaala kala duwan xoogsaduhu bilaash ugu shaqeeyo hantigoostaha, qiimaha uu dhaliyana oo hantigoostuhu qaatana, lagu magacaabo qiimihii burada ahaa (qiimihii siyaasadda ahaa). Markis iyo Engelis waxay falsafaddooda gundhig uga dhigeen falsafaddii Hegel iyo tii Fuwerbakh, kuwaasoo falsafaddoodu dowr weyn ka cayaartay horumarka falsafadda cilmiga ku dhisan, inkastoo aan falsafadoodu aad u dhammayn. Markis iyo Engelis iyagoo falsafaddii culimada aan dusha ku soo sheegnay waxyaala badan ka qaatay waxay dejiyeen falsafad hantiwadaag cilmiga ku dhisan, falsafaddaasoo si run ah uga warramaysa una faaqideysa xeerarka guud ee nolosha dunida.

## WAA MAXAY HANTIWADAAGGU?

### Hantiwadaagga iyo socodka Taariikhda.

Qarnigii 16aad iyo 18aad ayaa Qaaradda Yurub habka hantigoosigu ka abuurmay isaga oo beddeley habkii dhulgoosiga ahaa. Habkaasi wuxuu dhashay markii xoogga tacabku horumar gaaray ee uu soo baxay makiinado iyo wershado tekniko cusub ku shaqeeya. Halkaas waxaa ku curyaamey dhaqaalihii farsamada gacanta ee yar-yaraa. Habkaasi wuxuu xoogeyey dabaqadda burjuwaasiyadda oo dhaqaalihii iyo taladii siyaasiga ahayd labada qabsatay. Dadka shaqeya ee iyagu tacabka dhaliyaa noloshii kadeedka iyo isku dulnoolaanta ahayd kama ay bixin, waayo hantigoosigu qaab cusub oo dhii-

gmiirad ah ayuunbuu kii hore ku beddeley. Habka hantigoosigu wuxuu dabaqada burjuwaasiyadda ka barbar abuuray dabaqada shaqaalaha ee barolitaariga ah; dabaqaddaas oo ta ugu tirada iyo tamarta badan oo burjuwaasiyadda ka soo horjeedda ah. Isla markaas labadaas kooxood waxaa weheliyey dhulgoosatadii, oo inkasta oo dabaqadda hantigoosatadu ka gacan sarreyey, aan wada tirtirmin, sidaas darteedna ay jireen dad dhulwaaweyn leh oo beeraleyda dulleysta. Taasi waxay keentay in bulshada hantigoosatadu ka dhisanto laba kooxood oo waaweyn halganna ka dhexeeyo, oo ah burjuwaasiyadda iyo haraaga dhulgoosatada, shaqaalaha baroletaariga ah iyo kooxda beeraleyda. Waxaa kale oo intaas weheliyey xubnaha indheer-garatada iyo dadka farsamada yar yar leh.

Arrintaa waxaa ka dhashay in niman fakirayaal ah oo aqoon lihi marar badan u baqaan in habka isku dulnoolaanta la tirtiro oo la dhiso hab hantiwadaag ah oo aan dulmi lahayn. Hase ahaatee nimankaasu ma garan sida habka hantigoosiga ah loo baabi'in karo mid hantiwadaag ahna loo dhisi karo. Nimankaas qaarkood kooxda hantigoosatada ayey ugu baaqi jireen in ay keli lahaanta iska daayaan oo hantiwadaag dhisaan' qaar kalena waxay qabeen in dadka marka hore wax la baro, qaarna waxay isku dayeen in ay beelo hantiwadaaga abuuraan. Nimankaas, sida muuqata waxayna garan kaalinta dabaqadda shaqaalaha iyo cidda ay bahaysan karto, waxaa kale oo aaney garan in si hantiwadaag loo dhiso, loo baahan yahay in dabaqadda shaqaalaha iyo horusocodku talada ka qabsadaan hantigoosatada, oo dhisaan dawlad dadka shaqeeyaa leeyihiin oo fulisa dhismaha bulshada hantiwadaagga ah. Hantiwadaagga nimankaasi u baaqayeen, sidaa darteed, waxaa lagu magacaabay «Hantiwadaaggii riyada ahaa».

Nimankaas kadib ayaa fikradda hantiwadaagga cilmiga ahi dhalatay waxaana keenay K. Maarks iyo F. Enjels.

Maarks iyo Enjils waxay fikraddooda ka billaabeen in ay marka hore bulshada iyo taariikhda si cilmi ah u baaraan, waxaanay gaareen in taariikhda bulshadu ku socoto qawaaniin cilmi oo aan ku xirneyn qof wuxuu qabo ama uu jecel yahay, sidaas ayey intii taariikhdu hab soo martay u ahaayeen qaar ku socda qawaaniin cilmi ah.



Bulshada hantigoosiga ah markii ay baareen waxay ogaadeen in ninka shaqaalaha ahi ku qasban yahay in uu xooggiisa ninka hantigoosiga ah ka gado, ninkaas hantigoosataha ahise uu shaqaalaha saacado badan oo aanu wax lacag ah uga celin ku shaqeysanayo, halkaasna ka abuurmeyso tacab dheeraad ah (qiimaha dheeraadka ah) oo shaqaaluhu soo saaro, ninkase hantigoosataha ahi bilaash kula wareego isaga oon shaqaalaha waxba uga celin. Halkaas waxaa ka dhasha iska horimaad iyo halgan aan heshiis lahayn oo dhex mara dabaqaadda shaqaalaha iyo hantigoosatada. Halgankaasi, inkasta oo uu heerar kala geddisan maro, qaabab kala duwanna uu qaadan karo hadba waayaha waddan kasta leeyahay darteed, haddana culimada hantiwadaagga cilmiga ahi waxay caddeeyeen in ay lama huraan tahay in halgankaasi ku dambeyn doono gu-usha shaqaalaha, dhismaha bulshada hantiwadaagga ah iyo baaba'a habka hantigoosiga ah.

**Kacaanka Hantiwadaagga ah.**

Culimadii cilmiga hantiwadaagga dejiyey, markii ay taariikhda bulshada aadamigu soo martay derseen, halganka iyo dagaalka dabaqiga ee ka socda bulshada hantigoosadka ku dhaqanna arkeen, ayaa waxaa si run ah ugu muuqatay in aanay suuragal ahayn in dabaqadda hantigoosatada ah iyo cidda la jirtaaba shaqaalaha u daneeyaan oo hantidooda gaar ahaaneed baabi'iyaan kadibna hantiwadaag dhisaan. Sidaas darteed waxay run ahaan u ogaadeen in halganka dabaqadda shaqaalaha iyo xoogagga la bah ahi dhalin doonaan kacaan hantiwadaag ah oo talada ka qaadi doonaan dabaqadda hantigoosatada ka dibna dadweynaha horusocodka ahi bulsho hantiwadaaga dhisi-doonaan.

Kacaanka hantiwadaagga ahi ma aha wax markii la doono la sameyn karo ee wuxuu ku xiran yahay heerka dhaqaalaha dalku joogo iyo laxaadka halganka dabaqigu le'eg yahay. Dhinac kalena kacaanka hantiwadaagga ahi isku qaab keli ah waddannada adduunka ugama wada dhalan karo ee mar kasta qaabab kala geddisan buu u dhashaa, taasina waxay ku xiran tahay hadba waayaha dalkaas yaal.

## DHISMAHA BULSHADA HANTIWADAAGGA AH.

Kacaanka hantiwadaagga ahi marka uu dhasho waxaa ka

horyimaada xil iyo hawl aad u adag oo ah in la dhiso bulsho hantiwadaag ah lana tirtiro habkii hore ee ku dhisnaa isku dulnoolaanta iyo kala sarreynta. Xilkaas waxaa ka horyimaada dagaal ay soo qaadaan dabaqadidhii taliska laga qaaday oo raba in ay habkii iyaga u danta ahaa soo celiyaan taliska dadweynaha shaqeeya ee Kacaanka ahna dumiyaan. Sidaas darteed hawlaha dabaqadda shaqaalaha iyo xoogagga ay bahaysato waqtigaas ka (waqtiga kala gaarka) horyimaada waxaa ka mid ah dhidbidda xukunka iyo dawladda dadweynaha shaqeeya iyo tirtiridda turunturrooyinka dibusocodka uu dhigayo. Halgankaas oo mid dabaqiya ah waxaa hoggaamiya dabaqadda shaqaalaha oo uu horseed u yahay xisbi hantiwadaag ahi. Halgankaasi waddannada kala geddisan wajiyo kala duwan buu leeyahay, waxayna taasi ku xiran tahay waddan kasta waayihiisa gaar ahaaneed. Dawladda hantiwadaagga ahi waxay kale oo qabataa hoggaaminta dhismaha dhaqaalaha hantiwadaagga ah, taasoo ah tirtiridda keli lahaanshaha hubka tacabka iyo horumarinta teknikada xagga sancada iyo beeraha, taas oo dadweynaha shaqeeya maamulkeeda gacanta ku qabto, taliskeeda guudna ka qeybgalo. Halkaas ayaa waxaa ka dhasha dimoqraadiyadda dadweynaha.

Waxaa hawlaha Kacaanka hantiwadaagga ahi fuliyo ka mid ah qarameynta xubnaha waaweyn ee dhaqaalaha, sida Wershadaha, Gaadiidka, xoogga wax dhaqaaja, (energy) beeraha waaweyn, Bankiyada iwm. Arrinta qarameynta dalalka kala duwan isku si ugama wada dhacdo waayo waxay mar kasta ku xiran tahay dal walba waayihiisa. Qarameynta, waxaa ka dhasha dhaqaalaha qeybtiisa dawladdu gacanta ku hayso, oo dhaqaalaha dalka guud ahaantiis hoggaamisa ilaa dhaqaaluhu dhammaantiis wada hantiwadaagoobo; taasoo ka dhalaneysa horumarka dhaqaalaha iyo teknikada abuureysa dhaqaale tacab ballaaran leh.

Waxaa kale oo hawlaha Kacaanka hantiwadaagga ahi fuliyo ka mid ah tacab-wadaajinta beeraha. Si dhaqaalaha beeraha loo hantiwadaageeyo waxa la abuuraa laba jaad oo beero ah: beeraha waaweyn ee dawladda leedahay, waxayna badanaa ka dhashaan beerihii waaweynaa ee laga qaaday hantigoosatadii hore ama gumeysigii, sida beeraha qasabka-Sonkorta ee dalka Kuuba, ama beerihii waaweynaa ee dawladda



Aljeeriya ka dhaxashay gumeysigii Faransiiska. Waxaa kale oo beeraha dawladdu ka dhashaan dhul cusub oo dawladdu abuurto. Labadaas nooc waxaa ka mid ah beerta Sonkorta ee Jowhar oo shisheeye lagala wareegay iyo beeraha ay dawladda Kacaanku abuurtay. Jaadka labaad ee hantiwadaageynta beeruhu waa iyada oo beeraleyda danyarta ah ku uruurto iskaashatooyin. Iskaashatooyinku ma aha wax mar kali ah la dhameys tiri waayo qofka beeraleyda ah ee muddo badan u bartay lahaanshaha dhulka laguma qasbi karo in uu iskaashato heer sare ah ku biiro, wuxuu u baahan yahay waqti uu ku barto in iskaashigu uga nafci badan yahay keli beerashada. Sidaas darteed iskaashiga beeruhu wuxuu soo maraa heerar kala sarreeya. Waxaana ugu sarreeya heerka sare oo ah in beeraleydu dhulka, qalabka iyo xoogga shaqada isku darsadaan, tacabka soo baxana ku qaybsadaan qof iyo shaqadiisa; iyada oo isla markaas qofka loo oggol yahay inuu yeesho dhul yar oo uu goonni uu beerto iyo xoolo yar sida dhowr sac, ama xoogaa Digaag ah. Heerkaas ka horreeya waxaa ka mid noqon kara in dhulku gooni loo kala lahaado dhulka iyo xoolahoodaba ayse iska kaashadaan xagga qalabka iyo suuq geynta tacabka, tacabkase u qeybsadaan qof iyo baaxadda dhulkiisa. Heerkani waa mid ku meel gaar ah oo loo maro heerka sare ee tacabwadaagta buuxda, waxaana looga jeedaa in beeraleyda lagu baro nafciga iskaashiga. (Heerkaas waxaa lagu magacaabaa ujeeddo badan).

Dhismaha iskaashatooyinka wuxuu u baahan yahay lacag, qalabka teknikada iyo daawooyinka beeraha. Taasina waxaa ka caawisa dawladda hantiwadaagga ah iyo dabaqadda shaqaalaha warshadaha ku sameeya qalabka beeruhu u baahan yihiin, isla markaas beeraleydu waxay soo saaraan alaabta ceeriin ee warshaddu u baahan tahay iyo cuntada shaqaalaha u baahan yihiin. Halkaas waxaa ku xoogeysta isbahaysiga shaqaalaha iyo beeraleyda.

Waxaa kale oo hawlaha Kacaanka hantiwadaaggu fuliyo ka mid ah warshadeynta dhaqaalaha dalka. Taas waxaa looga jeedaa in la dhiso saldhig tekniko ah oo dhaqaalaha hantiwadaaggu isku taago; waayo bulsho hantiwadaag ah lama dhisi karo haddii aan saldhig warshadeed oo xoog lehi

dhaqaalaha hoggaamineyn. Waxaa sidaas khasbaya hantiwadaagga oo aan ku dhismi karin dhaqaalaha tacabka yar ee u baahan tacab ballaaran oo xoog leh, sidaas darteed waa in la abuuro wershado xoog leh oo sameeya qalabka wax lagu tacab.

Warshadeyntu waxay lagama maarmaan u tahay xoojinta hantida guud ee dalka hantiwadaagga dhisaya, horumarinta tacabka beeraha ee qalabka beeraha ee cusub iyo kor u qaadidda saldhigga teknikada dhaqaalaha guud ahaan. Waxay kale oo Warshadeyntu lagama maarmaan u tahay kordhinta tiridda iyo garashada dabaqadda shaqaalaha ee dhismaha bulshada hantiwadaagga hoggaamineysa.

Kacaanka hantiwadaagga ahi wuxuu hirgeliyaa Kacaanka dhaqanka iyo aqoonta. Wuxuu ku dhaqaaqaa in si dadka dani ugu jirto looga faa'iideysto cilmigii, aqoontii iyo fankii aadamigu taariikhda dheer iska soo dhaxlayey. Taas ujeeddadeedu waxa weeye in aan dhaqankii iyo aqoontii hore laga tegeyn ee si dadka waxtar u ah looga faa'iideysto, iyadoo wixii aan waxtar ahayn la iska dhaafayo. Isla markaas waxaa taas lagu daraa aqoonta iyo dhaqanka tijaabada cusub laga helaayo.

Dulucda Kacaanka dhaqanka iyo aqoonta waxaa kale oo ka mid ah in waxbarashada dadka lagu baahiyo oo la tirtiro aqoondarradii dadka shaqeeya haysatey oo ka dhalatay habkii is-kadeedka ahaa ee dadka intiisa badani waxbarashada ka qadiyey. Waxaa taas la jira in dadka la baro Aydoloojiyada hantiwadaagga cilmiga ah oo aqoontooda siyaasiga ah kor loo qaado.

Kacaanka dhaqanka iyo aqoontu ma aha wax mar keliya la fuliyo ee waa hawl joogto ah mar kastana barbar socota dhismaha bulshada hantiwadaagga waxaana ay la socotaa hawlaha hantiwadaageynta dhaqaalaha, wershadeynta dhismaha Iskaashatooyinka iwm.

Kacaanka hantiwadaagga ahi marka uu hawlahaas aannu soo sheegnay fulinaayo wuxuu ku socdaa qorsho uu dejistey oo caddayaysa muddo kasta heerka uu rabo inuu ka gaa-



ro xagga dhaqaalaha, sancada, beeraha, gaadiidka iyo is-gaarsiinta, aqoonta iyo waxbarashada, nolosha bulshada iwm. Qorshahaasi mar walba wuxuu u jeedaa xoojinta bulshada hantiwadaagga ah iyo kor u dhigga nolosha dadka.

Ugu dambeystii bulshada hantiwadaagga ahi marka ay dhisanto waxay noqoneysaa mid ka dhisan xoogga shaqaalaha beeraleyda iyo indheer-garatada labadaas xoog ka soo dhex baxday. Waxaana bulshada ka dhex baxaya dabaqadihii hantigoosatada iyo dhulgoosatada ahaa ee dhiigga dadka ku noolaa. Qof kasta oo bulshada ku dhex nooli wuxuu noqonayaa mid murqiisa amase maskaxdiisa maala oo ku nool. Halkaas ayaa isku dulnoolaan oo dhammi ku baaba'aysaa.

## QAWAANIINTA GUUD EE DHISMAHA HANTIWADAAGA IYO SIYAABAHA LOOGA HIRGELIYO WADDAMADA KALA JAADKA AH.

Dhismaha Bulshada hantiwadaagga ahi waa hawl aad u adag aadna u ballaaran ee ku dhisan qawaaniin guud iyo sharciyo tilmaamaya dhinac kasta ee nolosha bulshada, tusayana yoolalka la doonayo in la gaaro. Qawaaniinta guud waa kuwa laga doonayo in uu hirgeliyo waddan kasta ee dhisaya hantiwadaag. Qawaaniintaas guud waxaa khasab ka dhigaya: Marka la hirgelinayo hantiwadaagga waa in la tixgeliyo heerka dhaqaalaha ee bulshadu joogto, xiriirka ka dhexeeya dabaqadaha iyo inta ay awood u leeyihiin kuwa dibusocodka ahi inay ishortaagaan horumarka Ummadda. Intaa waxaa dheer tirada iyo tabarta beesha hantiwadaagga ah ee adduunka oo maalinba maalinta ka dambeysa sii siyaadeysa. In si isku mid ah ee weji keliya leh looga dhiso hantiwadaagga waddamo kala jaad ah waxaa diidaya caadooyinka taariikhiga ah ee waddammada kala jaadka ah, heerka aqoonta dadka iyo waxyaabo kale ee u gaar ah. Waxyaabahaas oo dhammi waxay ina tusayaan in qawaaniinta guud maahane waddan kasta ay ku sugan yihiin kuwa u gaar ah ee dhismaha hantiwadaagga.

Culimada waddama hantiwadaaggu waxay qabtaa in qawaaniinta guud iyo kuwa gaarka ah ee dhismaha hantiwadaaggu ay yihiin kuwaa isku xiran ee aan iska soo horjeedin. Waxay shaaca ka qaadaan fikradaha dibusocodka ah, kuwaas oo

isku daya in ay iska soo horjeediyaan Qawaaniintaas. Fikradaha waxaa ka mid ah kuwa dhahaya in aan loo baahnayn in lagu dhaqmo qawaaniinta guud ee dhismaha hantiwadaagga ee waddan kasta si uu ku dhiso habkaas ay tahay khasab in uu tixgeliyo waxyaabaha isaga u khaaska ah, ee uu la yimaado qawaaniin u gaar ah ee ka duwan kuwa guud.

Dhismaha Dawladaha hantigoosadka ahi aad ayuu u kala duwan yahay, laakiin dhuuxoodu waa mid qudha, waana isku wada mid waa diktatuuriyada burjuwaasiyiinta, sidaas oo kale ayaa dhismaha hantiwadaaggu ee waddammada kala jaadihi u kala duwanaan doonaan, dhuuxoodu wuxuu noqonaa mid qudha diktatuuriyada broletaariga, inkastoo mabda'a Markisim-Leninism uu tixgelinaayo dowrka ay ciyaarayaan waxyaabaha u gaar ah waddan kasta ee dhisaya bulsho hantiwadaag ah isla markaa wuxuu tusaaleynayaa ineyan kuwaasi beddeli karin dowrka qawaaniinta guud, oo ay khasab tahay wada jirkoodu. Madaxweynaha GSK Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre, hadal uu u jeediyey Ummadda wuxuu ku yiri: «Ma jiro mana jiri karo hantiwadaag Afrikaan ah, iyo mid Ruush ah, ee waxaa jira hantiwadaagga cilmiga ku dhisan oo qura, kaas oo u tilmaamaya waddammada oo dhan qawaaniinta guud ee dhismaha hantiwadaagga».

Dhibaatada iyo qaladaadka waaweyn waxaa kale oo keeni kara haddii la damco in la dhiso hantiwadaag, iyada oo aan la tixgelineyn waxyaabaha u gaarka ah waddan kasta ee lagu ekaado qawaaniinta guud keliya.

«Annagu haddaynu Soomaali nahay», ayuu yiri Jaalle Siyaad, «waxaan wadnaa hantiwadaag cilmi ku dhisan laakiin lagu dhaqan gelinayo Ummadda halkan deggan duruufteeda u gaarka ah», Isaga oo aad u tilmaamay sida ay isu waafaqsanyihiin qawaaniinta guud iyo kuwa gaar ahaaneed, Jaalle Siyaad wuxuu yiri: «Innagu waxaynnu dooneynaa inaan hantiwadaagga runta ah iyo waayaha Soomaaliya yaal isku dabbaqno oo iyagoo nabad qaba ay hirgalaan oo ay xididdo dheer la baxaan».



Quwaaniinta guud ee dhismaha hantiwadaagga waa kuwa saameynaya dhinac kasta ee nolosha bulshada. Qawaaniintaasi waxay u kala qeybsan yihiin kuwa ku saabsan siyaasadda iyo bulshada, kuwa ku saabsan dhaqaalaha iyo kuwa ku saabsan aqoonta iyo garashada.

**Qawaaniinta guud ee dhinaca Siyaasadda ku saabsan:**

1. In habka hantigoosadka lagu beddeli karo Kacaan hantiwadaag ah oo keliya iyo dhalashada taliska ay leeyihiin Shaqaalaha oo bahaystay beeraleyda iyo xoogag kale ee horusocodka ah.
2. Inuu jiro Urur siyaasi ah oo hantiwadaag ah oo hoggaanka gacanta ku haya.

**Qawaaniinta guud ee dhinaca bulshada:**

1. In la baabi'iyo dhismihii bulshada hantigoosadka ahayd oo saldhiggeeddu ahaa dabaqadda hantigoosadka ah iyo ciddii la halmaasha.
2. In la dhiso bulsho ka dhisan dabaqadaha Shaqaalaha, Beeraleyda iyo indheergaratada horusocodka ah.

**Qawaaniinta guud ee dhaqaalaha:**

1. In la dhiso dhaqaale ku habaysan wada lahaanshaha guud ee qalabka tacabka kana kooban qeybta dawladda iyo qeybta Iskaashatooyinka.
2. In markasta dhaqaaluhu ku socodo qorshe guud ahaaneed oo ujeeddadiisu tahay horumarinta dhaqaalaha iyo daryeelidda danaha dadweynaha.

Iyadoo aan halkan lagu wada dhammeyn karin qawaaniinta guud ayaa guud ahaan inta kor ku xusan lagu soo koobay

Diktatuuriyada broletaarigu habab badan ayey soo martay. Tii ugu horreysay waxay ahayd mid la magac baxday «KUMUUNAHA BAARIS» 1871. Tii labaad waxay ahayd xukunkii Soofiyeetka ee dalka Ruushka ka dhashay 1917kii, waxaase saddexeeya tii la magac baxday «Demoqraadiga Ummadda» ee lagu hirgeliyey bartamaha iyo Koonfur-bari ee Yurub iyo Aasiya, kaddib dagaalkii labaad ee dunida, waxa lagaga

maarmaan ah in la xuso diktatuuriyada droletaariga ah oo xukun lagu maamulo waddanka iyo dadkaba ay tahay nidaam aan waareyn abidkii, waayo shaqaaluhu waa dabaqadda qura ee aan yoolkiisu ahayn in uu xukunka weligii haysto. Wuxuu xukunka u qabsanayaa oo keliya in uu baabi'iyo dhiigmiiradka, isku kornoolaashaha iyo dibusocodka, isla markaasna uu xaqaajiyo guusha hantiwadaagga.

Markii ditatuurada shaqaaluhu fuliso waajibaadkaas weyn ee saaran si dedeg ah ayuu xukunkii isugu beddelayaa mid Ummadda oo dhan ka dhexeeya. Waajibka kale ee saaran shaqaalaha oo ay tahay in uu xalliyo waxa weeye in la tirtiro isaddoonsiga ee waddan kasta iskiis xor u ahaado, isla markaana la xoojiyo xiriirka iyo isbahaysiga Jaallennimada ah ee ka dhexeeya dalalka iyo dadyowga horusocodka ah, si looga gaaro walaaltimmo buuxda ee dhex mara dunida oo idil. Qeynuun kale ee aad u muhiim ah ee ka mid ah qawaaniintii guud ee dhismaha hantiwadaagga waxa weeye kan saameynaya dhaqaalaha. Dhaqaaluhu waa xubin muhiim ah ee dowr weyn ka ciyaareysa nolosha bulshada.

Waddannada kala geddisan habka wax looga qarameeyo wuxuu noqon karaa dhowr jaad oo ay ka mid yihiin: In dawladdu hantigoosatada wixii lagala wareegey wax uga celiyo iyo in lagala wareego iyadoon waxba loo celin.

Waxaa kale oo jirta in marka iskaashatooyinka la samaynayo loo maro heerar kala sarreeya, waxaa ugu horreeya heerka ujeeddo badan, oo ah in dadku iska kaashado dhinaca qalabka iyo suuqa. Heerka labaad oo ah tacab wadaag tusale ahaan dadka beeraleyda ah isagoo qoyskastaba uu leeyahay dhul gaar ah ayaa haddana waxay isku darsadaan dhul kale oo ay wadajir u wada tacabaan dheeftiisna ku qeybsadaan qof walba shaqaduu ka geystay beerta tacab wadaagta ah. Heerka saddexaad oo ugu sareeya oo ah Iskaashatada heerka sare waa marka dhulka, qalabka iyo tacabkaba dadka iskaashatada ku jira ka wada dhexeeyaan, dheeftana lagu qaybsado qof iyo shaqadiis iyadoo uu si buuxda u baxayo lahaanshihii gaar ahaaneed.

Labada heer ee hore ma aha iskaashatooyin hantiwadaag



buuxa ah, ee waa marxalado loogu gudbayo iskaashatooyinka hantiwadaagga. Mar kasta waa in aan la khasbin dadka iskaashatooyinka ku jira ama gelaya ee waa in ay ku galaan garashadooda iyo ikhtiyaarkooda. Marxaladahaas aannu soo sheegnay ma aha qaar waddan kasta qawaaniin looga dhigi karo ee abaabulidda iyo samaynta iskaashatooyinka hantiwadaaggu waxay ku xiran yihiin marxaladda iyo heerka waddanka hantiwadaagga qaatay marayo. Waxaa dhici karta inaan waddanada qaarkood u baahan inay soo maraan saddexda marxaladoodba. Waxaa kale oo ka mid ah qawaaniinta guud ee dhismaha hantiwadaagga waxa weeye kan saameeya xagga garashada. Sida aynu ogsoonnahay Kacaanka hantiwadaagga ah waxa dhaliya dadka, iyagaana dhisa bulsho hantiwadaag ah. Sidaas darteed waa in la sameeyo horumar saameeya xagga idoloojiyada, kaas oo fulinaya hawlaha soo socda:

— In uu baabi'iyo wax qoris-akhris la'aanta dadka;

— In la abuuro kaadir wax garad ah oo hantiwadaag ah.

— In wax laga beddelo tacliintii hore doodna lagu sameeyo (Kiritiko);

— In la abuuro tacliin hab qawaaniin iyo micna hantiwadaag leh;

— In aqoonta lagu fidiyo xoogsatada;

— In waxgaradka xoogsatada la beddelo, korna loo qaado garashada iyo awooddooda xagga fikradda Kacaanka.

Intaa waxaa ku dhan qawaaniinta guud ee dhismaha hantiwadaagga ee ay khasab tahay in laga helo waddan kasta ee dhisaya hantiwadaag. Kacaankii 21kii Oktoober waa mid himiladiisa weyn iyo yoolkiisa taariikhiga ihi ay yihiin in uu dhiso bulsho hantiwadaag ah.

Golaha Sare ee Kacaanku aad ayuu u dhuuxay micnaha adduun weynaha uu u leeyahay mada'a Markiisimo-Leninismo, wuxuuna gareysanyahay in qodobbada ugu muhiimsan ee mabda'aasi qiimo weyn u leeyihiin waddankeenna, saldhigga siyaasaddeenna aynu kuwaas ka dhigeyno.

## HORSEEDKA HANTIWADAAGGA (Kaadir)

Horseedka hantiwadaaggu waa dad habeysan, meel wax ka wada arakaya, hantiwadaagga wada aaminsan, aqoon dheeraad ah u leh habaynta, dhismaha iyo hirgelinta hantiwadaagga cilmiga ku dhisan; iyo sida tiyooriyadda loogu hirgelinaayo dabeecadaha iyo dhaqanada kala geddisan oo bulsho kastaa gaarka u leedahay. Dadkaas loo tabaray inay hoggaanka u qaadaan, horseedna u noqdaan dabaqada u halgamaaya inay dhisaan ama dhisaya bulsho cusub oo hantiwadaag ah.

Horseedka hantiwadaaggu wuxuu ka soo dhex baxay waayaha gudaha ee bulsho kastaa leedahay. Waa dad ay tababartay, wax tustay caddaalad darrida, kala sarreynta, iyo dhiigmiiradka dabaqaadka iska soo horjeeda ee ay bulshada hantigoosadka ku jirtaa u kala qeybsan tahay. Horseedka hantiwadaaggu wuxuu ilaaliyaa, dantooda u halgamaa, la dan yahay dabaqaadka dulman ee la dhiigmiirto oo ay ka mid yihiin shaqaalaha beeraleyda iyo dadweynaha danyarta ee tirada badan.

Horseedka hantiwadaaggu wax nacfi ah ama darajo ah oo uu dadka dheer yahay ma jirto. Waxa keli ah oo uu dadka dheer yahay waa aragti hantiwadaag ah iyo hawlkarnimo dheeraad ah oo ku waajibtay, isaga oon waxba ku xirin inuu waqti kasta oo suuragal ah shaqeeyo tusaalena u noqdo dadka horusocodka ah oo dhan. Haddii aanay jirin dad hantiwadaagga aqoon dheer u leh, aaminsan una halgama hirgelinta iyo daafacaadda mabaadi'da, hantiwadaaggu ma hirgaleen.

Mar haddii hantiwadaaggu yahay hab dhaqaale iyo dhaqan oo cusub marka la dhisaayo wuxuu u baahan yahay aragti



cilmi ah oo cusub, wuxuu u baahan yahay habayn dhaqaale oo cusub, wuxuu u baahan yahay hab maamul iyo nidaam dawli ah oo ka geddisan kii hore ee ku dhisnaa kala sarreynta iyo dhigmiiradka, wuxuu u baahan yahay dimoqraadiyad iyo xiriir bulshonimo oo cusub. Waxaa la abuurayaa oo sare loo dhigayaa dhaqan cusub oo awal maalqabeenku cadaadin jiray, marka waa lagama maarmaan in la helo dad horseed ah cilmina u leh hirgelinta hawlaha aynu soo sheegnay, mar walba diyaar iyo heegan u ah daafacaadda guulaha ay gaadheen.

Mar walba waxaa loo baahan yahay shaqadana hirgelinaysa in horseedka hantiwadaaggu isku xirnaado, oo uu ku hiranayo aragti dheer oo siyaasi ah saameysa dhan kasta ee nolosha bulshadu ku xiran tahay.

Arrintaas waxaa ay hirgeli kartaa marka la helo urur siyaasi ah oo aragti hantiwadaag leh, hoggaamiya, habeeya oo ay ku soo hirtaan horseedka hantiwadaagga iyo weliba abwaanno tilmaama garashadoodana bisleeya.

Horseedka hantiwadaaggu ma aha inuu bulshada ka go'naado. Waa inuu dadka dhexgalaa, wax la qabaa, la sheekeystaa, la socdaa oo si run ah oo dhab ah ula socda una fahamsanaadaa waxa ay dadku doonayaan iyo dhibaatooyinka ay qabaanba. Horseedka hantiwadaaggu waa inuu dadka dhibaatooyinka ay qabaan la socdaa isaga oo aan hagranayn cilmi, hiil iyo hoo midna. Horseedka hantiwadaaggu waa inuu dulqaad yeeshaa, dhaqankiisu aad u dhisan yahay, oo uu iska dhowraa wax allaale wixii bulsho horusocota ku xun. Horseeduhu waa inuu dadka wax baraa waxna ka bartaa. Horseede ma noqon karo qof hurda, oo aan halna ogeyn.

Horseedka hantiwadaaggu waa mid ku kala jira Ururrada ijtamaaciga ah, xubnaha dhaqaalaha, wasaaradaha, wakaaladaha, laamaha dawladda iyo meel kasta oo shaqa ka socoto. Waqtiga kala guurka waa lagama maarmaan in horseedka hantiwadaaggu qeyb libaax ka qaato hirgelinta hantiwadaagga iyo duminta hantigoosadka xagga dhaqaalaha siyaasadda iyo dhaqanka.

Qaybta 3aad

## GUULIHII KACAANKA 21ka OKTOOBAR
## HORUMARINTA BEERAHA

Inta aan wax kale la gaarin waa in la ogaado qofka bani-aadamka ah waxa uu u baahan yahay oo lagama maarmaanka ah. Haddii in taas laga jawaabo marka horeba qofku wuxuu u baahan yahay dhowr waxyaabood oo muhiim u ah noloshiisa, kuwaasoo ay ka mid yihiin:

1. Cunto;
2. Dhar uu ka huwado dhaxanta iyo cadceeddaba;
3. Iyo hooy (guri) uu galo.

Si intaas lagu helo, waa in tacabka beeraha la kordhiyo, maxaa yeelay iyagaa asaas u ah waxyaabaha nolosha qofka bani-aadamku u baahan tahay. Hase yeeshee qofku waa kan keliya oo ay ku xiran tahay horumarinta bulshada dhan kastaba, saas daraadeed asaga ayaa laga rabaa inuu dabeecadda ka adkaado oo u beddelo hadba sida faa'iido ugu jirto mujtamaca halkaas ku nool.

Haddii taariikhda dib loogu noqdo horumarinta beeruhu waxay soo qaadatay marxalado badan, taasoo markii hore lagu abuuri jirey Yaambo, Dibi iyo ilaa haatan oo lagu abuuro Teknikada cusub, daawooyinka beerinta oo dhulka naaxiya iyo habka waraabinta oo cusub.

Isbeddelka aan kor ku soo sheegnay oo dhan sababihii waday waxaa u weynaa qofka bani-aadanka ah, oo la korayey hadba heerka cilmiga iyo garashada siyaasiga ah.

### WAXTARKA BEERAHA:

Beeruhu waxay u badan yihiin waxyaabaha soo socda:-

1. Waxaa ku nool si toos ah (direct) dadka intiisa badan dadka intiisa yari si aan toos ahayn ayay ugu nooshahay.
2. Beeraha waxaa laga helaa alaabta ceyriin oo Warshaduhu ku shaqeeyaan sida Suufka, Tubaako, Sisin yaanyo iwm.

Saas daraadeed waxaa lagama maarmaan ah in la horumariyo beeraha lana kordhiyo tacabka, taas oo ku xiran hadba

Dawladaha mabda'a hantiwadaagga ku dhaqmaa muhimad weyn bay siiyaan xagga beeraha iyo beeraleydaba, sida ugu hab boon oo ay wax uga qabtaan waatan soo socota:-

1. In la abuuro beero waaweyn oo dawladdu leedahay, kuwaasoo waxtar u leh.
2. Kordhinta tacabaka.
3. Iyo in ay ka caawiyaan beeraleyda xagga teknikada, kaadarka iyo tacliinta.
4. In la abuuro iskaashatooyin lana uruuriyo beeralayda xooggooda, maskaxdooda, taasoo waxtar weyn u leh xagga kordhinta tacabka. Isbahaysiga shaqaalaha iyo beeraleyda iyo tirtiridda farqiga ku dhex jira miyiga iyo magaalada.

Haddii aan u soo gudubno waddankeenna Soomaaliya, wuxuu gumeysigu na dhacsiiyey in uu waddankeennu yahay meel lama degaan ah oo ku habboonayn in wax ka baxaan, laakiin taasi waxay beenowday markii baaris hor leh loogu noqday waddankeenna oo la ogaaday in 8 milyan oo hektar waddankeenna la beeri karo.

Dawladihii hore ee dibusocodka ahaa wax ballaaran kama qaban horumarinta beeraha waddanka iyo nolosha beeraleyda, waxaana dhacday in fashal weyni ka dhacay abuurintaankii iskaashatooyinka iyo beerihii waddamada aan saaxiibka nahay ay samayn lahaayeen, kuwaasoo ay ka mid yihiin «Jilib iyo Togwajaale».

Intii kacaanku dhashay waxaa si aad ah wax looga qabtay dhinaca beeraha taasoo aad looga arki karo jaangooyada 5ta sano in loogu talogalay horumarinta beeraha lacag dhan Sh So. 1.124.496.907, taasoo ku dhow miisaaniyaddii 5ta sano loogu tala galay horumarinta, saddex-meelood meel. Lacagtaas waxay galaysaa mashruucyo waaweyn oo waxtar u leh kordhinta tacabka beeraha, kuwaas oo ay ka mid yihiin: Biya-xireenka Faanoole, Baardheere iyo biyakeydinta Jawhar, taasoo naga furan doonta dhibaatadii naga haysatay xagga waraabinta beeraha, waxa kaloo lacagtaas loogu talagalay mashruucyo kale oo

ku tasluqa kordhinta tacabka sida Mashruuca Moordiinle, Mashruuca beeraha Llinta (uguji) Bunbeelmo waaweyn iyo dhisidda warshadda Sonkorta ee J/Hoose, iyo horumarinta iskaashatooyinka oo loogu talagalay Sh. So. 47.961.000. Waxaa kaloo aan la halmaami karin kuna xusan jaangooyada 5ta sano in la kordhiyo baarista cilmiga xagga beeraha, iyo kordhinta kaadarka garaadka siyaasika ah, leh.

Sidaas daraadeed waxaan halkan ka arkaynaa in isbeddel weyn ka dhacay xagga beeraha intii ka dambaysay dhalashadii Kacaankii 21kii Oktoobar, inkasta oo waddanka abaaro ka dhaceen ay suurtowdo in ay wax u dhimeen horumarkeenni xagga beeraha.

## KAALINTA ISKAASHATOOYINKA

Erayga Iskaashigu waa mid taariikh fog leh, inkasta oo ujeeddooyin kala duwan uu lahaa, taas oo la socotay hadba heerka dunidu marayso. Haddii aan soo qaadanno heerkii ugu horreeyey dunida waxaa jiray iskaashi xagga dhaqaalaha ah, wax wada ugaarsi si ay quwaddooda isugu keenaan cuntana ula soo wada baxaan, iyo in ay iska daafacaan bahallada naftooda waxyeelleynaya.

Hababkii ka dambeeyey waxaa jiray iskaashi la socda had ba bulshadaas heerka ay ka marayso xagga dhaqaalaha, dhaqanka iyo waxgaradkaba. Markii la soo gaaray habkii hantigoosiga ahaa waxaa dhashay iskaashatooyin ku dhisnaa hab dhiigmiirad, kuwaasoo ahaa dad maalqabeen ah, rabana shaqaalaha iyo beeraleyda in ay dhiigmiirtaan iyaga oo huwan magaca iskaashatooyinka, raba in ay isku koobaan kheyraadka waddanka.

Habka hantiwadaagga cilmiga ku dhisan wuxuu na faryaa in ay iskaashatooyinku noqdaan kuwo ku dhisan caddaalad, shaqo iyo sinnaan (kaan shaqeyn wax cunimaayo). Soomaaliya Iskaashatooyinku waa ku cusub yihiin, waxay billowdeen intii aan gobannimada helnay kaddib, kuwaasoo ku abuurmay si aan habboonayn oo ay ku jirto boob iyo dhac, dantooduna ahayd waxyaabaha soo socda:-



1. In ay dhacaan dhulka beeraleyda, hantiyaanna keenista iyo diridda badeecadda waddanka.
2. In ay deyn iyo deeqba xoolaha shacbiga ku isticmaalaan hadba sida dantooda khaaska ahi ku jirto.
3. Iyo in ay is-hortaagaan si ayan u dhalan iskaashatooyinku.

Iskaashatooyinkaas aan hore u soo sheegnay waxaa geli karay qofkii xoolo leh ama xukuumada wax ka haya, xataa ajnabina ha ahaadee, sharci u yiil ma jirin oo waxay ku dhaqmi jireen (Civil Law). Sharcigii ugu horreeyey ee iskaashatooyinka Soomaaliyeed wuxuu soo baxay 14kii Jannaayo 1969, kaas oo ku dhisnaa hab hantigoosadnimo oo aan u danaynayn dadka danta yar ah, kuwaas oo ah beeraleyda yar-yar, farsamayaqaanada yaryar .... iwm. Iskaashatooyinkaas horay aan u soo magacownay badidoodu way fashalmeen ,wax horukac ahna waddanka uma soo hoynin.

Oktoobar 4dii 1973, waxaa soo baxay sharci habaynaya iskaashatooyinka Soomaaliyeed, kaas oo sheegayey qofka ka mid noqon kara iyo sida faa'iidada ka soo baxda loo qeybsanyo. Iskaashato: waa dad isu uruuray, iskuna darsaday hanti iyo xoogba, kuna dhisan hab dimoqraadi iyo madaxbannaani ah, waxay isu geysanayaanna waxaa ka mid ah dhul iyo qalabka wax lagu soo saaro. Habka hantiwadaagga, iskaashatadu waa meesha labaad ee lahaanshaha:

b) Lahaanshaha shicbiga (dawladda).

t) Lahaanshaha iskaashatooyinka.

Sida kor ku cad kacaan hantiwadaag ah ma najixi karo isaga oo aan muhimad weyn siin iskaashatooyinka, khaasatan xagga beeraha oo ay ku nooshahay dadka intiisa badan 60%. Jaalle Lenin wuxuu yiri: «Kacaanku yuusan gaajo u dhiman» isagoo ka wada in ay isbahaystaan xoogagga horusocodka ah oo ay ka mid yihiin shaqaale, beeraley ....iwm.

WAXTARKA ISKAASHATOOYINKA:

1. Kordhinta heerka wax soo saaridda si loo gaaro isku fillaansho cunto, calafka xoolaha cunaan iyo alaabta

cayriin oo warshadaheennu u baahanyihiin.

2. In si wax wada qabsi ah iyo iskaashi loogu hormarinayo maalka shacbiga oo kala firidhsan si loogu isticmaalo qalabka iyo farsamada cusub.

3. In la ilaaliyo nabadda, caddaaladda, sinnaanta, ayadoo la tirtirayo gumeysiga dhaqaalaha ah ee ku hayaan shaqaalaha iyo beeraleyda dhulgoosigu, lacag-dey miyayaasha iyo ganacsatada waaweyn.

4. In la xoojiyo midnimada iyo feejignaanta dadka si loo ciribtiro daandaansiga nacabka gudaha iyo dibaddaba.

5. In laga wada qeyb galo qorshaynta waddanka xagga dhaqaalaha, siyaasadda iyo dhaqanka iyadoo loo siman yahay xuquuqda iyo shaqa helidda ragga iyo haweenkaba.

6. In la hagaajiyo nolosha ijtimaaciga, khaasatan tuulooyinka.

7. In la dejiyo dadka reer guuraaga ah lana tirtiro aqoon darrada.

Si ay iskaashatooyinka qeyb wacan uga qaataan intaas aan soo sheegnay waxaa loo baahan yahay in la gaarsiiyo garaad siyaasi ah, lana baro mabaadi'da taasoo ah tan hantiwadaagga cilmiga ku qotonta, maxaa yeelay beeraleydu waxay noqon kartaa ama dibusocod ama kacaan, waxayse ku xirantahay hadba sida loola shaqeeyo. Jaalle Lenin wuxuu yiri: «Beeraledu waa laba nafoodle»; taasoo ah in ay dhinac ka leeyihiin beer gaar ah, amase dhul yar iyo xoolo yar, dhinacna sabool ka yihiin, saas waa in la garansiiyo in ay yihiin Borolataariyad.

Siyaabaha ay dawladdu gacan u siinayso si ay ku gutaan iskaashatooyinku waajibkooda waxa ka mid ah:

1. In loo sameeyo sharci habaynaya sida ay wax isugu darsanayaan iyo sida ay u qaybsanaayaan.

2. In dawladdu ballan qaaddo nabadgelyadooda si ayan hantigoosadka iyo dhulgoosadku u curyaaminin.



3. In loo sahlo meel ay wax ka soo saaraan sida dhul, daar iyo qalab ay wax ku soo saaraan sida cagafcagaf, matoor, doonyo, gaadiid, abuur ... iwm.

4. Bankiyada oo deyn waqtigeedu dheer yahay laga siiyo.

5. Garaadkooda siyaasiga oo kor loo qaado, si ay u gaaraan in ay ku shaqaystaan qalabka iyo cilmiga cusub, una qaddariyaan baahida loo qabo kordhinta iyo isku fillaanshaha.

Kacaanka hantiwadaagga ah ee Soomaaliyeed wuxuu qaaday tallaabooyin iyo sharciyo qaaya weyn u leh dhismaha Iskaashatooyinka, kuwaasoo uu ugu weynaa sharcigii soo baxay 4tii Oktoobar 1973, Lambarkiisuna ahaa 40, kaas oo ku dhisnaa asaaska Iskaashatooyinka mabaad'da hantiwadaagga, saas daraadeed waxaa waddankeenna ka dhashay Iskaashatooyin badan.

## KA QAYBGALKA SHAQAALAHA MAAMULKA HAWLAHA WASAARADAAH WAKAALADAHA IYO WARSHADAHA QARANKA

Dawladda, Dimoqraadiyadda, iyo xurriyaddu ma ay aha wax aan muuqan oo aan la taaban karayn, ma ay aha wax kor ka ah ama dibadda ka jira mujtamaca iyo dabaqaadkiisa. Saddexduba waxay yihiin wax la arki karo, waxayna ku dhisan yihiin dan dabaqadeed. Dawladdu waxay dhalatay markii uu mujtamacu u qeybsamay dabaqaad iska soo horjeeda, danahooduna isdiidan yihiin (addoonka iyo kuwa wax addoonsada, beeraleyda adeegayaasha ah iyo dhulgoosatada, broletaariga iyo burjuwaasiyadda).

Dawladda, dimuqraadiyadda iyo xurriyaddu waa hubka dabaqaddu ku daryeesho danaheeda dabaqiga ah, waxay leeyihiin dhuux iyo dabeecad dabaqadeed. Dawladdu waxay fulisaa danaha dhaqaale ee dabaqadda hadba talada siyaasadeed gacanta ku hayaa. Habka hantigoosiga dhexdiisa, waxaa mar walba talada siyaasadeed gacanta ku haya burjuwaasiyadda waaweyn ee maalqabeenka ah. Siyaasadda, xeerka, maamulka dawladeed, maxkamadaha, ciidamada qalabka sida, dugsiyada iwm, waxay u wada adeegaan difaaca lahaashada gaar ahaane-

ed, daryeelidda danaha dhaqaale ee maalqabeenka iyo xoojinta habka isku kor noolaadka. Waxay ku jiraan cadaadinta dabaqadaha shaqeeya. Dabaqadda shaqeysa inkastoo ay tahay midda dhalisa barwaaqada uu mujtamacu ku noolyahay, haddana kama ay qeybgasho maamulka iyo qorsheynta tacabka, maxaa yeelay ayadu ma ay laha qalabka tacabka (Wershadaha, dhulka la beerto iwm). Isla markaasna miraha tacabka waxaa gaar ahaan u qaadanaya (boobaya) maalqabeenka aan tacabka ka qeybgelin, laakiin leh qalabka tacabka mushahaarkana ku kireystay shaqaalaha. Shaqada dhexdeeda shaqaalahu kuma uu haysto dimuqraadiyad iyo xurriyad toona. . .waa addoon mushahaaro qaata. Mujtamaca dhexdiisana wuxuu shaqaalahu addoon u yahay saboolnimo, baahi, shaqa li'i, aqoonxumo, cudur, uurxumo iyo dhibaato adduun oo idil, oo wehel u ah inta uu ku hoos noolyahay habka hantigoosigu.

Hantiwadaagga aqoonta ku dhisan, waa miraha ka soo uur baxay tanaaqudaadka (isburiska) iyo loollanka dabaqadeed ee mujtamaca hantigoosiga, waa mabda'a iyo aragtida towriga ah ee shaqaalaha. Guusha, dhalashada, dhismaha, iyo adkeynta habka hantiwadaagga waxaa abaabula, horseed iyo gaarhaye u ah shaqaalaha, beeraleyda iyo xoogagga horusocodka ah oo isbahaystay. Siyaasadda, xeerka, maamulka dawladeed, maxkamadaha, ciidamada qalabka sida, dugsiyada . . .iwm ee habka hantiwadaagga waxay ilaaliyaan danaha guud ee dadweynaha shaqeeya. Waxay u jiraan inay tirtiraan lahaanshada gaar ahaaneed ee qalabka tacabka, oo sabab u ah (tanaaqudaadka) isburiska mujtamaca iyo loollanka dabaqadeed. Mar hadday lahaanshadu tahay mid guud ahaaneed, talada, maamulka iyo qorsheynta hawlaha Wasaaradaha, Wakaaladaha, Warshadaha iyo beeraha waxaa wadajir u leh shaqaalaha. Taasu waa hawl iyo hantiwadaag dhib iyo dheef wadaag, dimuqraadiyad buuxda iyo xurriyad si dhab ah u shaqeyneysa, iskaashi iyo sinnaan, dhibaato oo dhan laga guuleysto, horumar deg-deg ah oo la gaaro.

Madaxweynaha GSK Jaalle Maxamed Siyaad Barre iyo Jaallayaasha kale ee ku jira GSK, ayagoo rumeysan aqoonna u leh taariikhda, Kacaankii 21kii Oktoobar ka dib, waxay shaqaalaha xeer ahaan ugu baaqeen **Ka qeybgelidda Maamulka Wasaaradaha, Wakaaladaha iyo Warshadaha Qaranka.** Ka qeybgelidda Maamulka Shaqada ee shaqaalaha waa saldhigga dhismaha hantiwadaagga iyo hirgelinta dimuqraadiyadda iyo xorriyadda dabaqadeed ee hantiwadaagga.

Xukunka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaalida waxaa maanta gacanta ku haya xoogagga horusocodka ah, towriga ah. Waqtiga kala guurka sida kan aynu ku jirno, xilka shaqaalaha saaran waa mid diyaalektika ah, maxaa yeelay, dhinac waa inay ka dhisaan dalka, hawsha iyo tacabka badiyaan, adke eyaan Qaranka towriga ah, la dagaallamaan dibusocodka gudaha iyo imberyaaliyadda dunida, qaraabakiilka musuqmaasuqa iyo wahsiga. . . .iwm. Dhinaca kalena waa inay daryeelaan danaha dabaqiga ah ee shaqaalaha, xoojiyaan loollanka dabaqadeed ay kaga soo horjeedaan dibusocodka weli sii jira. Inay xoojiyaan Guddiyada shaqaalaha ee Warshadaha iyo meelaha kale oo laga shaqeeyo, inay si dhab ah uga qeybqaataan maamulka shaqada (abaabulidda, qorsheynta, qoridda, rukhseynta, mushahaaro kordhiska iyo gaar ahaan ilaalinta guud iyo baarista), ayagoo dhaqan gelinaya xeerarka GSK ee ku saabsan ka qeybgelidda maamulka. Xilkaas asaga ah shaqaaluhu wuxuu ku gudan karaa, asagoo kor u qaada aqoontiisa dabaqadeed, garaadkiisa siyaasadeed iyo abaabulka ururradiisa.

## FAA'IIDADA KALLUUMEYSIGA IYO KHEYRAADKA BADDEENNA

Innaga oo ah dalka ugu xeeb dheer waddamada Ururka Jaamicadda Carabta ku jira, Qaaradda Afrikana dalkii labaad ka ah xagga badda dhererkeeda, waa nasiibdarro gumeysiga iyo dibudhaca uu na baday oo ah inaynaan isu haysan waddan badeed, nicmada baddeenna ku jidhana aynaan si taabbagal ah uga faa'iideysan ilaa iyo hadda.

Waddan kasta oo dunida korkeeda ku yaal, dhaqaalihiisu wuxuu leeyahay tiirar uu cuskado oo asaas u ah, kuwaas oo dabeecaddu siisay. Markaynu arrintaas eegno waddankeenna waxaa lagu tiriyaa in dhaqaalihiisu ku tiirsan yahay beeraha iyo xoolaha, kuwaasoo iyaguna aan heerkii la rabay gaarsiisnayn. Hase yeeshee haddaynu si cilmi ah wax uga qabanno, xubinta 3aad ee labadaasba ka horreyn kartay oo dhaqaalaheennu ku tiirsanaan lahaa waxay ahayd kheyraadka baddeenna ku hoos jira een weli la taaban.

**Kacaankii 21kii Oktoobar 1969 iyo Kalluumeysiga.**

Ma jirin siyaasad dawladeed oo qorsheysan oo kalluumeysiga iyo horumarintiisa wax looga qabtaa Kacaanka ka hor, taliska kacaanku markuu dhashayba wuxuu il gaar ah ku eegay meelaha halbowlayaasha lagama maarmaanka u ah dhaqaalaha dalka. Wuxuuna qorsheeyey isagoo aragti hantiwadaag ah ku socda sidii wax ka qabadka meelahaas loo dejin lahaa, waxaa taliskeenna kacaanka ahi gartay aadna u dhaaday sida baddeennu u tahay halbowlihii dhaqaalaha dalkeenna iyo baahida loo qabo khayraadka ku hoos jira, waxaana la goostay sidii deg-deg looga manaafacaadsan lahaa barwaaqadaas ku hoos jirta badda. Siyaasadda dawladdu u dejisay horumarinta kalluumeysiga waa tan:

1. In ku nacfiga khayraadka baddeenna loo aqoonsado halbowlihii 3aad ee dhaqaaleheenna, laguna dadaalo sidii nacfiga kalluumeysiga loo gaarsiin lahaa heer uu ula tartami karo xoolaha iyo beeraha;
2. In la diyaariyo xoog iyo aqoon u qalma kordhinta wax soo saaridda kalluumeysiga ee loo baahan yahay;
3. In la nooleeyo lana cusbooneysiiyo warshadihii hore ee Kalluunka oo baqtiyey kuwa cusubna la dhiso, warshadahaas oo isugu jira kuwa qasacadeeya iyo kuwa wax qaboojiya intaba.
4. Shaqa la'aanta ayuu wax ka qabanayaa oo dad badan ayaa shaqo ka helaya.
5. In iskaashatooyin hantiwadaagga ah oo kalluumeysta la dhiso.
6. In kalluunkaas noocyada badan leh ee la soo saari doono suuq loo raadsho.

Taliska Kacaanku si uu u fuliyo siyaasaddiisaas ku dhisaalaysan horumarinta kalluumeysiga, waxaa la dhisay Wasaarad u gaar ah arrintaas, waxaa la cusboonaysiiyey lagana shaqeysiiyey warshadihii hore oo bakhtiyey, sida warshadda «Laas Qoray», tan «Xaabo», tan «Qandala», tan «Kismaayo», tusaale ahaan warshadda Kalluunka ee Laas-Qoray oo hortii soo saari jirtay 180tan waxaa la gaarsiiyey 600tan, waxaa la



diyaariyey Doonyo fara badan oo matoor leh oo badda kalluunka ka soo qabta iyo Maraakiib waaweyn ee warshadahooda wata, qaarna xamaali yahay, waxaa la dhisay Iskaashatooyin kalluunsato ah, waxaa dadweynihi la baray oo lagu dhiirri geliyey in kalluunka la cuno, waxaa la diyaariyey suuqii loo iibgeyn lahaa kalluunkeenna nooc uu yahayba. Waxaa la kordhiyey aqoontii dadka kalluunsatada ah.

Kacaanka iyo habka hantiwadaagga ah een qaadannay oo isbeddelka bulshada (trasformazione sociale) iyo halganka joogtada ah oo lagu xididda siibay dibudhicii dheeraa dhinac kasta ha taabtee oo laga dhaxlay hababkii la soo dhaafay. Haddii aan u noqonno faa'iidooyinka faraha badan ee kalluunka iyo kalluumeysigu inoo leeyahay waxaan ku soo koobi karraa:

1. Ganacsigeenna dibadda ayuu wax weyn ku kordhinayaa si aan lacag adag u hello.
2. Cuniddiisa xoolaheenna kale ayaa ku dhaqaaloobaya.
3. Cuniddiisa faa'dooyin badan bay aadamiga leedahay, caafimaad, adkaysi iyo nacfiga jirka intaba.
4. Shaqa la'aanta ayuu wax ka qabanayaa oo dad badan baa shaqo ka helaya.
5. Ka faa'iideysiga khayraadka baddu wuxuu qeyb weyn ka qaadanayaa dhismaha nolosha cusub ee bulshada Soomaaliyeed. Waxaynu tusaale u qaadan karnaa beelaha cusub ee Kalluumaysatada oo heer sare ka gelaya ilbixinta dadweynaha iyo kobcinta dhaqaalaha.

## KAALINTA GUDDIYADA KACAANKA EE GOBOLADA IYO DEGMOOYINKA

Intii kacaanka ka horreysay ee dawladihii hore ee dibusocodka ahaa maamuli jireen dalka, waxaa jiray wax lagu tilmaamo dawlad hoose, taasoo la sameeyey 14-8-63, maamulkeedu ku koobnaa Magaalada keliya, dadka ka qeybgeli jiray

waa la soo dooran jiray doorashadaasoo, ku dhisnayd nidaamkii xumaa ee jiray dalka sida qabyaaladda, caddaalad darrada, laaluushka, eexda, dilka iyo kooxo salka ku haya dhac, iska horjeed, isnacayb, cadaawad ninba ninka kale ka horjeedo, nin waliba fulinaayo u dagaallamayo dantiisa gaar ahaaneed keliya, taasoo ay ku luntay dantii ummaddu.

Haddaba markuu curtay kacaankeennu 21kii Oktoobar 1969kii, isla markiiba mudda yar kadib ayuu Kacaanku tirtiray maamulkii lagu tilmaami jiray dawladda hoose ee caynkaa ahaa, markaana waxa xilkii lagu wareejiyey Saraakiisha lagu magacaabi jirey «Saraakiisha Horumarinta Gobollada iyo Degmooyinka», iyagoo ku dadaalay sidii looga bixi lahaa dhibta laguna hirgelin lahaa himiladii kacaanka iyo ballankii uu ka qaaday ummadda, kaas oo ahaa in la dhiso bulsho ku dhisan caddaalad, sinnaan iyo barwaaqo, sidaasaanay lagama maarmaan u noqotay in wax laga bedello maamulkii dawladda hoose, si dadweynaha faraha badani uu xukunka iyo maamulka dalka uga qeyb qaataan loona helo talis dadweyne, talis dimoqraadi ah oo dadweynaha faraha badani gooyaan, fuliyaan, waxay doonayaan oo looga gudbo taladii qofka keliyihi goynayey, taasoo ahayd ujeeddadii kacaanku u dhashay.

GSK iyo kan Xoghayayaasha iyagoo fulinaaya ballankii ay ka qaadeen Ummadda waxay soo saareen 18kii Jannayo 1972kii sharci ku saabsan dawladda Hoose, ujeeddadiisu ahayd in la sameeyo Guddiyo Kacaan ee Gobollada iyo Degmooyinka sidii loo sameyn lahaa dadka ka qeybgelaya nooca ay yihiin. Dadka ka qeybgelaya waxaa laga soo xulay dadka kuwa ugu tawrisan, kacaansan, aadamisan, ugu hawlkarsan, ugu jecel mabda'a hantiwadaagga cilmiga ah, si ay uga fekeraan danta guud ee Ummadda, dalka horumarintiisa iyo dhismihiisa, si meelkastsa oo dalka ka mid ah loo gaarsiiyo, Waxaana la sameeyey Gobollo iyo Degmooyin cusub oo la kordhiyey oo lagu daray kuwii hore, Iyadoo loo eegayo kordhintooda dhulka ay ku fadhiyaan, dhaqaalahooda iyo dadweynaha deggan. Si mashaariic badan looga hirgeliyo waddanka sida ceelal, dugsiyo, waro, golayaasha caafimaadka, cusbitaallo, xafiisyo, guryaha horumarinta beesha, suuqyo, kawaanno. . . . iwm, si shaqo la'aanta u baab'do oo dadku uga helaan meelaha ay joogaan oo ay imminka wax badani shaqo ka heleen kana shaqeeyaan, si dadweynuhu uga qeybqaato maamulka dalka meesha ay joogaan.



Xilka Guddiga kacaanka waa mid ballaaran, waxaa loo xilsaaray oo ay mas'uul ka yihiin gobollada, degmooyinka, tuulooyinka, horumarintooda, dhaqaalahooda, siyaasaddooda, caafimaadkooda, tacliintooda nabadgelyadooda oo ay u maamulaan Sida soo socota:

1. Waxay samaystaan kharajka hawlaha dhisidda Gobolada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka.
2. Waxay abuuraan ururro wax soo saara sida Iskaashatooyinka nooc kasta ha ahaadeene, oo ay dhiirri geliyaan kaalmeeyaanna.
3. Waxay kor u qaadaan, ballaariyaan, gaarsiiyaan dadweynaha deggan Gobollada, degmooyinka, Tuulooyinka tacliinta, si qof kasta meesha uu joogo ugu helo tacliin, waxay diyaariyaan Macallimiin ku dhexnool, oo waxbarta oo tuulooyinka iyo reer guuraaga.
4. Waxay sameeyaan meelo lagu dhowro caafimaadka dadka si loo dabargooyo cudurrada ku dhaca dadka.
5. Waxay ka shaqeeyaan daaweynta xoolaha iyo tallaalkooda, si xooluhu u noqdaan kuwa caafimaad qaba, dabadeedna dadweynaha dhaqda iyo ummadduba uga faa'iideysato.
6. Waxay soo nooleeyaan, kor u qaadaan hiddaha, dhaqanka iyo ciyaaraha, iyagoo u sameeyey meelo dadku ku kulmo oo ay ku kala faa'iideystaan.
7. Waxay abuuraan kanaallo beeraha lagu waraabiyo, si beeruhu u helaan biyo, si wax soo saariddu u kordho, ummaddana ugu faa'iideeyo.
8. Waxay ka shaqeeyaan hanuuninta dadweynaha sidii garaadkooda siyaasigaa kor loogu soo qaadi lahaa, loo gaarsiin lahaa aqoon fiican cilmi u leh sidii

ay iskaga kaashan lahaayeen dhibaatada ka hortimaada.

9. Waxay ka shaqeeyaan nabadgelyada iyo xasilloonaanta dadweynaha, si qof kasta u helo nabadgelyo, kuna abuuraan dhexdooda walaaltinnimo, niyadsami, iskaashi, wax wada qabsi salka ku haysa mabda'eenna ah hantiwadaagga, dadweynaha waxay u yihiin garsoorayaal u dhameeya waxay isku qabtaan si caddaalad iyo sinnaan ah. Haddaba si ay xilkaa weyn u gutaan waxay u qeybsan yihiin Guddiyo sida soo socota:

b) Guddiga horumarinta iyo dhaqaalaha (mashaariicda, ganacsiga iwm).

t ) Guddiga bulshada, caafimaadka, tacliinta, hiddaha iyo dhaqanka. . . .iwm.

j) Guddiga nabadgelyada iyo xasilloonaanta.

x) Guddiga siyaasadda iyo horumarinta Ummadda.

kh) Guddiga lacagta.

d) Guddiga dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta.

Haddaba si run ah haddii aan u fiirinno Guddiyada kacaanka iyo hawlaha loo xilsaaray sidii la rabay uma wada fulin, taasoo ay keentay:

1. Dadka oo garashadooda siyaasiga ahi hooseeysey.
2. Xulashadii dadkii ka qeybqaadanayey oo sidii la rabay aan u wada fulin meelaha qaarkood.
3. Maamulka ama habka oo ahaa mid ku cusub Guddiyada.

## KACAANKA AQOONTA IYO HANTIWADAAGGA CILMIGA AH

Kacaanka aqoontu waa xubin ka mid ah xiriirka lagama maarmaanka u ah dhismaha hantiwadaagga Cilmiga ku qotoma. Guud ahaan kacaanka aqoonta macnihiisu waa sidii uu yiri abwaankii hantiwadaagga, Lenin: Mujtamac kasta oo isku dulnoolaasho ku dhisan, waxaa jira laba aqoonood:



1. Aqoon dad yar ku kooban, una adeegta ayaga, isla markaana lagu cunoqabateeyo dadweynaha.
2. aqoon dimoqraadi ah ee fasireysa dhibaatooyinka dadweynuhu qabo iyo sidii uu u fakaro. Aqoonta hantiwadaaggu guud ahaan way ka duwan tahay, waxayna ka fogtahay aqoonta hantigoosiga:

1. Waa marka horee aqoonta bulshada hantiwadaagga ahi waxay ku tilmaaman tahay in dadweynuhu u simanyahay.
2. Marka labaad ayada oo ka duwan aqoonta hantigoosadka wax ku maamulo iyo idolojiyada maalaqabeenka, ayey aqoonta hantiwadaaggu waxay xambaarsan tahay kasmo qota dheer oo cilmi ku dhisan, kana jawaabaysa idolojiyada hantiwadaagga oo ku fadhida garasho cilmi ah.

Ujeeddooyinka lagama maarmaanka ah ee aqoonta hantiwadaaggu waa kuwa ku shaqeynaya si looga gudbo isku dulnoolaashada hantigoosiga ee maskaxda dadka gashay, in laga gudbo dhabba kasta ay ku timaado kala sarreynta aadamiga aan loo sinnayn aqoonta iyo waxbarashada dadka, taasoo ka dhalatay xiriirka isnacaybka iyo kooxeynta mujtamaca hantigoosadku leeyahay. Sinnaan la'aanta ragga iyo dumarka, dibudhaca tuulooyinka ay magaaloolinka ka dambeeyaan, iska soo horjeedka shaqada maskaxda iyo tan gacanta iwm. Waxa-as oo dhan marka la soo koobo, kacaanka aqoonta dhuuxiisu waa:

1. In la tirtiro wax qoris-akhris la'aanta oo waxbarashada la ballaariyo oo loo fidiyo dadweynaha.
2. In la abuuro dad aqoon sare leh iyo farsamoyaqaanno aqoon gaar ah leh kana yimid xoogsatada iyo kooxaha horusocodka ah ee kacaanku u dhashay iyo in la abuuro shaqaale aqoon cusub leh oo u qalma hoggaaminta mujtamaca cusub.
3. In dadweynaha oo dhan la siiyo aqoon siyaasadeed iyo bisayl ay ku gartaan idolojiyada hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, shaqada iyo wax soo saaridda oo

la jeclaysiiyo loona carbiyo dedejinta hirgelinta habka cusub, taasna waxaa saldhig u ah in marka hore la tirtiro wax qoris-akhris la'aanta, korna loo qaado waxbarashada iyo aqoonta dadweynaha. Sidaas daraadeed ayaa abwaankii Lenin wuxuu horay u yiri: «Qof wax aan qori karin waxna akhrin karin siyaasad dibadduu ka joogaa». Si uu qofku siyaasi u noqdo, waa in horta la baraa wax qoridda iyo wax akhriska iyo cilmiga guudba, markaas ka dibna garaadkiisa siyaasiga ah kor loo qaado.

4. In wax aqoonyahannadii hore oo aqoontii hantigoosiga ku barbaaray la hanuuniyo, maskaxdoodana la dhaqo. Wixii hanuunsami waayana laga horwareejiyo bulshada geeddiga ah.

5. Ugu dambeyntii in aqoontii dhalanteedka ahayd ee gurracnayd ee baarista cilmiga ah ku fadhiyin lagana dhaxlay mujtamacii hantigoosiga ee kala boobka, isnacaybka iyo isku dulnoolaadka ku dhisnaa oo in yar u adeegeysay la tirtiro laguna beddelo aqoon waddani ah oo dadweynaha dantiissa u adeegta.

Aqoontii gumeysiga iyo hantigoosiga laga dhaxlay ha la dabargooyo macnaheedu ma aha in wax allaale wixii cilmi ahaa oo loo baahan yahay ama wixii alaab ah iyo horukac mujtamaca hantigoosiga dhexdiisii lagu gaaray in la burburiyo dhammaantood. Macnuhu sidaas ma aha ee waa in la cusbooneeyaa loona habeeyaa si mujtamaca cusub ee hantiwadaag ah ku habboon, lana socota mabaadi'da toosan ee dadweynaha dantiisa u adeegaysa.

Marka aqoontaas waddaniga ah la abuurayo laguna beddelayo tii hore oo la cusbooneeyey qaarna laga guurey, waa in la xoreeyaa lana soo nooleeyaa dhaqankii iyo hiddihii waddaniga ahaa intoodii fiicnayd, waana in loo fiirsadaa xubnaha soo socda: Murtida iyo suugaanta, sawirrada iyo riwaayadaha, filimada, wargeysyada, buugagga, ciyaaraha iwm. Intaas oo dhan waa in la xoreeyaa loona jeheeyaa oo loogu adeegtaa si kacaannimo ah lana socota habka cusub ee hantiwadaagga cilmiga ah.



**Soomaaliya iyo Kacaanka Aqoonta:**

Haddii guud ahaan kacaanka aqoonta macnihiisu sidaas yahay, aynu marka u noqonno sida uu uga hirgalay Soomaaliyada cusub tan iyo intii kacaankii Oktoobar dhashay.

Waxaan ku billaabaynaa tusaalihii Jaalle Siyaad oo fasiraya falsafada kacaanku ka qabo arrintaas iyada ah. «Waxaan kacaanka u dhalinnay ninkaan wax aqoon in aan wax barnaa, kii yaqaanna u kordhinnaa». Markii kacaanku dhashayba deg-deg waxaa loo billaabay kicinta dadweynaha lagu baraarujinayo waaga cusub oo u baryey, looguna fasirayo ujeeddooyinka kacaanka iyo sababihii dhaliyey. In dugsiyo cusub oo badan la dhiso kuwii horena la cusbooneyo, waxaa la qoray barayaal badan, kuwii horena tababaraa loo furay, waxaa la beddelay barnaamijkii waxbarasha oo hab cusub loo dhisay Waxaa xoog la saaray xubnaha kala duwan oo aqoonta lug ku leh: Wargeysyada, Raadiyaha, Riwaayadaha, Gabayada, Ciyaaraha iwm, oo loo diyaariyey si ay bulsho hantiwadaag ah u dhisaan.

**Qorista Far Soomaaliga iyo Kacaanka Aqoonta:**

Kacaanka aqoontu run ahaan uma hirgali karin ilaa Afka Hooyo xuruuf loo helo oo la qoro. Arrintaas oo axdiga 1aad ku qorrayd waxay hirgashay 21kii Oktoobar 1972. Waxaa go'aankaas lagu diirsaday la jiray go'aanno kale oo isaga adkaynaya:

1. Go'aankii lagula wareegay Dugsiyadii dawladaha shisheeyuhu horti maamuli jireen.

2. Kii lagu toleeyey ama lagula wareegay madbacadaha.

3. Go'aankii ahaa in shaqaalaha dawladdu muddo saddex bilood ah bartaan far Soomaaliga lagu dhawaaqay, shaqooyinkii xafiisyada dawladda, wargeysyada iyo waxbarashada fasalladeeda horeba Af Soomaali qoran bay ku socdeen.

**Ololihii Horumarinta reer Miyiga:**

«Haddaad wax taqaan bar, haddaadan wax aqoonna baro» waa tusaalihii Jaalle Siyaad. Markii shaqaalihii fartii so-

codsiiyey, waxaa la furay Olole sannad ah oo lagu ciribtirayo wax qoris-akhris la'aanta dadka magaalooyinka deggan. Bishii Febraayo 1974 waxaa la qiyaasay Ololaha mirihiisii, waxaana ka soo baxay in dad gaara Nus Malyan (500.000) ay imtixaankii ka gudbeen. 8dii Marso isla sannadkaas ayaa la furay OHRM oo run ahaan si aan loo malaynayn u hirgalay, guulo waaweyn oon lagu tala gelinna laga gaaray. Halkaas waxaa ku bislaaday Kacaankii aqoonta heerkiisii hore:

Tirtiriddii aqoon darrida, fidinta aragtida siyaasiga ah, ilbixintii reer baadiyaha, isdhexgeliddii dadka magaalada iyo miyiga mideyntii xoogga Ummadda.

Ololahaasi weli waa socdaa waxaana laga hirgeliyaa barnaamijka «Joogteynta OHRM.»

## UJEEDDADA CIIDAMADA NABADGELYADA

Waxaannu ognahay in horumarka uu gaarayo waddan waliba ay ku xiran tahay sida uu u ilaaliyo nabadgelyadiisa, taasoo inoo caddeynaysa inay khatar galayso Qarannimada iyo sharafta waddankaas haddaysan jirin nabadgelyo buuxda. Ilaalinta nabadgelyada waxay ka mid tahay tiirarka asaasigaa ee waddankaa, ha ahaato ilaalinta waddanka laga ilaaliyo cadawga dibadda iyo kan gudahaba. Nabadgelyada waddanka Soomaaliyeed kacaankii 21kii Oktoobar ka hor, waxaannu ognahay in ay ahayd mid ku dhisan boob, dhac, dil, iyo in ruuxba intuu ruux ka awood badan yahay inuu cagta madaxa uga hayo iyo sharciga iyo sharafta oo laga tagey.

Haddaan dib u jallecno nabadgelyada waddanka Soomaaliyeed intii ay maamulayeen dawladihii dibusocodka ahaa, waxaannu ku tilmaami karaynaa in ay ahayd mid aan dhelli tirnayn, qof kasta oo Soomaali ahna uusan isku kalsoonayn, waxaa tirtirmay xasilloonaantii iyo isku kalsoonaantii dadweynaha, isla mar ahaantaasna waxaa waddanka sidii ay doonaan ugu takri fali jiray imberyaaliyadda caalamiga ah, iyagoo ku dhaqmaya siyaasaddooda foosha xun oo ku dhisan «Qeybi dabadeedna u tali».

Sagaalkii sannadood oo ay waddanka u talinayeen dawladihii dibusocodka ahaa nabadgelyada waddanka Soomaaliyeed waxay gaartay heer ay gumeystayaashu ku soo galaan waddankeenna ruqsad la'aan in soo gelitaanka waddankeenna uu ahaa mid iska furan, xagga cirka iyo berrigaba. Si loo cuuryaamiyo ujeeddooyinka iyo himilooyinka ummadda Soomaaliyeed ayaa si caddaan ah waddanka Soomaaliyeed ugu soo qulquli jireen basaasiinta reer galbeedka, ayagoo baadi goobaya sidii ay xididdada ugu adkayn lahaayeen imberyaaliyadda caalamiga ah, ayaga oo u isticmaalaya tabo fara badan. Haddaan u leexanno dhibaatadii ijtimaaciga ahayd ee ka haystay xagga nabadgelyada dadweynaha Soomaaliyeed waxaa dhici jirtay in nin nin dilay magaalada uu iska dhex mushaaxo, laguna soo daayo teleefoon uu soo diray nin Dibutaati ah, halkaasoo ay ku niyad jabaan Ciidamadii soo qabtay. Dhibaatooyinkii Dadweynaha Soomaaliyeed nabadgelya la'aanta awogeed waxaa ka mid ahaa hubka qarxa nooc kastaba ha ahaadee oo siduu doono waddanka u soo geli jiray, gumeystaha cusub isagoo ugu tala galay inuu isku baabi'iyo bulshada Soomaaliyeed halkaasna ay uga fulaan ujeeddooyinkiisu. Waxaa la gaaray in sharciga iyo qofka uu qofku weynaado, halkaasoo sharcigii uu noqday mid aan lagu isticmaalin ee buugta uun iskaga qornaada.

Kaddib markuu dhashay Kacaankeennii 21kii Okqtoobar ee uu hoggaaminayey Aabbaha Ummadda Soomaaliyeed Jaalle Siyaad, isagoo daryeelaya danaha Ummadda Soomaaliyeed, kana badbaadinaya in uu waddanka Soomaaliyeed noqdo suuq ay imberyaaliyaddu ku fushato ujeeddooyinkeeda ayaa kacaankeenna hantiwadaagga ah uu u yeelay weji cusub Ciidamada Nabadgelyada Soomaaliyeed.

Kakaankeenna hantiwadaagga ah oo Ummadda Soomaaliyeed ku hoggaaminaya dariiqa xalaasha ah ee mabda'a hantiwadaagga, kaasoo ina faraya in ay maalin maalmaha ka mid ah dunida ka badbaadi doonto gumeystaha, gumeystaha cusub iyo imberyaaliyadda caalamiga ahba, kuna waarto barwaaqo, horumar, sinnaan, caddaalad, nabadgelyo iyo shaqo. Si taasu u fusho kacaankeenna tallaabooyinkii taariikhiga ahaa ee uu qaaday ayey ka mid ahayd soo nooleynta ciddamada Nabadgelyada, kuwaasoo ah xubin aad u muhim ah, mujtamac kasta oo la joogana lagama maarmaan u ah waxa uu mar kastaba ku xiran yahay jirista mujtamaca gudihiisa ay jiraan loolan

dabaqadeed, kuwaasoo xiriirka ka dhexeeya uu yahay iskadeed.

Jaalle V.I. Lenin oo ahaa ninkii hirgeliyey hantiwadaagga cilmiga ku dhisan asagoo ka hadlaya ujeeddada ciidamada Nabadgelyada wuxuu yiri: «Kacaanka waxba ma taransan karo haddii uusan naftiisa badbaadin karin». Sidaa daraadeed Kacaankii 21kii Oktoobar ee waddankeenna asagoo u danaynaya danaha dadweynaha Soomaaliyeed si gooni ahna danaha dabaqiga ah ee Shaqaalaha, beeraleyda, xoolo-dhaqatada, ayuu abuuray ciidamada Nabadsugidda Soomaaliyeed iyo Guulwadayaasha.

Xilka ugu weyn ee Ciidamada Nabadgelyadu waa in ay is hortaagaan cadowga dibadda oo ah Imberiyaaliyadda caalamiga ah iyo dibusocodka gudaha ee ku xiran imberyaaliyadda caalamiga ah, iyo kuwaas oo isku duuban kana soo horjeedaana qarannimada iyo Ummadnimada Soomaaliyeed, iyagoo rabaan in Soomaaliya weligeed ahaato suuq lagu gado alaabta waddamadooda lagu sameeyo, in dhaqaalaha dalka ay weligood haystaan, sharafta dalkeenna uu dabadhilif u ahaado, sidaa daraadeed waxaa lagama maarmaan ah in har iyo habeen ilaalo xoog leh laga hayo waddanka dibaddiisa iyo gudihiisaba.

Nabadgelyadu waxay lagama maarmaan u tahay daryeelidda danaha Ummadda, iyo horumarinta dhaqaalaha dalka si loo gaaro barwaaqo, midnimo, sinnaan iyo caddaalad ijtimaaci ah. Si nabadgelyo waarta dhidibbada loogu aaso meel kasta oo dalka Soomaaliya ka mid ah waxaa ku yaal Saldhigyo Boliis, ciidamaadii nabadsugidda iyo xoogga dalka. Kuwaasoo ayagoo garabsanaya Ciidanka Guulwadayaasha had iyo jeer hegan u ah badbaadinta guulaha kacaanka ee ay Ummaddu gaareen intii uu maamulayey Kacaankeenna. Ciidamada ka Sokow qof kasta oo waddani ah xil gaarah ayaa ka saaran badbaadada iyo Nabadgelyada dalka iyo Kacaanka.



Qaybta 4aad

# XAALADDA CASRIGAN

## ASTAAMAHA IMBERYAALIYADDA

Wax taariikhdu guurtoo hadba qormo cusub yagleelataba, waxaa dhashay habka hantigoosiga. Hababka oo idil waxaa xuddun u ah oo lagu suntayey xoogagga tacabka xiriirka wax tacabka iyo dar kale oo badan. Hab waliba habkii ka horreeyey wuu ka horusocodsanaa dhan kasta oo laga fiirshaba. Xoogagga xoojiya way sii kobcayeen warshadeyntuna way sii ballaadhanaysay. Waxa taa bar-bar socday isaseegga dabaqadaha kala gaddisan ee bulshada oo qorraxdii dhacdaba sii kala qaxaayey, iyo dagaalkoo sii ballaadhanayay.

Habkaa hantigoosiga ayaa dhaxlay habkii dhulgoosiga. Dhalashadii hantigoosigu waxay keentay isbeddel ku dhacay xoogaggii tacabka. Wuxuu soo hadaafaba habka hantigoosigu wuxuu heerkiisi ugu sarreyey gaaray Qarnigan billowgiisii. Warshadeynta oo ku bilaabantay warshadaha fudfudud ayaa u ciirtay warshadaha birta shuba ama warshada cul-culus. Halkaa waxaa ka dhashay in loo baahday hanti (capital) badan oo meel la isu geeyo. Waayo hantidii yarayd ee maalqabeenku haystay way dhaafiwayday warshado yar-yar oo dad koobani ka shaqeeyo. Waxaa qasab noqtay in hanti badan la kaydiyo ama meel la isgu geeyo, si ay suura gal u noqoto in la dhisi karo warshad weyn oo makiinadihii ugu dambeeyey ku shaqeynaysa, kuwaasoo markaa qaali ahaa. Maalqabeenkii ayaa is urursaday si ay qalabkaa u wada guulaan. Waxay kolba heer gaadhaba waxay ku biyoshubatay tisqaadkii hantikoobadka (Monopoly). Waxaa lama huraan ah inaynu xusno sida dalalkii la gumeysan jiray badeecaddii cayriinka ahayd ee laga soo qaadi jiray ay kobcisay ama u dedejisay tartanka hantida maalqabeenka. Hantikoobadkii (Monopoly) ayaa faraha ku dhigay halbowlayaashi dhaqaalaha ee dalal badan oo adduunka ah. Halkaa waxaa ka soo ifbaxay dawladdii burjuwaasiga ahayd oo noqotay qalab laxaad leh oo monoboligu ku muraad qunsado.

Kacaankii, 1917kii ka curtay dalka Ruushka waxaa uu ahaa dhirbaaxo aan laga soo waaqsan oo hantigoosiga ku dhacday. Kacaankaasi wuxuu yididiilo geliyey dhaqdhaqaaqyadii gobannimadoonka ahaa ee dalalka la gumeysto. Hase yeeshee hantikoobadku mar walba way beddelayeen taktiigooda iyagoo sida jirjirroolaha midabeynaya oo hadba heerkii halganku marayo isu ekaysiinaya. Ceeb ayaa ka raacday oo marna may baajin socodkii dadyowga xuquuqdooda u dagaallamaya, waxa taa u daliil ah inay ummado badani sidaa ku gaareen himilooyinkoodii, qaarna ay weli kula jiraan halgankii imberyaaliyadda, runtuna waxay tahay inay ku guulaysan doonaan.

Waan qalin taraaraye, bal aan u soo daadego imberyaaliyadda iyo astaameheeda. Imberyaaliyaddu waa heer ka tilmaaman habka wax soo saarka hantigoosiga. Astaamaha imberyaalismada waxaa ugu weyn amar ku taagleynta monoboliga kasoo ka dhashay hantidii oo meel la isugu geeyey (concentration of capital). Runtu waxay tahay inaan hantigoosadku dal keli ah ku ekayn. Hase yeeshee uu guud ahaan saameeyo habka hantigoosiga ee caalamiga ah. Dhalashadii imberyaalismadu waxay keentay inay xoogsato tiro badan oo adduunweynaha ku kala firidhsan midiidin uga dhigto maalqabeenka tirada yar ee keligood qoondaystay dheefta xoogsatada. Inta hantigoosadku sii kobcayeyba waxaa sii lismayey lidka iyo dagaalka ka dhexeeya xoogsatada iyo maalqabeenka. Lidkaasi wuxuu ku afgamuurmaa tisqaadka imberyaalismada oo u gogl xaadha kacaanka hantiwadaagga. Jaalle Lenin ayaa aad u qeexay astaamaha imberyaaliyadda.

1. Imberyaalismada wax soo saarka iyo hantiduba gacmo yar ayey ku koobmaan, halkaana waxaa ka dhasha monoboliga kaasoo qeyb libaax ka qaata taliska dhaqaalaha iyo maamulka hantigoosiga.

2. Hantida Bankiyada marka lagu daro raasamaalka warshadaha ayaa waxaa dhasha raasamaal cusub, loona yaqaan «Financial capital» wax weynna ka tara warshadeynta iyo kordhinta hantidaba.

3. Dhoofinta hantida oo aad uga duwan dhoofinta badeecada Warshadeysan xag dhaqaale iyo xag siyaasadeedba.

4. Hanaqaadka monoboliga ayaa waxaa ka dhasha monoboliga caalamiga ah, kaas oo adduunweynaha dhaqaale ahaan u qaybsada.

5. Sidaa ayey dawladaha hantigoosiga ah ee ugu laxaadka weyni addunyada iyagu u kala qeybsadaan.



## DHICIDDA HABKA GUMEYSIGA IYO SOO BIXIDDA WADDAMADA CUSUB

Sababaha taariikhiga ah oo dhaliyey dhaqdhaqaaqa gobannimodoonka adduunka (National Liberation Movements) waxaa lagu soo koobi karaa:

1. Kacaankii hantiwadaagga ahaa oo ka dhashay dalka Ruushka.
2. Jabidda la jabiyey Fashismka oo ahaa heer foolxun oo ay gaartay imberiyaalidda adduunweynuhu.
3. Dhalashada ay dhasheen dawlado kale oo hantiwadaag ahi.
4. Guulaha waaweyn oo u gaarey habka hantiwadaaggu guud ahaan xagga dhaqaalaha, dhaqanka iyo ciidanka.

Waxyaalahaas oo dhan oo isbiirsaday waxay abuureen duruuf cusub oo taariikhi ah, taas oo daciifisay xooggii imberyaaliyada adduunweynaha. Dadyowgii la gumeysan jiray ee waddamada Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika waxay kaalmo gacaltooyo ka heleen waddamada hantiwadaagga ah iyo ururrada shaqaalaha oo waddamada hantigoosiga ku hoos nool. Sidaa daraadeed waxa suuragal u noqotay dadyowgii la gumeysan jiray in ay halgankoodii guulo waaweyn ka gaaraan, waxaa suuragashay in gumeysiga lagu qasbo inuu ka guuro waddamada Afrika Aasiya iyo Laatiin Amerika. In ka badan 70 waddan ayaa qaatay gobannimadoodii intii ka dambeysay dagaalkii labaad oo imberyaaliga ahaa. Taasi waxay calaamad labaad u tahay isbeddelka ka dhacay adduunweynaha teer iyo 1917kii, sidaa daraadeed casrigan aynu ku jirno waxaa loo ya-

qaan kala guurka labada hab: hantigoosiga iyo hantiwadaag-ga.

**Macnaha gobannimada iyo noocyada halganka Gobannimodoonka.**

Waddamo badan ayaa waxay gaareen gobannimadoodii, hase ahaatee gobannimadaasu waa ay kala qiimo badnayd. Waddammada qaarkood waxay gaareen gobannimo buuxda, maxaa yeelay markii ay gumeysiga eryeen waxay isla markii dhiseen dhaqaale, dhaqan iyo siyaasad debadeed oo waddani ah oo ka soo horjeedda gumeysiga, gumeysiga cusub iyo imberyaaliyadda caalamiga ah.

Waddammada gobannimada runta ah gaaray oo hantiwadaagga dhisay waxaa ka mid ah, Shiinaha dadka, Kuuriyada Dimoqraadiga ah, Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Fiyetnaam iwm. Waddammada aan gobannimada runta ah gaarin waxaa ka mid ah dalalka Afrika intooda badan. Haddaba su'aasha aynu isweydiinaynaa waxay tahay maxaa waddammada Shiinaha, Kuuriya, iyo Fiyetnaam ay ugu suurto gashay inay dhisaan hantiwadaag, maxaase waddamada Afrika intooda badani ay ugu dheceen gumeysiga cusub hoostiisa? Iyada oo ay arrintu ku xiran tahay heerka dhaqaalaha ama xoogga tacabku waddan kastaba meesha uu ka joogo iyo isla markaas tirada shaqaalaha iyo heerka garashadooda siyaasigu joogto, ayaa waddan waliba dadweynihiisu soo galeen halgan gobannimodoon ah, hase ahaatee meeshii uu jirey shaqaale badan oo garasho siyaasadeed leh waxaa suura gashay shaqaalaha inay dadweynaha hoggaamiyaan, maxaa yeelay shaqaaluhu waxay leeyihiin aragti cilmi ah (hantiwadaagga cilmiga ku dhisan) oo ay ku garan karaan ujeeddada aasaasiga ah ee uu leeyahay halganka gobannimodoonku.

Haddii aynu misaal u soo qaadanno Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Fiyetnaam, waxaynu ogaaneynaa in shaqaalaha reer Fiyetnaam ay iyagu soo hoggaaminayeen halganka gobannimodoonka. Xisbigii hantiwadaagga ahaa ee la oran jiray «Xisbigii hantiwadaagga Indoojayna» ee uu aasaasay ninkii geesiga ahaa ee la oran jiray «HUSHI MIINEH», madaxda xisbigu waxay ahaayeen dad horusocod ah oo garanaya ujeeddada halganka gobannimodoonka cadowgiisa iyo saaxibkiisa,

sidaa daraadeed Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Fiyetnaam waxay noqotay dawlad dadweynuhu iska leeyihiin oo dhisaysa hab dhaqaale oo hantiwadaag ah.

Dalal badan oo soo koraya ayaa halgn dheer u soo galay gobannimadooda hase ahaatee ilaa iyo hadda uma suurto gelin dadweynaha dalalkaasi in ay ka xoroobaan gumeysiga hantigoosiga adduunka. Markii la rabay in gobannimada la adkeeyo ayaa waxaa lagu dhacay gumeysiga cusub hoostiisa. Gumeysiga cusubi waa hab ka mid ah hababka wax lagu gumeysto, maxaa yeelay haddii guud ahaan loo fiirsado ujeeddooyinka gumeysiga waxaa lagu soo koobi karaa kuwa soo socda:

1. In waddamada la gumeysto laga helo macdan, saliid iyo waxyaalaha kale ee warshaduhu ku socdaan ee alaabta cayriin ah.
2. In shaqaale jaban laga helo waddamada la gumeysto.
3. In waddamada la gumeysto laga dhigto suuq lagu gado alaabta lagu soo sameeyo waddamada gumeysta iyaga oo qiimaha wax kalagadashada ay mar walba gooynayaan dawladaha xoogga leh ee wax gumeysta.
4. In waddamada la gumeysto laga dhigo saldhigyo Ciidammo ah oo lagu ilaashado danaha isticmaarka adduunweynaha.

Haddii aynu u fiirsanno sida dawladaha hantigoosatadu ay wax u gumeystaan waxaynu arkaynaa in 4 qeybood oo ay ka kooban tahay danaha gumeysiga laga heli karo oo ay iskaga mid yihiin labada jaad ee habka gumeysigu ka hore iyo kan cusubiba. Taas macnaheedu waxay tahay in waddanka gumeysiga cusubi haysto xooggiisa wax tacba (dhaqaalaha) sharikadaha caalamiga ee monoboliga ah leeyihiin.

Sharikadahaasi waxay xukumaan ama u taliyaan dawladaha dibusocodka ah oo waddanka ka dhisan, iyaga oo ka soo galaya dadka oo ay kala laaluushaan, qaar ay sharikadahu dillaal ka dhigtaan, dadka barlamaanka ku jira, kuwa dawladda iyo madaxda qabaa'ilka oo intuba dabadhilif u yihiin. Si-

daas oo kale dadka waddannku waxay u kala qeybsan yihiin sida soo socota:

**b) Kuwa gumeysiga la jira:**

1. Burjuwaasiyada weyn oo ah kuwa maalka tirada badan leh oo doonaya in ay maalkooda sii badsadaan, waxa dhici karta in ay sharikadaha caalmiga ah oo waddanka jooga wax ku yeeshaan, sidaa daraadeed waxay had iyo jeer garab taagan yihiin oo danahooda daafacayaan burjuwaasiyada adduunweynaha.

2. Dadka dhaqaalaha dilaalnimada ku nool ee u adeega sharikadaha caalamiga ee hantigoosiga dadkaas oo loo yaqaan dillaaliin (Kombaraadoor) kuwaasi had iyo jeer waxay ku xiran yihiin dhaqaalaha gumeysiga cusub sidaa daraadeed waxay daafacaan habka gumeysiga cusub. Kuwaas waxay isku fikrad noqdaan aqoonyahanada dibusocodka ah iyo dhulgoosiga beeraha iyo madaxda qabaa'ilka.

**t ) Kuwa gumeysiga ka soo horjeeda:**

1. Shaqaalaha.
2. Beeraleyda iyo reer baadiyaha dhammaantiisba.
3. Burjuwaasiyada yar-yar iyo wax aqoonka tawriga ah.

Markaas oo kale cadowga dadweynaha xoojiya waa dabaqaadka gumeysiga cusub la jira iyo dawladdooda dibusocodka ah, cadawga asaasiga oo weyni isagu mar walba waa habka gumeysiga ee hantigoosiga adduunweynaha (dabaqadda burjuwaasiyada adduunweynaha).

**Habka xukunka (Dawladda)** ee gumeysiga iyo gumeysiga cusub wuxuu u dhisan yahay : Haddii aad u fiirsatid waxaad arkaysaa in hadba gumeysiga nooc kasta oo uu yahay uu isla mid yahay, waxaana uu ku kala duwanaan karaa xagga midabka guud hase ahaatee waxba kuma kala duwana xagga asalka waxaa lagu soo koobi karaa:



1. Arrinta waqtiga waxaana looga jeeda in teer iyo intii kacaanka hantiwadaagga adduunka ka hirgalay (1917) uu adduunka isbeddel weyni ka dhacay (hantiwadaagga oo xoogeystay xagga dhaqaalaha, dhaqanka iyo militarigaba). Arrintaas oo keentay in hantigoosiga adduunka wax iska beddelaan, halkii markii hore ay dunida uga talin jireen ayaa xoogaggii tawriga ahaa ee adduunku xoog weyn yeeshe-en, dhaqdhaqaaqa gobannimadoonku, iyaga oo ka mid ah xoogagga tawriga ah, ayaa ay dagaal ku kiciyeen gumeysiga, kaalmana ka heleen waddamada hantiwadaagga iyo xoogagga kale ee horusocodka ah, arrintaas oo keentay in ay gumeysiga ku qasbaan in uu askartiisa la guuro.

2. Arrinta halkii markii hore (gumeysiga hore) dawladda burjuwaasiyadu ay xukunka siyaasadeed iyadu gacmaheeda ku maamuli jirtay ayaa markan dambe (gumeysiga cusub) markii lagu qasbay in uu askartiisa qaato, waxay ku qasabtay inuu isticmaalo hab kale oo ah awoodda sharikadda monoboliga ah, iyaga oo isticmaalay dabaqad ama dad gaar ah oo dallaaliin u ah iyo dawladdooda dabadhilifka ah.

## GUMEYSIGA CUSUB

(Neo-Colonialism).

Markii dagaalkii labaad ee dunidu dhamaaday waxaa habkii hantigoosadka u bilowday dhibaato horle oo ka mid ah dhibaatooyinkiisii guud. Dalal Yurub iyo Aasiya ah baa kacaan hantiwadaag ah ka dhashay. Taasina waxay keentay in halgankii gobannimadoonka ee dalalkii la gumeysan jiray aad u xoogoobo ilaa ay in ka badan toddobaatan dal xornimadoodii gaareen. Bartamihii sannadahii lixdanaadka waxaa gariiray tiirarkii gumeysigii qaawanaa ee imberyaalistaha, markaas imberyaalistayaasha waxa lama huraan ku noqotay inay soo saaraan waxa la dhaho gumeysiga cusub.

**Micnihiisa:** Gumeysiga cusub macnihiisu waxa weeye hab cusub oo addoonsi ah kana koobma xooga dhaqaalaha, dhaqanka siyaasadda, ciidamada iyo fikradaha. Si arrintaasi aad

loogu fahmo, waxa lagama maarmaan ah in fiiro dheer loo yeesho xiriirka dhaqaale iyo siyaasadeed ee ka dhexeeya dalalkii la gumeysan jiray iyo kuwii gumeysan jiray kana talin jiray Afrika Aasiya iyo Laatiin Ameerika.

**Khiyaamadiisa:** Talisyada imberyaaliyada iyo ragga fikradaha u qora waxay faafiyeen beenta wax lagu khiyaano, taasoo ah inuu idlaaday oo haatan laga soo gudbay habkii gumeysiga. Taasi waa been qaawan, waxaynuna ogsoonahay inuu gumeysigu laba jaad u kala baxo ka hore ee siyaasadeed, iyo kan dambe ee dhaqaale.

**Hornimo qabyo ah:** Xornimada waddamadii la gumeysan jiray ay ka xoroobeen xaggii siyaasadda macna weyn ma laha, waayo waxay weli gun ka yihiin xaggii dhaqaalaha maxaa yeelay shaqaalhooda waa la dhacaa, hodannimadooda iyagoo baahan ayey ka qatan, yihiin oo loo maamulaa si shisheeye uga faa'iideysto waxaana kale oo laga dhigtaa dalalkaasi suuq joogta ah oo waxyaabo dibadda looga soo dhoofiyo qaali lagaga iibsho. Dalalkaasi waxaa lagula taliyaa in beerahooda laga beero cuntada iyo alaabta ceeriin ee looga baahan yahay dalalkii iyaga hore u gumeysan jiray, cuntadii iyaga naftoodu ay u baahnaayeenna waa la soo dhoofiyaa. Dalal fara badan oo xor sheegta kana mid ah adduunyada saddexaad, ayaa jagooyinka waawcyn ee dhaqaalahooda weli gacanta ay ku haystaan imberyaalistayaashu. Dalalkaasi iyagu raacay jidka hantigoosadku waxay yihiin qaar u rahman gumeysiga cusub. Dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika, gumeysiga cusub wuxuu sannadkii walba ka dhacaa kumanaan milyan oo doollar waxaana halkaa ka dhashay malaayiin qof kana kala tirsan dalalkaasi in ay maanta gaajo u liitaan loogana tuugo cunto Qarammada Midoobay.

Ma dhihi karnaa haddaba dhulkaasi xornimo ayuu arkay? Maya, waayo gumeystayaasha waligoodba ujeeddadoodu waxay ahayd dhac dhaqaale walina waa sidii hore. Waxaabana kale oo gumeysiga cusubi isku dayaa inuu dalalka adduunyada saddexaad ku dirqiyo in ay gudoomaan oo aanay gargaarin una hiillin dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka ah iyo inaanay aqoonsan xiriirna la yeelan dalalka hantiwadaagga ah.

**Gaashaan-Buur:** Gumeysiga cusubi wuxuu dalalka u dabran ku soo daraa gaashaanbuuro loo sameystay in lagu ilaashado si aanay meel kale u marin, dhacna aanay uga bixin. Waxaanu tusaale ka dhigan karnaa waxa la dhaho «ururkii dawladaha Ameerika, «Common Wealth», «Seato,» iyo «Nato». Dawladda Maraykanka oo iyadu gaashaanbuuraha buunka u yeerisa waxay marka la eego heshiis militari la leedahay dalalka: Filibiin, Taywan, Kuuriyada Koonfureed, Turkiya iyo dalal badan oo dunida ah.

**Diradireyn:** Gumeysiga cusubi waxa kale oo uu isku diraa dalalka adduunyada saddexaad isagoo dagaallo ka abaabulaya xuduudda iyo meelayowga kale. Xuduudda oo markii hore gumeysigu si xun uga taliyey, asagoo wadammada qarkood kala jarjaray qaar kalana isku jacburay, (sida Soomaaliya iyo dalalka ay dariska la tahay, India iyo Bakistaan). Ujeeddaduna waa in dalalkaasi aanay waligood midoobin hubna goor walba ka gaddo, Gumeysiga cusubi marka uu u cabsado danihiisa, wuxuu dalalkaasi ka sameeyaa dhul la baaba'sho, dad iska horjeesta, madax la dilo iwm. Waxaanuu goor kasta taageeraa cadaawaha adduunyada saddexaad oo ay ka mid yihiin kuwa xaqdarrada maanta uga taliya meelo Afrika ka tirsan. (Sida Koonfurta Afrika iyo Rudiisia).

**Habka Dhacniinka:** Gumeysiga cusubi siduu u jaqaa nicmada adduunyada saddexaad? Si aan taa u ogaanno waxaan eegi karnaa dalalkaa wax gumeysan jiray heerka aad u sarreeya ee dhaqaalahoodu uu gaaray heerka dalalkii la gumeyesan jiray uu marayo.

Dalalka adduunyada saddexaadna bal aan eegno 1968 heerkii ay marayeen: Burundi. Soomaaliya, Upper Volta, Ruwanda, Hait, Chad ,Nepal, Afganistan, Negeria, iyo Yemen lacagta ruuxa sannadkii soo gashaa waxay ahayd in u dhexaysa 50 iyo 70 Doollar. Xitaa dalalka Batroolka hodanka ku ah oo ay ka mid yihiin: Kuwayd, Vinizuwela iyo Liibiya heerkii laga rabay may gaarin. Gumeysiga waxa kale oo uu dalalkaasi ku dhacaa waxa isagu uu ku magacaabo mucaawino ama kaalmo iyo waxa uu yiraahdo amaah. Sannadkii 1955kii dalalka madaxa la soo kacaya waxay imberyaalistayaashu ku lahaayeen 9,000 oo milyan oo doollar. 1969kii taasi waxay gaartay 53,000 iyo 400 milyan oo doolar. 1969kii ilaa 1970kii waxay gaartay 60,000 gaartay 60,000 oo doollar.

Dawladda Maraykanka guddida ugu qeybsan waxa la yiraa kaalmada horumarka nin markaa u ahaan jiray guddoomiye oo la yiraahdo Willard L. Thorp ayaa runta ka sheegay hadal uu moodayey inuu qarsoodi noqon doono, halkaasoo kaalmada uu ku tilmaamay deeq baayac mushtari oo lagaga xoogsado adduunyada saddexaad. Hubka uu isticmaalo gumeysiga cusubi waxaa ka mid ah madaxda dalalka soo koraya oo uu ku siro inay lacag badan dhigtaan Bankiyaashiisa qarsoodiga ah. Arrintaa waxa kashifay Jaalle Siyaad iyo Jaalle Nyreere. Isla markiina wuxuu isku dayaa inuu madaxda laaluusho.

## ISBAHAYSIGA CARABTA IYO AFRIKA

In badan gumeysiga caalamiga ihi wuxuu ku guuleystay firdhinta iyo kala geynta dadyowga dunida saddexaad, ama dadweyne isku waddan ahba, isagoo ulajeeddadiisu tahay inuu gacanta ku dhigo kana faa'iideysto xoog iyo xandho waxay dadyowgaasi leeyihiin. Taasi waxay ka mid ahayd waxyaabihii dadyowga soo korayaa ay ka dagaallamayeen, sidii ay uga bixi lahaayeen in badan bay u tallaaba qaadeen, ugu dambeystiina waxay ku guuleysteen markii ay taabeen gobannimadooda.

Dadyowga Carbeed iyo kuwa Afrika waxay ka mid ahaayeen dadyowga ku dhibmutay siyaasadda foosha xun ee gumeystaha oo ku dadaalay in la iska horjeediyo dadka Carbeed iyo dadka Afrikaanka ah; isku diin ma tihiin, isku midab ma tihiin, isku af matihiin iwm. ayuu gumeysigu sal uga dhigay siyaasaddiisa loo yaqaan «Kala gee oo xukun». Wuxuu kaloo isticmaalaa gumeysigu siyaabo iyo siyaasado qota dheer oon hore loo dhaadi karin dad badanina ku khatalmaan, tusaale ahaan waxaynu u soo qaadan karnaa beentii weyneyd ee imberyaaliyada caalamiga ah oo ahayd «Saldhig Soofyeeti baa yaal Magaalada Berbera». Beentaasi in kasta oo ay ulajeeddooyin badan lahayd misana tan u weyni waxay ahayd in laga dheereeyo Soomaaliya Dawladaha Carbeed iyo Afrikaba iyadoo lagu baqa gelinayo dawladahaas in Soomaaliya tahay dal khatar ku ah jiristooda iyo nabadgelyadooda.

Waayo-aragnimada dadyowga Afrika iyo Carabta ee maalinba maalinta ka dambaysa soo kordhaysa wuxuu gaaray



heer uu ku dhuuxo siyaasadda imberyaaliyada caalamiga ah, waxayna talo kaga ururtay inay xoojiyaan wadajirkooda iyo wax wada qabsigooda, iyagoo tixraacaya danaha lama huraanka ah ee ka dhexeeya. Danahaas oo ka soo maaxday halganka midka ah, taariikhda midka ah iyo mustaqbalka la wadaago, waxaan tusaale ahaan uga soo qaadan karnaa kuwa soo socda:

1. Marka hore waa dalal isku waayo ah oo dagaal kula jira gumeysiga, imberyaaliyada iyo dibudhaca dhinac kasta ah, arrimahaas oo idilna wadajir la'aantii waxba ka qabsoomi mayaan.
2. Dadyowga Carbeed iyo kuwa Afrika tacab ahaan way isbuuxiyaan, haddii la eego duruufta dabiicigaa iyo tacabka jaad jaadka ah ee dalalkaasi qabaan.

   Taas macnaheedu wuxuu yahay in dalalka Carabta iyo Afrika ay si toos ah isu siin karaan cuntada, alaabta cayriin, shidaalka iwm, iyagoo ka kaaftoomaya dullaalka hantigoosadka kana hoos baxaya dhiigmiiradka ka imaanaya xiriirka dhaqaale ee ka dhexeeya iyaga iyo gumeystayaashii hore.
3. Iskaashiga Afro-Carbeed, wuxuu xallinayaa mashaakilka sayladda ee haatan hortaagan tacabka dalalka soo koraya oo idil iyo dhibaatada ra'sumaalka ee horumarinta dalalkaasi u baahan tahay.
4. Darisnimada juqraafiga ahi waa qodob kale oo dhabbaha u furaya wadajirka carbeed iyo Afrikaanka, misana fududeynaya gaadiidka iyo isgaarsiinta dalalkaas ka dhexeeya (haddii loo hawl galo sidii looga dhex abuuri lahaa dalalkaa Afrika iyo kuwa Carabta qalabka isgaarsiinta iyo gaadiidka).

### Kaalinta Ururka Jaamicadda Carabta iyo Ururka Midowga Afrika:

Inkastoo dhibaatada weyn ee dunida saddexaad gebi ahaan haysataa tahay gaadiid xumo iyo qorsha la'aan oo ay dhacdo dalalka soo koraya qaarkood inay Yurub u dhoofiyaan tacabkooda, qaar kalena ka keenaan Yurub badeecadda lafteedii

oo dillaal iyo kharaj cusubi dulfuulay, misana waxaa hubaal ah in wax isdhaafsiga, ganacsiga iyo iskaashiga dadyowga Carbeed iyo Afrika uu maalinba maalinta ka dambaysa sii kordhayo. Kaalin weynna waxaa ka qaatay arrimahaas Ururka Jaamacadda Carabta iyo Ururka Midowga Afrika oo si dhab ah ugu halgamay isafgaradka iyo isbahaysiga Afro-Carbeed. Guud ahaan haddii aynu raad raacno sidii uu xiriirka Afro-Carbeed u soo kacaamay, wuxuu xiriirkaasi soo maray heerar saddex ah:

1. Shaki iyo kalsooni darro, heerkaa isaga ah Afrika waxay ka ordaysay inay faraha la gasho dagaalka dhexyaalla Carabta iyo Israa'iil; Israa'iilna waxay lahaayeen xiriir siyaasadeed iyo ganacsi; dibalomaasiyadda Carbeedna uma ayan habaysneen inay Afrika arrinta ka dhaadhiciso ama dhinaca Carbeed u soo riixdo. Heerkaasi wuxuu dhammaaday markii Israa'iil deyn weyday dhac, dagaal iyo isla weynaan, misana ay xoog ku qabsatay dhul badan oo Carbeed oo dawlad Afrikaan ihi qeyb ku leedahay.
2. Isafgarad laga billaabo shirkii U.M.A. ee Kinshaasa 1967kii ilaa abuuristi Guddiga dhexdhexaadinta Carabta iyo Israa'iil 1970kii, oo ka samaysnayd Madax Afrikan ah. Waxaa dawladdaha Afrika u soo caddaanaysay gar darrada Israa'iil, isu soo dhawaad hor lihina wuxu ka dhex abuurmay dalalka Afrika iyo kuwa Carabta.
3. Wadajir iyo isbahaysi heerkaas oo si cad uga muuqda go'aankii Afrika ku gaadhay shirkii Rabbaad 1972kii oo ahaa in xaqa Carbeed la isgarab taago, dadka Falasstiinna la taageero, tallaabooyin dhaqaale iyo siyaasadeedna la qaado, wuxuu tusinayaa isbeddelka weyn ee ku dhacay mowqifka Afrika ee ku saabsan dagaalka Carabta iyo Israa'iil. Mowqifkaasina wuxuu heer sare gaaray markii 20 dawladood oo Afrikaan ihi ka goosteen Israa'iil xiriirkoodii siyaasiga ahaa bilowgii dagaalkii Oktoobar 1973kii.

Shirkii Rabbaad ee Madaxda Carabta 1974kii iyo shirkii Golaha Wasiirrada ee Ururka Midowga Afrika — Addis Ababa — 1975kii, iyagoo ku tallaaba qaadaya xoojinta iskaashiga dayowga Carabta iyo Afrikaanka, waxaa go'aan lagu gaaray in la qabanqaabiyo shir ay isugu yimaadaan Madaxda Carabta iyo Afrikaanka, arrintaas waxaa loo saaray Guddi ballaaran oo u habaysan siyaabaha ay isu kaashan karaan dadyowga Afro-Carbeed, waxaa kaloo la gartay in Xafiiska Xoghayaha Guud ee UMA laga abuuro qeyb ku shaqa leh habaynta iyo hanuuninta isbahaysiga Afro-Carbeed.



**Kaalinta J.D.S. ay kaga jirto Iskaashiga Afro-Carbeed:**

Waxaa hubaal ah in ay Soomaaliya tahay xubin xiriirinysa dadyowga Carbeed iyo kuwa Afrika, kaalin qiima lena kaga jirto wadajirka iyo isbahaysiga Afro-Carbeed. Soomaaliya waa dawladdii soo bandhigtay fikradda isku imaadka Madaxda Carbta iyo Afrika, una dagaal gashay sidii ay u hirgeli lahayd fikraddaasi si looga baxo iskaashiga ku kooban erayada iyo niyad wanaagga.

Ka dib shirkii Madaxda Carbeed ee Rabbaad, Madaxweynaha GSK Jaalle Siyaad wuxuu booqasho ku tegay 14-dooladood oo ku yaalla dhexdhexaadka iyo galbeedka Afrika, booqashadaas oo qaadatay muddo ka badan bil iyo badh, wuxuu Madaxweynaha GSK kala dooday Madaxda Dawladahaas sidii loo xoojin lahaa wadajirka dadyowga Afrika iyo Carabta. Madaxda Afrikana waxay arrintaas ku aqbaleen sacabba furan iyagoo la dagaalgelaya garabna siinaya dadaalka ay samaynayso Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya.

Shirkii Ururka Midowga Afrika ee lagu qabtay bishii Juun 1974 Magaaladatan Muqdisho, wuxuu kaalin weyn ka qaatay dooddii ku saabsanayd xiriirka walaalnimo ee dhex yaalla dadyowga Carbta iyo Afrika, Madaxtinnimada J.D.S. ee UMA sannadkii 1974-75 waxay guula badan ka soo hooysay is-afgaransiinta dadyowga Afrika, gaar ahaan, iyo isbahaysiga **Afro-Carbeed, Guud ahaan.**

## SAAXIIBTINNIMADA SOOMAALIYA IYO SOOFIYEETIGA:

Midowga Soofiyeeti iyo Soomaaliya waa laba waddan oo Jaallayaal ah, ujeeddooyin iyo himilooyinkooduna ay tahay in maalin maalmaha ka mid ah ay dunida ka tirtirmaan gumeysi-

ga, gumeysiga cusub, hantigoosiga iyo isku dulnoolaashaha, in dunidoo dhan ay gaarto barwaaqo, horumar, nabad iyo hantiwadaag.

Midowga Soofiyeeti iyo Soomaaliya waa laba Ummadood oo isku saf kaga jira dagaalka lagala soo horjeedo gumeysiga, gumeysiga cusub, imberyaaliyadda caalamiga ah, midabgumeysiga nooc kastaba ha ahaadee iyo hantigoosiga, taas oo ah daxalkii ay qoreen abwaannadii xoogsatada dunida ka xoreeyey dhiigmiiradka;. Sidaa awgeed Midowga Soofiyeeti iyo Soomaaliya waxay garab taagan yihiin dhaqdhaqaayada gobannimadoonka ee dunida iyo la dagaallanka imberyaaliyadda dunida.

Waxaan ognahay in Midowga Soofiyeeti uu yahay dawladdii ugu horreysay ee hirgalisay hantiwadaagga cilmiga ku dhisan. Kacaankii Midowga Soofiyeeti ee 1917 oo uu horseedka ka ahaa Jaalle Lenin wuxuu caddeeyey ujeeddooyinka dhiigmiiradka imberyaaliyadda dunida, dhaqdhaqaaqyada dunida oo idilna wuxuu u furay waddo cusub oo dhiirrigelin weyn galisay, waddadaasoo si la taaban karo u dareensiisay shaqaalaha dunida in ay xukunka kala wareegaan hantigoosiga dushooda ku nool, oo ay samaystaan bulsho ku dhisan dimoqraadinimo, xurriyad, sinnaan, midnimo iyo shaqo.

**Xiriirka J.D.S. iyo M. Soofiyeeti 1961-69:**

Siyaasadda Midowga Soofiyeeti waxaa saldhiggeedu yahay in ay garab taagan tahay Jaallayaal dhab ah ay ka dhiganayso dawladaha ka soo horjeeda dagaalkana kula jira gumeysiga cusub iyo imberyaaliyadda, sidaa awgeed dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka Soomaaliyeed oo dagaal qaraar la soo galay gumeystaha Talyaaniga iyo Ingiriiska, ka dib markii ay xornimadooda ka soo dhacsadeen gumeytayaasha, ayey xiriir saaxiibtinnimo la yeesheen dawladda M. Soofiyeeti 1960kii.

Ka dib markay Soomaliya qaadatay xornimadeeda, waxaan ognahay in gumeystaha siyaasaddiisa ay tahay inuu dad ku abuurto meeshuu ka tegayo dadkaasoo u fulinaya ujeeddooyinka gumeystaha, kaasoo ah gumeystaha cusub. Haddaba wajigee buu yeehsay xiriirkii saaxibtinnimada ee midowga Soofiyeeti sagaalkii sannadood ee dawladaha dibusocodka ihi maamulayeen? Midowga Soofiyeeti



isagoo fulinaya siyaasaddiisa ku dhisan in uu si niyad-sami ah u caawiyo Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika, iyo inta dagaalka kula jirta imberyaaliyadda caalamiga ah ayey Midowga Soofiyeeti sagaalkii sannadood si isdaab joog ah noo caawinaysay. Haddaan soo qaadanno mucaawinadii isdabajoogga ahayd ee Midowga Soofiyeeti u fidiyey waddanka Soomaaliya 9kii sanno waxaa ka mid ah:

1. Dhisitaanka xagga Gaashaandhigga, iyo xoogga Dalka Soomaaliyeed.
2. Tababarro cilmi ah oo kala geddisan si tacliinta ardada Soomaaliyeed loo gaarsiiyo heer Jaamicinnimo, taasoon ognahay in Jaamiciyiinta Soomaaliyeed intooda badani ay Midowga Soofiyeeti wax ku soo barteen.
3. Mashaariicda Horumarinta ah ee midowga Soofiyeeti 9kii sanno dhisay waxaa ka mid ah: Dekadda Berbera, Dugsiga Sare ee Bannaadir, Raadiyo Muqdisho, Warshadda Hilibka ee Kismaayo, Warshadda Kalluunka ee Laas-Qoray, Warshadda Caanaha ee Muqdisho, Isbitaalada Sheekh iyo Waajid, Madbacada Qaranka . . . . . iwm.

Nasiibdarro siyaasaddii foosha xumayd ee ay dalka ku hoggaaminayeen dawladihii dabadhilifka u ahaa isticmaarka waxay si weyn u dhaawacday hirgelinta barnaamijyadii Midooga Soofiyeeti ay ka qaban lahayd Waddankayaga (Barnaamijyadii Jilib iyo Tog-Wajaale), dhanka kale waxaa faa'iido weyn noqotay in aynu la xiriirsannay bulshada caafimaadka qabta ee ku dhaqmaysa habka hantiwadaagga, taasoo keentay in Ummaddayadu ka xorowdo fikradaha khaladka ah oo ay ka faafiyaan hantigoosatadu nidaamka hantiwadaagga ah, isla markaana waxa aynu awood u yeelannay in dadkayagu iskood u bartaan mabaadi'da ay isku dubbarideen abwaannadii hantiwadaaggu. Guud ahaan haddii aynu isgarab dhigno wax wada qabsigii ka dhexeeyey Soomaaliya iyo dawladaha hantigoosadka iyo dhinaca kale: Soomaaliya iyo Midowga Soofiyeeti intii ka horreysay Kacaanka, waxaynu arki karnaa hantigoosatadu in ay kobcinaysay sidii Soomaaliya u noqon lahayd dal horumrintiisu ku dhisan tahay habka hantigoosiga, waayo waxay

xoojinayeen sidii ay u abuuri lahaayeen maalqabeen ku xiran monoboliga caalamiga ah.

Midowga Soofiiyeeti ujeeddadiisu waxay ahayd in mucaawanada dawladda Shaqaaluhu hoggaaminayo ay gaarto dadweynaha, asaasna ay ugu noqoto dhalashada shaqaalaha iyo kobcinta xubnaha taabanaya danaha guud ee bulshada (Warshadaha, Dugsiyada, Isbitaallada, Warfaafinta iwm). Taasina waxay dhaxalsiisay in markii Kacaanku dhashay Shaqaalaha Soomaaliyeed intiisa badani ka shaqeynayeen meelaha ay noo dhiseen Midowga Soofiyeeti.

**Saaxiibtinnimada Midowga Soofiyeeti iyo JDS wixii ka dambeeyey Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii.**

Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii wuxuu Ummadda Soomaaliyeed u horseeday dhabbaha cusub, dhabbaha caddaaladda, sinnaanta, xornimada iyo horumarka deg-degga ah, waddadaas oo ah waddada hantiwadaagga. Baaqii Macalliminta hantiwadaaggu wuxuu ahaa «Xoogsatada Adduunkow dhammaantiin midooba». J.D.S. iyo M. Soofiyeeti iyagoo ka wada tilmaan qaadanaya, rumeysanna baaqaa, isla markaana si cilmi ku dhisan u dersinaya xaaladda taariikhiga ah ee dunidu maanta marayso, waxay sii xoojiyeen xiriirka labadooda dal ka dhexeeya. Si xoojintaasu u gaarto xubin kasta ee ka mid ah xubnaha labada bulsho (Midowga Soofiyeeti iyo Soomaaliya) waxaa si joogta ah la isu dhaafsadaa xiriir ah heer sare, heer dhexe iyo heer urureed intaba, waxaynu xusuusan nahay booqashadii Jaalle Siyaad uu ku tagay waddanka Midowga Soofiyeeti 1971kii, iyo booqashadii Jaalle Bodgoorni uu ku yimid waddankayaga iyo waxyaabihii ka soo baxay oo uu ugu weynaa heshiiskii mashruuca biya-xireenka FAANOOLE, kaasoo marka uu dhammaado waraabin doona 8 kun oo Hektar, lagana jeexi doono kanaalooyin dhererkoodu gaarayo ilaa 50 Km, qeybta ugu horreysa mashruucaasna waxay isticmaal galeysaa sannadka 1976ka. Haddaba sida la wada ogsoon yahay labada ruux oo walaalaha ah isku mabda'a ah meel u wada socda, waa wax caadi ah in ay iskaashadaan oo ay iska weheeshadaan cadawga, laakiin had iyo jeer waxaa dhacda in aysan isku tabar noqon oo ay kala awood iyo karti badnaadaan.

Midowga Soofiyeeti waa dawladdii ugu horreysay ee dunida ka hirgelisay habka hantiwadaagga, ilaa iyo imminkana ma jirto dawlad hantiwadaag dhistay oo aan hiil iyo hoo ka helin Midowga Soofiyeeti, J. Hantiwadaagga ee M. Soofiyeeti ee uu hoggaaminayo Xisbigii uu tiirarka u aasay halyaygii weynaa «Jaalle Lenin», waxay si Jaallannimo dhab ah isu garab taageen halganka Kacaannimada ee uu Jaalle Siyaad ku hoggaaminayo Ummadda Soomaaliyeed. Waxayna noo fidiyeen gacan walaalnimo oo aan marna la halmaami karayn; xagga dhaqaalaha, abuurista Kaadarka iyo daafaca miraha kacaanka, gaar ahaan waxaan la halmaami karayn tan ay maanta noo fidiyeen oo noo fududeysay hawl aan dhibaato weyn kala kulmi lahayn. Sidii uu yiri Jaalle Siyaad: «Saaxiibkaaga runta ah waxaa la bartaa marka dhibaatadu ku hayso». Gacanta maanta uu noo fidiyayna waa mid aan cidna ka qarsoonayn, waxayna dhan walba kaga xirnaan doontaa taariikhda «Dejinta» oo kumanyaal sano la darsin doono, dadyow fara badanina ka tusaale qaadan doonaan. Waxaa hubaal ah in aynu nahay kuwa as taahila abaalka na loo galay. Jaallee Siyaad wuxuu yiri: «Waxaynu nahay Ummad nasab ah, waxanu nahay Ummad sharaf leh, karaama leh, dad aadaminnimo leh, waxaa weeye xaq qofkii wax inoo tara inaan u abaal gudnaa markii ay inoo marto».

Abaalka qura oo ay inooga baahan yihiin dadka Midowga Soofiyeeti iyo dhammaan dunida horusocodka ahi waxaa weeye in aynu hirgelinno mabaadi'da xalaasha ah ee hantiwadaagga ah, dhankayagana ka xabaalno hantigoosiga bakhtiyaya, iyo ku taageeridda nabad ku wada noolaashada. Isla markaa waxaa waajib nagu ah in aynu xusuusanno muujinnana halhayskii ahaa «Ma shan geed baan kaa sheegaa, mise shan halaad baan ku siiyaa».

Gebagebadu waxay tahay in saaxiibtinnimada ka dhexaysa JDS iyo M. S. ay tahay mid qota dheer leh, salkana ku haysa mabda'a iyo danaha isku mid ah. Sida awgeed weligii waa jiri doonaa waana sii xoogaysan doonaa. Waxaana hubaal ah in qof kasta oo Soomaali ah ee ku fikiraya maskax caafimaad qabta uu fiira gaar ah u yeelan doono sifaadka lagu kala garto saaxibkayaga runta ah iyo kan kale, ayagoo mar walba si cilmi ku dhisan u darsinaya uguna xisaabtamaya xiriirka aynu

dadyowga dunida la leenahay, waxtarka iyo ujeeddooyinka mucaawanaadka ay na siiyaan, iyo cid walba abaalka ay naga astaahisho.

## ISBAHAYSIGA DALALKA HANTIWADAAGGA AH

Isbahaysiga ka dhexeeya dalalka hantiwadaagga ma aha mid lagu soo koobi karo sheeko yar ama maqaalad ee waa ka weyn tahay. Balse wax yar aan tilmaanno, marka hore waxaa lagama maarmaan ah in la sheego dalalka hantiwadaagga ah hadda markii laga reebo Afrika. Dalalka hantiwadaagga ahi waa 14 dal oo isugu jira Yurub, Aasiya iyo Laatiin Ameerika. Dadkuna wuxuu dhan yahay meel markii saddex meelood loo qeybsho dadka adduunka ku nool.

Wada jirka iyo xiriirka hantiwadaaggu wuxuu billowday markii ay dhalatay dawlad hantiwadaag ahi 1917kii. Markii ay raayeen xoogsatadii Rushkii, waxay billaabeen inay kiciyaan shaqaalihii ku noolaa adduunka kale, weliba kuwii ku noolaa dalalka Yurub, waxaana dhexmartay xiriir joogta ah. Middaasna waxaa markhaati u ah 1918 shaqaalihii Jarmalka waxay sameeyeen dabbaaldeg ay ku xusayeen Kacaankii Oktoobar 1917kii curtay. Waxayna maqaalad ku qoreen wargeyskii la oran jiray «Roote Faane».

Waxay ku qoreen «Ha waaro Kacaanka Oktoobar 1917». Shaqaalihii dalalka Talyaaniga, Faransiiska iyo Ingiriiska waxay xoojiyeen dagaalkii ay wadeen, waxayna xiriir joogta ah la yeesheen dawladdii hantiwadaagga ahayd waxayna ku taageereen cod, ciidan iyo maal intaba, markii 14 dawladood ay ku soo duuleen dalka M. Soofiyeeti si loo celiyo Kacaankii dhashay. Xiriirkii weynaa ee dhexmaray Kacaankii Oktoobar iyo shaqaalihii adduunweynaha, wuxuu dhaliyey Ururro hantiwadaag ah, 1918 ilaa 1921 inta ka dhex leh waxaa ururradaasi ka abuurmeen dalal badan oo ay ka mid ahaayeen Jarmalka, Denmark, Ingiriiska, Talyaaniga, Faransiiska, Beljiya, Holan iyo kuwo kale. Dalal kale oo ka mid ahaa kuwii la gumeysan jireyna waxaa ka billowday kooxo Maarkisiste ah. Kongreeskii labaad oo lagu magacaabi jirey «Komenterna» oo la qabtay 1920 waxaa ka soo qeyb galay kooxo Markasiste ahaa oo ka kala yimid: Hindiya, Indonesiya, Turkiya, Kuuriya iyo Iraan iwm.

Intaas aan ku daayo isbahaysigii hore ee dhexmaray dawladdii ugu horreysay hantiwadaagga iyo shaqaalihii kale ee ku noolaa dalalka kale. Dawladdii labaad ee hantiwadaagga ahayd waxay dhalatay 1921, oo waa Mangoliya, waxayna ku dhalatay taageeradii iyo isbahaysigii dawladdii hantiwadaagga ahayd ee Midowga Soofiyeeti. Markii Kacaanku ka dhashay Mangoliya waxaa ku soo duulay ciidamo ka yimid dibusocodka shina iyo Jabbaan. Hase yeeshee waxaa Kacaankii badbaadiyey ciidamadii Midowga Soofiyeeti oo loo yaqaan «Ciidanka Guduudan». Midowga Soofiyeeti wuxuu ka gargaaray Kacaankii Mangoliya xagga dhaqaalaha, dhaqanka iyo siyaasadda intaba. Markii laba dal uu ka hirgalay hantiwadaaggu, hantigoosadkii u bartay inuu nuugo dhiigga dadka intiisa badan, wuu u adkaysan waayey dhibihii ka soo baxayey labaadaas dal iyo dadkii horusocodka ahaa ee ku noolaa dalalkii hantigoosiga iyo kuwii la gumeysanayeyna billaabeen dagaal. Arrimihii dagaalka dhaliyeyna waxaa ka mid ahaa: in la burburiyo oo dib loo celiyo dalalka hantiwadaagga iyo shaqaalihii ka dagaallamayey dalalkooda oo rabay inay dhaliyaan hantiwadaagga cilmiga. Nasiib wanaag dhiigmiiradkii fashiistada ahaa kuma guuleysan dagaalkii iyo tabcooyinkii ay rabeen inay ku jebiyaan horusocodka ee ayagii baa la jebiyey. Markaas waxaa dhashay dawlado kale oo hantiwadaaga, oo ka dhashay Yurubta dhexe iyo midda bari, Aasiya iyo Laatiin Ameerika.

Marka waxaa isweydiin leh ayaa dhaliyey sideebayse ku dhasheen? Waxaa dhaliyey ururradii hantiwadaagga ahaa oo horay uga dhisnaa dalalkaas iyo dadweynihii horusocodka ahaa markii la qabsaday dhulkoodii dagaallamay, markii dagaalkii ay ku adkaadeenna dhiseen dawlado hantiwadaagga.

### Waa maxay isbahaysiga ka dhexeeya dalalka Hantiwadaagga.

Dalalka hantiwadaagga ah xiriir adag oo dhinac kasta tabanaya baa ka dhexeeya sida dhaqaalaha, siyaasadda dhaqanka iyo xoogga mileteriga ahba. Markaa waxaa loo baahan yahay in mid mid loo caddeeyo arrimahaas kor ku qoran. Dawladdii ugu horreysay dhisidda hantiwadaagga iyo kuwii ka dib dhashay waxaa dhexmaray xiriir siyaasadeed oo go'aanno lagu gaaray.

**Isbahaysiga Dhaqaalaha:**

Isbahaysiga xagga dhaqaalaha dalka hantiwadaagga aad buu u weynyahay mana aha mid qarsoon ee waa mid qof kastaa ogyahay. Dalal ka mid ah hantiwadaagga waxay ku heshiiyeen in la dhiso urur dhaqaale oo ka dhexeeya dalalka hanwadaagga, dalkii doonaya. dalalkii gaaray heshiiskaas waxay ahaayeen: Bolgaariya, Hangari, Bolanda; Rumiiniya, Midowga Soofiyeeti iyo Jogoslofaakiya. Sebtember 1950 waxaa ku soo biiray Jarmalka Demoqraadiga, Juunyo 1962 waxaa ku soo biiray Mangooliya, 1972 waxaa ku soo biiray Kuuba. Qodobbadii loo sameeyey waxaa ka mida:

b) Waa in la sameeyaa Guddi u qeybsan iskuna xirta qorshaynta iyo horumarinta xoolaha dadweynaha hantiwadaagga.

t ) Waa in la xoojiyaa lana fidiyaa xoogga korontada iyo maalka laga helo dhulka hoostiisa (Minierals).

j ) Waa in la xoojiyaa lana badiyaa warshadaha culculus iyo kuwa fudfudud, welibana kor loo soo qaadaa dalalka ay ku yar yihiin.

x) Waa in aan loo diidin dalkii hantiwadaag ah oo raba inuu ka soo qeybgalo.

kh) Waa in si sinnaan ah looga qeybgalaa loona maamulaa oo aan loo eegin sida loo kala dhaqaale weynyahay ama loo kala waaweyn yahay.

d) Isbahaysiga ururka dhaqaalaha hantiwadaaggu waa inuu qeyb weyn ka qaataa taageerada dalalka soo koraaya iyo kuwa u dagaallamaya gobannimadooda.

r) Waa in la sameeyaa Guddi guud oo kor ka ilaaliya sidii wax u socdaan ama ay u kala fulayaan arrimahaas ku saabsan dhaqaalaha.

Lama koobi karo xeerka u dhigan ururka dhaqaalaha ee dalalka hantiwadaagga. Sida la wada ogsoonyahay dalalka hantiwadaagga kuma dhacdo dhibaatooyinka ku dhaca hantigoosadka iyo kuwa soo koraya oo kaga dhaca xagga dhaqaalaha, maxaa yeelay wax walba way qorshaysan yihiin waa wax meel keliya laga maamulo. Midda kale markii dal ka mida iyaga uusan samaysan wax uu u baahan yahay, wuxuu ka soo qaataa dalka sameeya, wuxuuna ugu beddelaa wax kale oo ayan sameysan dalkaasi. Haddii aan ka soo qaadanno dhinac kale isbahaysiga xagga dhaqaalaha, Midowga Soofiyeeti waa dalkii ugu horreeyy dhisidda hantiwadaagga cilmiga, waana dalka ugu dhaqaale weyn. Marka waxaa ku aaddanaatay inay taageeraan dalkii kasta oo qaata habka hantiwadaagga. Saas awgeed waxay midawga Soofiyeeti dalalka hantiwadaagga ah ka dhisaan wershedo badan oo ay ka mid yihiin midda korontada, warshadda kalluunka, qalabka beeraha, warshadda sameysa alaabta lagu dhiso guryaha iwm. Lama qiyaasi karo isbahaysiga xagga dhaqaalaha dalalka hantiwadaagga, balse aan ku joojiyo intaas.



**Xagga Gaashaan Dhigga:**

dafacaadda miraha iyo guulaha habka hantiwadagga iyo ilaalinta xasilloonidda adduunku waxay u bahan yihiin isbahaysi. sidaas owgeed dalalka hantiwadaaggu waxay leeyihiin Ciidan ka dhexeeya oo lagu magacaabo «Ciidanka Waarso». Sida la wada ogyahay dagaalkii 2aad ee adduunka markuu dhammaaday oo laga adkaaday fashiistadii iyo tabtii iyo xeeshii gumeystaha iyo imberyaalistaha, waxaa dalalka reer galbeedku sameeyeen Ciidamo ay isku bahaysteen oo loo sameeyey in lagu baaba'sho ama lagu curyaamiyo xoogagga horusocodka ah. Ciidamadaas dibusocodka reer galbeedku sameysteen waxaa ka mida «Naato» iyo kuwo kale.

Xooggaa isbahaysiga dalalka hantiwadaaggu waa ka duwan yahay kuwa reer galbeedka oo waxaa loo sameeyey in lagu ilaaliyo nabadgelyada adduunka, taasna waxaa noo caddeynaya xeerka u dhigan oo ah sidan:

1. Waa in la xoojiyaa lagana ilaaliyaa hantiwadaagga cadawga dibadda iyo midka gudaha.

2. In la is hortaago cadowga bani aadamka, oo ah gumeystaha, hantigoosadka, imberyaaliyada, fashiistaha iyo weerarradooda.

3. In la taageero dadka u dagaallamaya gobannimadooda dhinaca xoogga.

4. In si sinnaan ah looga qeybgalo Ururka Waarso.

5. In la is hortaago haddii dawladi ama dawlado ay damcaan inay billaabaan dagaal weyn sida kii 2aad oo kale.

Isbahaysigaas xoogga Waarso, waxa run ah inay muujiyeen, qabteenna qodobbadaas oo dhan, waxaana dhab ah haddaanu jirin ururkaasi maantay adduunku inuu ahaan lahaa si kale. Isbahaysiga hantiwaadaagga xagga ciidamada waxay dhalisay guulo waaweyn oo waxaa markhaati u ah: Markii dagaalka lagu soo kacshay Kuuriya, Fiyetnaam, Kuuba iwm.

Ninna ma mooga taageerada weyn oo isbahaysiga ciidamada dalalka hantiwadaaggu ay ka geysteen goobahaas.



**XAMAR — 1976**

**Waxaa lagu daabacay Madbacadda Qaranka**